XISAAB

Tilmaame Bare
Fasalka 2aad

XISAAB

Tilmaame Bare
Fasalka 2aad

XISAAB   Tilmaame Bare   Fasalka 2aad

JUMHURIYADA DIMOQRAADIGA FADARAALKA EE ITOOBIYA
WASAARADDA WAXBARASHADA

MOE

JUMHURIYADA DIMOQRAADIGA FADARAALKA EE ITOOBIYA
WASAARADDA WAXBARASHADA

Birr 28.10

XISAAB

TILMAAME BARE

Fasalka 2^{aad}

Qorayaal, Tafatirayaal, Ansixiyayaal

Daa'ud Aadam C/Laahi

Qiimeeyayaal

Axmed Saalax Nuur

Axmed Yuusuf Nuur

Sayid Cismaan Caateeye

Jumhuriyada Dimoqraadiga Fadaraalka Itoobiya

Wasaarada Waxbarashada

STAR

Developed and Printed by

Tusmada buuga

CUTUBKA **1**

ISUGEYNTA IYO KALAGOYNTA TIROOYINKA IDIL ILOO 100

CUTUBKA **2**

ISKUDHUFASHADA IYO ISUQAYBINTA TIROOYINKA IDIL ILAA 100

CUTUBKA ③

CABBIRAADDA 59

CUTUBKA ④

BARASHADA JAJABYADA 66

CUTUBKA ❺

CUTUBKA ❻

CUTUBKA ❼

CUTUBKA **8**

WAQTIGA

CUTUBKA **9**

XOG-URURINTA IYO HABYAALKA

Cutubka 1aad: ISUGAYNTA IYO KALA GOYNTA TIROOYINKA IDIL ILAA 100

Hordhac

Ardaydu waxay fasalkii 1aad ku soo barteen tirooyinka idil ee ilaa 100 tirintooda iyo tirooyinka ilaa 20 isugayntooda iyo kala goyntooda. Sidaa ay tahay tirooyinkan qoraal ahaan inay ku cadeeyaan, soona xusuustaan dhibcihii aasaaska ahaa maadaama ay dhib ku tahay. Sidaa darteed baruhu isagoo naqtiimaya kuwan in lagu billaabo ayaa looga baahan yahay. Qoryo yar yar, waxyaabo la taaban karo, xariiqa tirada iyo waxyaabo lamida ah adiga oo isticmaalaya naqtiinka halkaas ka sii wad. Intaa waxaa dheer adigoo siinaya su'aalo isugayn ah iyo kuwo kalagoyn ahba waa inaad qiimaysaa fahankooda. Cutubkan tirooyinka idil ilaa 100 sida ugu haboon inay u bartaan markaad samayso;

Intaa waxa dheer oo aad barow ku bartaa isugaynta tiro qaadashada leh iyo kalagoynta amaahashada leh.

Natiijooyinka Baris - Barasho

Barashada casharkan ka bacdi ardaydu waxay awood u yeelan karaan inay:-

- Tirooyinka idil ilaa 100 ay tirin karaan, akhriyi karaan, qori karaan kadibna ay isbarbar dhigi karaan.

- Tirooyinka idil ee wadartoodu ka hoosayso 100 ay isugeeyaan iyagoo hal qaadanaya iyo hal qaadasho la'aanba.

- Tirooyinka hal godlayda ah iyo kuwa laba godlayda ah ayay kal goyn iyagoo amaahanaya iyo amaahasho la'aanba.

- Waxay kala sooci xidhiidhka ka dhexeeya isugaynta iyo kala goynta.

- Weedh-xisaabeedyo (masalooyin) ayay ka jawaabi iyagoo isticmaalaya isu gayn iyo kala goyn.

kaabayaasha waxbarasho

Cutubkan si aan u barno ardayda kaabayaasha soo socda aad ayay faa'ido inoogu leeyihiin.

- Isku dhufashooyin laba midab leh (mid godrugeedka kowle ah iyo mid god rugeedka tobanle ah)
- ulo (qoryo) yar yar oo min 10 u xidhan iyo kuwo daadsan (fur fur ah).

- Shaxannada falaadha tirada
- Abaakas (Abacus)
- Jaarti lagu sawiray shaxda qiima rugeedka
- Iyo waxyaabo kale oo faa'ido inoo leh oo ina caawin kara.

1.1 NAQTIINKA TIROOYINKA IDIL EE ILAA 100

Xiisadaha loogu talo galay casharkani waa 4 xiisadood

Ujeedooyinka gaarka ah ee casharka

Casharkani Marka uu dhammaado kadib Ardaydu waa in ay;-

- *Tirin karaan, Akhrin karaan isla markaan qori karaan, Tirooyinka idil ee ilaa 100.*

- *Shaxanka god rugeedyada ayay kala siin qiimaha god-rugeedka koowaadka iyo Tobnaadka.*

- *Tirooyinka idil ee ilaa 100 ayay isbarbardhigi karaan iyaga oo adeegsanaya calaamaddaha$<$,$=$, $>$*

- *Tirooyinka inay sida ugu haboon falaadha tirada dusheeda ugu safaan ayay samayn.*

Ereyada Muhiimka ah

Tiro ahaan, qoral (eray) ahaan, god rugeed, tirada kahoreeyaha ah, tirada kadanbeeyaha ah, wuu ka badan yahay, ama wuu ka yaryahay abaakis (Abacus).

Hordhac

Qayb-hoo saadkan ee cutubka ardaydu casharadii ay ku soo barteen fasalkii 1^{aad} ayay ku naqtiimi. Ardayda kartidooda akhrinta iyo qorida sidii ku haboonayd maadaama aanay kobcin, nakhtiinka u horeeya waa inaad ahmiyada saartaa tirooyinka ilaa 100 tirintooda, akhrintooda qoridooda iyo isbarbar dhigidoodaba.

Waxqabadyada baris-barasho

Marka ugu horeysa kuwa in la naqtiimo ay tahay waxa ugu horeeya god rugeedyada. Tirooyinka sida ay tahay in la isugu aadiyo si loo fahansiyo god rugeedyada in la fahamsiiyo ayaa loo baahan yahay.Tirooyinka dhexdooda tirooyinka ku yaal haddii god rugeed yada laga badalo, qiimahooduna inu ka duwanaan si la fahamsiiyo tusaalayaal badan waa in la siiyo ayaa loo baahan yahay tusaale 345 dhexdeeda 4tu waxay ka muqataa godka tobnaadka, sidaa darteed qiimaheedu waa 40.

435 dhexdeeda 4tu waxay ka muuqataa god-boqlaadka 100 sidaa awgeed qiimeheedu waa 400.

Tirooyinka marka aan qorayno astirooyinka aan adeegsanaa waa 0, 1, 2, … 9. Tiro idil oo laba god lay ahi god-rugeedkeedu wuxuu ka kooban yahay godka-tobnaadka iyo godka- koowaadka.

Tusaale:- 38 tiro laba godlay ah maadaama ay tahay, 8 waa godka-koowaadka, 3duna waa god rugeedka tobnaadka. Taasina waxay la macno tahay 38, in ka kooban tahay. 3 tobnaad iyo 8 koowaad

Mar 3[aad] dulucda ugu muhiimsan ee ay tahay in la naqtiimaa waa horsanaanta tirooyinka. Ardaydu horsanaanta tirooyinka intay u taxaan, oo ay laba tiro isbarbardhigaan midba inuu ka kale ka badan yahay ama inay isle'eg yihiin si saxan inay u qeexi karaan in la hubiyo ayaa loo baahan yahay.

Tirinta, akhrinta iyo qorista tirooyinka idil ee ilaa 100

1. Tirooyin intaad sabuuradda ku qortid, far ardayda inay akariyaan
2. Kaabayaasha inacaawinaya adigoo isticmaalaya u tiri, kadibna alaabooyinka xaddigooda inay sheegaan waydii.
3. Shaxanka inaga oo adeegsanaya tirooyinka illaa 100 baruhu ha ku dhawaaqo, sidoo kale ardayduna shaxanka dushiisa ha ka calaamadayso (tusaale ahaan tirada dusheeda quruurux tiro le'eg ha saareen)
4. Ardaydu shaxanka 100 dushiisa laba laba tiro intay isku daraan far inay tiriyaan, kadibna shan shan ha u tiriyaan. Hab noocaas ah intaad tirooyinka u kala badbadasho ku tababar ardayda.
5. Inaga oo ka bilaabayna tiro wayn (tusaale ahaan shan shan ka goynayna) kala goynta inaan ka shaqayno waan awoodnaa.
6. Tirada astiro ahaanta laynagu siiyay inay ku qoraan qoraal ahaan, kuwa qoraal ahaanta laynagu siiyayna inay ku qoraan astiro ahaan ku tababar ardayda.
7. Tirooyinka qoraal (eray) ahaanta ama astiro ahaanta ku qoran far inay akhriyaan.
8. Shaxanka 100 dushiisa tirooyinka ku qoran far inay u akhriyaan sida jooga ah iyo sida jiifka ahba.
9. Qorto yar-yar adiga oo adeegsanaya ku tababar ardayda sida loo tiriyo tirooyinka.

Tabaha Qiimaynta

1. Su'aalo afka ah waydii kadibna far ardayda inay akhriyaan tirooyinka ku qoran sabuurada ama looxyada yaryar
2. Laylisyada ku qoran buugga ardayga far inay ka shaqeeyaan.
3. Tirooyinka qoraal (eray) ahaanta laynagu siiyay astiro ahaan ha ku qoreen, sidoo kale kuwa astiro ahaanta laynagu siiyay qoraal ahaan inay u qori karaan ku qiimee.

Jawaabaha laylisyada

Layliska 1

- Ardaydu buugtooda ha ku dul sawireen shaxanka 100 haddii aanay suuro galayna xaashi wayn ama sabuurada ha lagu sawiro.
- Laba, jibaaranah (khaanada) u horeeya 1 ayaa lagu qor.
- Laba laba iyga oo u tirinaya, kadibna shan shan ha u tiriyeen........iwm tirooyinka buugtooda dusheeda ha ku qoreen.

- Laadhuu intaad soo diyaariso ha ku ciyaareen, kadib hal laadhuu iyagoo tuuraya waa inay yeeshaan dhex dhexaadiye, kadib dhaxdhexaadiyuhu markuu laadhuuda tuuro kooxda 1[aad] intay tiriyaan tirada ay tahay ha qoreen. Markaa kadib kooxda 2[aad] ayaa u leh. Intaa kadib kooxda 100 u horgaadha ayaa badisay. Hadaba sida loogu diwaan galin kaarkuna waa sida hoos ku cad

1	2	3	4	5	6	7	8	9	10
11	12	13	14	15	16	17	18	19	20
21	22	23	24	25	26	27	28	29	30
31	32	33	34	35	36	37	38	39	40
41	42	43	44	45	46	47	48	49	50
51	52	53	54	55	56	57	58	59	60
61	62	63	64	65	66	67	68	69	70
71	72	73	74	75	76	77	78	79	80
81	82	83	84	85	86	87	88	89	90
91	92	93	94	95	96	97	98	99	100

b. ka horeeyaha 23 waa 22   j. ka horeeyaha 49 waa 48

t. ka danbeyaha 27 waa 28   x. ka danbeeyaha 69 waa 70

Ficilka 1[aad] ee ikhtiyaariga ah

1. Kaadhadh yar-yar waa in la diyaariyo (dhinac waa inay tiro ahaan ugu qoran tahay dhinaca kalena qoral ahaan)
2. Far ardayda kooxo intay isku qaybiyaan kadibna in ay ciyaaraan.
3. Baruhu amaa hal arday inuu ciyaarsiiyo waan awoodnaa.
4. Hal loox oo yar marka kor loo qaado astiro haddii ay ku qoran tahay, qoral ahaan ha u qoraan, qoral haddii ay ku qoran tahayna astiro ahaan ha uqoraan ama kooxda xubin kamid ah intu soo kaco sabuuradda ha ku qoro.
5. Kooxdii tirooyin badan si saxan uga shaqaysay ayaa badisay.

Layliska 2

kh.   54 konton iyo afar   s.   66 lixdan iyo lix

d.   87 sideetan iyo toddoba   sh.   26 labaatan iyo lix

r.   92 sagaashan iyo laba

Layliska 3

1	2	3	4	5	6	7	8	9	10
11	**12**	13	14	15	16	17	18	19	20
21	22	**23**	24	25	26	27	28	29	30
31	32	33	34	35	36	37	38	39	40
41	42	43	44	45	46	47	48	49	50
51	52	53	54	55	56	57	58	59	60
61	62	63	64	65	66	67	68	69	70
71	72	73	74	**75**	76	77	78	79	80
81	82	**83**	84	85	86	87	88	89	90
91	92	93	94	95	96	97	98	99	100

B. Kuwa farta casku qoran akhriya

T.41, 64, 59, 75 iyo 90

J. Kuwa farta (midabka) buluugga ah ku qoran marka xuruufahaan (erayahaan) lagu qoro.

       31 soddon iyo kow 32 soddon iyo laba 33 soddon iyo saddex

       35 soddon iyo shan 36 soddon iyo lix 37 soddon iyo toddoba

       38 soddon iyo sideed 39 soddon iyo sagaal 40 afartan.......

X. 39, 62, 57, 73, 88.

Kh. Kuwa doogada ah marka qoraal ahaan la qoro.

    16 toban iyo lix , 20 labaatan , 59 konton iyo sagaal, 69 lixdan iyo sagaal,
   74 todobaatan iyo afar, 81 sideetan iyo kow, 94 sagaashan iyo afar , 95 sagaashan iyo shan

1.1.2 Naqtiimidda god rugeedyada

1. Sabuurada intaad tiro ku qorto far ardayda inay akhriyaan tusaale ahaan 64

2. 56 Qoryo yar-yar adoo ardayda la kaashanaya tiriya kadibna qoryaha yar-yar toban toban intay u tiriyaan ha isku xidheen, isla markaana ha qoreen imisa xidhmood oo min toban ah iyo imisa fur-furan (daadsan) ayay noqdeen. 56 = 5 xidhmood + 6 xabbo (daadsan) = 50 + 6

3. Tirooyinka laba godlayda ah ee kor ku xusan adiga oo siinaya far inay ku celceliyaan oo ay ka shaqeeyaan.

4. Adiga oo adeegsanaya shaxanka 100 tirooyinka qiimaha godka- tobnaadku yahay 2 quruurux ha saareen, marka xigtana ha akhriyeen, kadibna buugtooda ha ku dul qoreen.
Markay buugtooda ku dul qorayaan ama sabuurada ku dul qorayaan sidan ha ugu qoraan:-
23 = 2 xidhmood + 3 xabbo

     = 20 + 3 ama.

God Tobnaadka	God-koowaadka
2	3

5. Nidaamkan kor ka muuqda 2da intay ku badalaan 4, 5, 6, 7, 8, iyo 9 far inay ka shaqeeyaan.

6. Ikhtiyaariga 1aad, laba midable (casaanka god rugeedka 10 cagaarkana god rugeedka kow)

Kaabayaasha ina caawinaya (xaashi adag waa laga samayn karaa)

Tusaale

46 = 4 xidhmood + 6 xabbo

= 40 + 6

7. Ikhtiyaariga 2aad Abakus (cabaadhyada midabadoodu inay kala duwanaadaan looma baahna).

Tusaale

46 = 4 xidhmood + 6 xabbo

= 40 + 6

8. Ikhtiyaariga 3aad leebabka loox yar-yareyad loo soo diyaariyey jees jees.

```
         2          5
    Godka      Godka
    tobnaadka  kowaadka
```

25 = 2 xidhmood + 5 xabbo

= 20 +5

2 iyo 5 godkooda haddii laysku badalo maxaa isbadel ah oo iman kara?

Tabaha Qiimaynta

4. Su`aalo afka ka waydii ikhtiyaariga 3aad imtixaan afka ah aad ayuu ugu haboon yahay.

5. Far inay ka shaqeeyaan laylisyada ku qoran buugga ardayga.

6. Iyadoo la isticmaalayo shaxanka god rugeedka waa lagu qiimayn karaa ardayda.

Jawaabaha laylisyada

Layliska 4^{aad}

Tirooyin		Godka Tobnaadka	Godka Koowaadka
Tiro ahaan (astiro)	**Qoraal ahaan**		
38	Soddon iyo **siddeed**	3	8
43	Afartan iyo **saddex**	4	3
97	Sagaashan iyo **toddoba**	9	7
75	Todobaatan iyo shan		
56	Konton iyo **lix**	5	6
87	Siddeetan iyo **toddoba**	8	7
13	Sagaashan iyo saddex	1	3
81	Siddeetan iyo **kow**	8	1

1.1.3 Isbar bardhigida tirooyinka

Ardaydu markay isbar-bardhigaan tirooyinka xaqiiqooyinkan ha adeegsadaan:-

b. Tirada laba godlayda ahi way ka badan (weyn) tahay tirada hal godlayda ah. Tusaale $13 > 9$

t. Labada tiraba hadii ay yihiin 2 godlay, marka hore waa inaan isbarbardhignaa godka-tobnaadka. Qiimaha godka-tobnaadka tiradii badata ayaa ka badan (weyn) tirada kale. Tusaale $64 > 57$

j. qiimaha godka-tobnaadka isku mid haddii uu noqdo godka- koowaadka ayaan

isbar-bardhigaynaa. tusaale $64 > 62$

Jidadkan soo socda ayaa lagaga shaqayn karaa.

1. Sabuurada dusheeda falaadha tirada intaad ku sawirtid tirooyin isbarbardhig oo tus tusaale 9ku 7da dhanka midig maadaama uu ka xigo $7 < 9$
   Tusaale $7 > 3$ waayo 7^{du} 3^{da} dhanka midig ayay ka xigtaa

2. Laba tiro marka lays bar-bardhigayo qiimaha ee tirada hore haddii uu ka bato (weynaado) godka-tobnaadka ee tirada kale, tirada hore ayaa badan (weyn). Qiimaha godka-tobnaadka haddii ay isle`eg yihiin waxaan isbar-bardhigaynaa godka-koowaadka.
   Tusaale $43 > 39$ waayo inaga oo adeegsanayna falaadha tirada godka-tobnaadka marka aan isbarbardhigno waxay u muuqanaysaa sidan: $4 > 3$
   Tusaale $67 < 69$ sababtu waa maadama qiimaha godadku tobnaadku ay isku mid yihiin, lntaan adeegsano falaadha tirada markaana waa in aynu isbarbardhigno godka-koowaadka waxayna noqonaysaa $7 < 9$

3. Abaakas inaga oo adeegsanayna inaan isbarbardhigno wuxuu inoo waynu awoodnaa aadiyo aadna wuu u fudud yahay.

Kuurgalid (Qiimayn)

1. Far inay ka shaqeeyaan laylisyada ku qoran buugga ardayga.
2. Su'aalaha layliska su'aalo la mid ah waa la adeegsan karaa.

Jawaabaha Laylisyada

Laylika 5^{aad}

1.   t.   19 $\boxed{>}$ 18   j.   42 $\boxed{>}$ 39   x.   72 $\boxed{>}$ 62

     kh.   68 $\boxed{<}$ 71   d.   13 $\boxed{>}$ 9   r.   24 $\boxed{<}$ 27

     s.   55 $\boxed{>}$ 48   sh.   66 $\boxed{>}$ 53   53 > 49

2.   t. 19, 23, 33, 72, 83   j. 28, 45, 73, 80, 87
3.   t. 62, 55, 47, 45, 38,   j. 88, 72, 60, 57, 39

Layliska 6^{aad}

     b. 15 < $\boxed{17}$ t. 33 < $\boxed{42}$ j. $\boxed{36}$ < 48

     x. $\boxed{39}$ < 72   kh. $\boxed{73}$ > 68

1.2 NAQTIINKA ISUGAYNTA IYO KALA GOYNTA TIROOYINKA IDIL ILAA 20

Tirada Xiisadah: 4

Ujeedooyinka gaarka ah ee casharka

Marka uu barashada casharkani dhamaado kadib ardaydu waxay awoodi doonaan inay:-

- *Laba tiro oo wadartoodu 20 ka yar yahay ay xisaabiyaan iyagoo isticmaalaya sumadaha + iyo −*
- *Laba tiro oo ka mid ah tirooyinka ilaa 20 ay farqigooda xisaabin iyagoo istic maalaya sumadaha "=" iyo "−".*
- *Ka shaqeeyaan weedh xisaabedyo lagaga shaqayn karo isugeynta iyo kalagoynta tirooyinka ilaa 20.*

Erayada Muhiimka ah

Dabarada, gacmaha dabarada, falaadha tirada, weedha isle'egta, Doorsoome.

Hordhac

Cashar hoosaadka cutubkan ardaydu fasalkii koowaad casharadii isugaynta ahaa ee ay ku soo barteen ayay ku naqtiimi.

Waxqabadyada baris-barasho

Hawsha danbe ee xisaabinta ah ee ay qaban doonaan qaybtani maadaama ay aasaas u tahay ardaydu inay sida ugu haboon u fahmaan qaybtana lnay u naqtiimaan aad ayay u haboon tahay. Sidaa darteed tirsimooyinka ilaa 20, sawirada alaabooyinka iyo shaxan buuxinta iyagoo ka shaqaynaya inay naqtiimaan in laga caawiyo ayaa loo baahan yahay.

1.2.1 Isugeynta tirooyinak idil ee wadartoodu gaadhayso ilaa 20

Buugga xisaabta ee ardayga laylisyada lagu siiyay waxaad ugu kordhin kartaa oo isla markana aad naqtiin ahaan ugu sharixi kartaa tabahan soo socda ee kobcin kara aqoontooda isugeynta.

1.   ▱ ▱ ▱ ▱ ▱ ▱ ▱ ▱ ▱ ▱ ▱ ▱

    7 marka lagu daro 5 waxay noqon 12 fahansii ardayda in 12 ay tahay ama layidhaahdo wadarta 7 iyo 5.

    Sidoo kale xusuusi ardayda in tirooyinka 7 iyo 5 la yidhaahdo biirooyin. Intasi kasakow ku dhiiri gali in ay u fiirsadaan in

    $12 > 5$

    $12 > 7$

    $5 + 7 = 12$

2.   Tiro idil oo kasta oo ka duwan eber waxaa loo kala jabin karaa ama loo kala dhigi karaa laba tiroo oo wadartoodu ah tiradaas. Labda tiro waxa loo yaqaanaa gacmaha dabarada tirada. Tusaale gacmaha dabarada tirada 6 ee isugeynta waxaa loo qoraa sidan.

Gacmaha dabarada 6	Gacmaha dabarada ee 7
0 + 6	0 + 7
1 + 5	1 + 6
2 + 4	2 + 5
3 + 3	3 + 4
4 + 2	4 + 3
5 + 1	5 + 2
6 + 0	6 + 1
	7 + 0

Raadinta gacmaha dabrada ee tiradu waxay aradyada ku caawun sidii ay ufikiri lahaayeen. Taasi kasakaw waxay ardayda ka caawin doontaa isugeynta leh tiro qaadasho sidaas darteed ku dhiri gali in ay buuxiyaan gacmaha dabarada tirooyin kala duwan.

3.   Middan waxay la mid tahay faahfaalinta sare. Ardaydu waxay sii kobicnayaan kartidooda isugeynta iyoga oo adeegsanaya walxo la taaban karo sida quruuruxa.

☆☆☆☆☆☆☆☆   ☆☆☆☆☆☆   8 + 6

| ☆☆☆   ☆☆☆☆☆   ☆☆ | ☆☆☆☆ 10 + 4 |

☆☆☆☆☆☆☆☆☆☆   ☆☆☆☆   14

Tabaha qiimaynta

1.   Far ardayda inay ka shaqeeyaan laylisyada ku qoran buugga ardayga. Hababka kor ku xusanna ha isticmaalan.

Layliska 7

Ardaydu quruurux ama qoryo yar yar iyagoo isticmaalaya far inay ka shaqeeyaan.

x.   17   kh.   19   d.   17   r.   19

Layliska 8

Waxaa loo baahan yahay in laga digtoonaado ardaydu marka ay ka shaqoynayaan shaxdan isugeynta si ayna toos tirooyinka shaxda ugu buuxinin. Waayo haddii ay fahmaan sida ay tirooyinku isugu daba taxamayaan waxaa suuroobi karta in ay fikradooda ku koobaan buuxinta uun iyaga oo aan darsiyin isla markaana fahmin xidhiidhka ak dhexeeya natiijada (wadarta) iyo biirooyinka.

+	0	1	2	3	4	5	6	7	8	9
0	0	1	2	3	4	5	6	7	8	9
1	1	2	3	4	5	6	7	8	9	10
2	2	3	4	5	6	7	8	9	10	11
3	3	4	5	6	7	8	9	10	11	12
4	4	5	6	7	8	9	10	11	12	13
5	5	6	7	8	9	10	11	12	13	14
6	6	7	8	9	10	11	12	13	14	15
7	7	8	9	10	11	12	13	14	15	16
8	8	9	10	11	12	13	14	15	16	17
9	9	10	11	12	13	14	15	16	17	18

Baruhu

   $7 + 5 = $ _____
   6 iyo 7 wadartoodu waa imisa?
   9 hadii lagu daro 5 imisa ayay noqonaysaa?
Iyo su'aalo lamid ahba shaxda wuu ka dul su'aali karaa.

Layliska 9

t.

12 13 14 15 16 17 18 19
       12 + 7 = 19

j.

$$3 + 15 = 18$$

x.

$$5 + 4 = 9$$

Layliska 10

Ardaydu iyagoo isticmaalaya dhiska (gidaarka) wadarta isugaynta inay ku tababartaan waan yeeli karaa. Tabtan markay isticmaalayaan baruhu tirooyinka u siinayo waa lnuu labada tiro ee isbarbaryaalba wadartoodu noqotaa midda ku dul qoran.

t.

j.

x.

Layliska 11

1. b. $12 > 9$ t. $13 < 16$ j. $10 < 20$

2. t. $10 < 9 + 6$ j. $16 > 11 + 4$ x. $8 < 3 + 6$

   kh. $10 + 2 < 5 + 8$ d. $10 + 4 = 9 + 5$

Layliska 12

1. b. 18   t. 15   j. 6   kh. 18
2. t. $y = 5$ j. $y = 4$ x. $y = 0$
3.

x	6	9	12	10	14
x + 5	11	14	17	15	19

4.

x	6	7	8	13
y	13	9	11	0
x + y	19	16	19	13

1.2.2 Naqtiimidda Habka xisaabinta kala goynta ee tirooyinka idil ilaa 20

1. Falaadha tirada adigoo isticmaalaya kala goynta inaad barto waad kartaa.
   Tusaale 16 – 7

0 1 2 3 4 5 6 7 8 9 10 11 12 13 14 15 16 17

Sidaa darteed 16 – 7 = 9

2. Waxaa dhici karta in iyada oo aan la adeegsan falaadha tirada ay ardayda qaarkood u dhib yar tahay in ay dib u tirin kaga shaqeeyaan kalagoynta. Laga gooyaha inta ay qoraan ayey lagooyaha in le'eg hal hal inta ay tiriyaan dib u socdaan. Tirada u danbaysa ee ay tiriyaan waxay noqon faraqa.
   Tusaale: 15 – 6

        15   14   13   12   11   10   9

   Sidaas darteed 15 – 6 = 9

3. Habka kale ee lkhtiyaariga ahina waa iyada oo al adeegsanayo shaxda isugeynta tusaale kalagoo 17 – 9
   Shaxda isu gaynta dusheeda sida ka muuqata 9 + 8 = 17sidaa darteed
   17 – 9 = 8 sidoo kale 17 – 8 = 9
   Sida looga shaqaynaya:-ardaydu tirada lagooyaha ah intay ka soo bilaabaan dhinacjiif ha u sacdeen ilaa ay ka gaadhayaan tirada laga gooyaba ah kadibna kor jog ahaan markay u socdaan tirada ugu danbaysa ee ay helaan waxay noqon faraqa. Waa in sidaas loo fahansiiyo ardayda.

+	0	1	2	3	4	5	6	7	8	9	10
0	1	2	3	4	5	6	7	8	8	8	10
1	1	2	3	4	5	6	7	8	9	10	11
2	2	3	4	5	6	7	8	9	10	11	12
3	3	4	5	6	7	8	9	10	11	12	13
4	4	5	6	7	8	9	10	11	12	13	14
5	5	6	7	8	9	10	11	12	13	14	15
6	6	7	8	9	10	11	12	13	14	15	16
7	7	8	9	10	11	12	13	14	15	16	17
8	8	9	10	11	12	13	14	15	16	17	18
9	9	10	11	12	13	14	15	16	17	18	19
10	10	11	12	13	14	15	16	17	18	19	20

4. Ardaydu shaxda isugaynta iyagoo isticmaalaya amaba aan isticmaalayn far lnay ka shaqeeyaan noocyadan soo socda.

Tusaale 1

$19 - \boxed{} = 7$ (tani markay ka shaqaynayaan marka hore haddii ay ka shaqeeyaan isugeyntan

$7 + \boxed{} = 19$ waxa suurtawda in ay u dhib yaraato

Tabaha Qiimaynta

1. Weydii su'aalo kala goyn ah oo ay kaga shaqeeyaan iyaga oo adeegsana ya falaadha tirada ama dib u tirinta.

2. Tusaale 2 shaxda kala goynta.

Ardaydu markay isticmaalayso shada kala goynta safka u horeeya ee jooga ah inuu yahay tirada lagagooyeyaal. Kuwa ugu sareeya jiif ee ahaantana inay yihiin lagooyayaal fahansii ardayda.

–	1	0	8	4	7
14					
17					
9					
11					
20					

3. Gacmaha dabarada isu gaynta iyagoo kasoo bilaabaya ha ka sameeyeen gacmaha dabarada ee kalagoynta ah.

Dabarada 7
$0 + 7$
$1 + 6$
$2 + 5$
$3 + 4$
$4 + 3$
$5 + 2$
$6 + 1$
$7 + 0$

Tusaale $1 + 6 = 7$ adiga oo isugeyntan   ka amba qaadaya waxaad ka shaqaysiin kartaa kuwan hoos lagu muujiyey.

    b. $7 - 1 = 6$

    t. $7 - 6 = 1$

    sidoo kale u sharrax sida kalagoyntan hoose looga shaqeeyeq

    j. $17 - 6 = (10 + 7) - 6$

          $= 10 + (7 - 6) = 10 + 1 = 11$

Jawaabaha laylisyada iyo Hawlgalada

Hawlgalka 3

3.   7

4.   b.   13   t.   9   j.   4

        x.   12   kh.   10   d.   14

5.   laga gooye 17, lagooye 2, faraqa 15

Layliska 13

t. 11   j. 8   x. 6   kh. 14   d. 15   r. 13

Layliska 14

1.   b.   7   t.   12   j.   6   x.   16

2.

x	10	9	13	6	17
x − 6	4	3	7	0	11

3.

x	13	16	17	19
y	7	5	0	9
x − y	6	11	17	10

1.2.3 Weedh xisaabeedyo lagaga shaqaynayo tirooyinka idi ee ilaa 20

Ardayda heerkan ku sugan dhibaatooyinkoodu waa laba. Midda u horaysaa waxa ay tahay kartidooda wax akhrinta iyo wax qoristu wali si fiican uma kobcin. Ta labaad ardaydu ma leh xirfada ay weedh xisaabed erayo ku qoran u badalaan weedh ka kooban tirooyin iyo calaamado. Sidaa darteed caawimaadka baraha aad ayey ugu baahan yihiin. Su'aalaha aad weydiinayso waa in ay ahaadaan tirooyinka idil ee ilaa 20iyo waaya araga ay ilaa hatan ay soo arkeen.

Tabaha Qiimaynta

1.   Waydii weedh xisaabeedyo (masalooyin) fudud.
2.   Far lnay samayaan weedh xisaabeedyo (masalooyin).

Jawaabaha Layliska 15

2)$8 + 4 = 12$ 3) $15 − 6 = 9$ 4) $11 + 9 = 20$

1.3 ISU GAYNTA AAN TIRO QAADASHADA LAHAYN IYO KALA GOYNTA AAN AMAAHASHADA LAHAYN

<div align="right">Xiisadaha loogu talo galay casharka waa 7 xiisadood</div>

Ujeedooyinka gaarka ah ee casharka

Barashade casharkan kabacdi ardaydu:-

- *Tiro qaadasho la'aan ayay tiro hal god lay ah u geeyeen tiro laba godlay ah.*
- *Amaahasho la'aan ayay tiro hal god lay ah ka goyn tiro laba god lay ah.*
- *Natiijada kala goynta ayay isu gayn ku xaqiijiin*
- *Waxay furfuri weedh xisaabeedyo fudud.*

Erayada Muhiimka ah

Tiro qaadasho la'aan, amah la'aan.

Hordhac

Qayb Hoosaadkan cutubka ardaydu waxay kaga shaqayn tirooyna idil ilaa 100 isugayn iyo kala goyntooda. Hab xisaabintii ay kaga soo shaqeeyeen tirooyinka ilaa 20, in loo adeegsadaa aad ayay faa'ido ugu tahay. Sidaa darteed ardaydii kartidoodu hoos ahaa markii ay ka shaqeynayaan tirooyinka ka hooseeya 20 in laylisyo dheeraad ah lagu caawiyaa hawshan iminka aan qabanayno ayay faa'ido u tahay.

Waxqa badyada baris-barasho

Qayb hoosaadkan cutubku wuxuu ku saabsan yahay isugeynta iyo kaola goynta tiro laba godley ah iyo tiro halgodley ah, oo aan lahayn tiro qaadasho iyo amaahasho. Sidaas darted waa in aad ka digtoonaataa in aanad ardayda siin su'aalo leh tiro qaadasho iyo amaahasho. Ardaydu si ay u fahanto xisaab falada waa in aad kaalinta u horaysa siisaa sidii ardayda aad u fahansiin lahayd ku adeegsiga shaxda qiima rugeedka. Ardaydu isugeynta ha noqoto amba kala goynta si ay si dhib yar u fahmaan waxaa loo baahan yahay in marka hore aad adeegsatid waxyaaba la taaban karo sida quruuruxa, marka xigta sawiro kadibna astirooyin. Ku celclintu iyo ka shaqaynta laylisyo farabadan faaiidadeedu aad ayay u weyn tahay.

1.3.1 Isugeynta tiro halgodley ah iyo tiro laba godley ah oo aan lahayn tiro qaadasho

1. Casharka waxaad ku bilaabi kartaa adiga oo marka hore baraya isugeynta tirooyinka halgodleyda ah iyo tirooyinka ah dhufsaneyaasha toban. Hadii aad isticmaashid qoryo yar yar oo toban toban u xidhan way wanaagsan tahay.

2. Warqad adag ama qoryo yar yar oo laba midab lagu kale midabeeyay oo loogu talo galay inay inna caawiyaan idinkoo isticmaalayna waad ka shaqayn kartaan. Tabnaadka iyo koowaadka midabo kala duwan u isticmaala.

Tusaale:- 63 + 5

63 + 5

60 + 8

3.   Far ardayda inay ka shaqeeyaan iyagoo isticmaalaya god rugeedyada. Tirooyinka god rugeedka koowaadka inay si sax ah u hoos dhigeen god rugeedka koowaadka u fiirso, inta badan inay si saxan isku hoos dhigi waayaan waxay keentaa jawaab aan sax ahayn inay helaan.

         Toban kow

          70

         + 8

4.   Tobnaadka iyo koowaadka sida ah inay isu geeyaan waxay ka caawinaysaa ka shaqaynta isugaynta isugaynta inay aqoonsadaan.

         Tusaale 35 + 4

          30 + 4   35

           + 5   sidaa darteed + 4

          30 + 9 = 39   39

Tabaha Qiimaynta

1.   Su'aal afka ah waydii tirooyinka hal god layda ah inay u geeyaan tirooyinka ah dhufsaneyaasha 10 su'aal afka inta laga waydiiyo in lagu qiimeeyo waa la karaa.
2.   Laylisyada iyo su'aalo kale oo lamid ah laylisyadaas adiga oo isticmaalaya ku qiimee.
3.   Inay godrugeed koowaad, godrugeedka koowaadka ku hoos qoraan god rugeedka tobnaadah, godrugeedka tobnaadka ah.

Jawaabaha laylisyada

Hawlgalka 4

1. b. 38   t. 55   j. 96   x. 28

2. b. 38   t. 55   j. 96   x. 28

Layliska 16

J. 35   x. 29   kh. 77   d, 56   r. 84

s. 92   sh. 47   dh. 78   c. 19

layliska 17

B. 73   T. 67   j. 98   x. 84   kh. 50

d. 39   r. 45   s. 66   sh. 34

layliska 18

B. 55   t. 37   j. 29   x. 79   kh. 48

d. 68   r. 89   s. 66   sh. 99

Layliska 19

b. 59   t. 49   j. 29   x. 59   kh. 79

d. 37   r. 88   s. 48   sh. 28

1.3.2 Kalagoynta tiro hal godley ah iyo tiro laba godley ah oo aan lahayn amaahasho

1. Warqad adag ama qoryo yar yar oo laba midab lagu kala midabeeyay oo loogu talo galay inay na caawiyaan idankoo isticmaalaya waad ka shaqayn kartaan. Tobnaadka iyo koowaadka midabo kala duwan u isticmaala tusaale.

$$65 - 3$$
$$60 + 5 - 3$$
$$= 60 + 2$$
$$= 62$$

2. Kala goynta jooga ah ee tobnaadka iyo koowaadka waxay ka caawinaysaa inay gartaan sida loo kala gooyo (jaro).

Tusaale 35 − 4

$$\begin{array}{r} 30 + 5 \\ - 4 \\ \hline 30 - 1 = 31 \end{array}$$ sidaa darteed

$$\begin{array}{r} 35 \\ - 4 \\ \hline 31 \end{array}$$

3.   God rugeedyada iyagoo isticmaalaya far inay ka shaqeeyaan kala goynta tiroojinka godrugeedka koowaadka inay si sax ah god rugeedka koowaadka ugu hoos qoreen u fiirso. Inta badan si saxan maadaamo aanay isku hoos dhigin ardaydu jawaab aan saxnayn ay halaan.
     Toban kow

     Tusaale   57
               $-\ 2$
               _____
                 55

Tabaha Qiimaynta

1.   Laylisyada iyo su'aalo la mid ah laylisyada adigoo weydiinaya ku qiimee.
2.   Inay godrugeed walba kisa ku aadiyeen ka hubi (godrugeedka tobnaadka ku hoos qor god rugeedka tobnaadka godrugeedka kowna ku hoos qor kow)

Jawaabaha laylisyada

Layliska 20

B.	31	t.	61	j.	22	x.	42	kh.	24	d.	31

Layliska 21

B.	50	t.	23	j.	54	x.	51	kh.	61	d.	72
r.	83	s.	39	sh.	32						

Layliska 22

1.	B.	64	t.	73	j.	82	x.	31	kh.	14	d.	40
2.	B.	43	t.	53	j.	81	x.	51	kh.	72	d.	61
	r.	83	s.	40	sh.	93						

1.3.3 Natiijooyinka kalagoynta oo isugayn lagu cadaynayo

1.   Ardaydu casharadii hore maadaama ay ku soo barteen isugaynta, kala goynta waxaa uga fududaan karta isugaynta. Sidaa darteed hawlaha kala goyntaha ee ay qabanayaan inay isugayn ku xaqiijiyaan (cadeeyaan) tababar.
2.   Kala goyntu lnay tahay rogalka isugaynta si ay u fahmaan laylisyada iyo hadba sidii loogu baahi qabo tusaalayaal dheeraad ah far inay ka shaqeeyaan.

9 $\boxed{+7}$ 16 $\boxed{9 + 7 = 16}$

$\boxed{-7}$ $\boxed{16 - 7 = 9}$

Tabaha Qiimaynta

Kala goyntu inay tahay rogaalka isugaynta inay fahmeen su'aalo lagu qiimeeyo fasalka gudihiisa ama shaqo guri ahaan inay uga soo shaqeeyaan far.

Jawaabaha Laylisyada

Hawlgalka 5

1.   B.   42   T.   13
2.
b.   t.

+	4	2	5
32	36	34	37
84	88	86	89
43	47	45	48

−	4	2	5
36	32	34	31
88	84	86	83
47	43	45	42

3. $47 − 6 = 41$ sababtoo ah $41 + 6 = 47$

Layliska 23

1.   J. $5 + 7 = \boxed{12}$ sidaas darted $\boxed{12} − 7 = 5$ sidoo kale $\boxed{12} − 5 = 7$

   x. $\boxed{4} + 8 = 12$ sidaas darted $12 − \boxed{4} = 8$ sidoo kale $12 − 8 = \boxed{4}$

   Kh. $9 + 3 = 12$ sidaas darted $\boxed{12} − \boxed{9} = \boxed{3}$ sidoo kale $\boxed{12} − \boxed{3} = \boxed{9}$

   D. $16 − 7 = 9$ sidaas darted $\boxed{9} + \boxed{7} = 16$ sidoo kale $\boxed{16} − \boxed{9} = 17$

2.   T. $7 + 6 = 13$ j. $15 + 3 = 18$ x. $23 + 6 = 29$
3.   T. $25 − 3 = 22$ j. $69 − 6 = 63$ x. $47 − 4 = 43$ d. $89 − 4 = 85$

Layliska 24

3. $5 + \boxed{12} = 17$ sidaas darted $17 − 5 = \boxed{12}$
4. $6 + \boxed{32} = 38$ sidaas darted $38 − 6 = \boxed{32}$
5. $13 − 6 = 7$ sidaas darted $13 − 7 = 6$
6. $66 − 4 = \boxed{62}$ sidaas darted $66 − \boxed{62} = 4$

Layliska 25

1.

	Lagagooye	5 kagoo	4 kagoo
b.	27	22	23
t	45	40	41
j.	68	63	64
x.	87	82	83
kh.	99	94	95

	Lagagooye	5 kagoo	4 kagoo
b.	38	32	31
t.	59	53	52
j.	98	92	91
x.	77	71	70
kh.	47	41	40

2.   B. $28 - \boxed{7} = 21$ KH. $39 - \boxed{7} = 32$

      T. $52 + \boxed{5} = 57$ D. $48 - \boxed{6} = 42$

      J. $13 + \boxed{6} = 19$ R. $50 + 8 = 58$

      X. $\boxed{7} + 20 = 27$ S. $32 + \boxed{3} = 35$

1.3.4 Weedh xisaabeedyo (mas'alooyin)

1.   Alaabooyinka lagu ciyaaro iyo nolol maameedkooda adigoo isticmaalaya ku dhiiri gali (boori), inay sameeyaan su'aalo weedh xisaabeedyo ah
2.   Weedh xisaabeedyada marka laga shaqaynayo (la furfurayo) waxa la ina siiyay waxa u yahay iyo waxa la rabo in la helo (ama la soo saaro) oo inta la kala sooco la gartaa waa arin muhiim ah oo aad loogu baahan yahay. Sdidaas darteed si ay xirfadaas u kobciyaan waxa loo baahan yahay in masalooyin oo heerkooda ku beegan inta aad siisid ku dhiiri galisaa in ay ka shaqeeyaan.

Tabaha Qiimaynta

3.   Weydi in ay furfuran oo ay ka shaqeeyaan weedh xisaabeedyo.
4.   Far lnay sameeyaan weedh xisaabeedyo (masalooyin).

Jawaabaha laylisyada

Layliska 26
2.   11   3.   25   4.   16   5.   5   6.   18

1.4 ISUGEYNTA IYO KALAGOYNTA LEH TIRO QAADASHO IYO AMAAHASHO

Ujeedooyinak gaarka ah ee casharka

Casharkani marka uu dhamaado dabadeed ardaydu:

- *Tiro idil oo hal godley ah iyo tiro laba godley ah ayay isu gayn iyagoo tiro qaadanaya.*
- *Tiro laba godley ah ayay tiro hal godley ah oo idil ka goyn.*

Lagama maarmaanada

Tiro qaadasho, amaahasho, dabarada isugaynta

Hordhac

Cahsar hoosaadkii 1.3 ardaydu waxay ku soo baratay isugaynta aan lahayn tiro qaadasho iyo kala goyntaaan lahayn amaahasho. Casharkanna waxay ku baranayaan isugaynta tiro qaadashada leh iyo kala goynta amaahashada leh. Tirooyinka wadartrodu ka hoosayso 20 ama faraqoodu ka hooseeyo 20 isugayntooda iyo kala goyntoodu oo la naqtimaa waxay fuduayn hawlaha baris-barasho.

Waxqabadyada baris-barasho

Casharkan waxaan ku baranaynaa isugaynta tiro qaadashada leh iyo kala goynta amaahashada leh ee tirooyinka halgodlayda ah iyo kuwa laba godlayda ah. Hase yeeshee marka hore waxaad

gogoldhig uga dhigi kartaa oo aad ku bilaabi kartaa in aad uga shaqaysid tirooyinka ay wadartoodu yihiin dhuf saneyaasha toban.

Marka xigtana tiro walba oo halgodlay ah iyo tiro walba oo laba godlay ah inay isugeeyaan far. Hal qaadashada iyo amaashada fikradda unuga u ah sida ugu haboon si ay ugu fahmaan nidaamyo kala duwan inaad isticmaashaa way wanaagsan tahay.

1.4.1 b Isu gaynta tirooyinka wadartoodu tahay dhufsaneyaasha 10

1. Gacmaha dabarka isugaynta ee tirada toban ardaydu inay soo xusuusato ka caawi. Inta shaxan lagu soo diyaariyo fasalka gudihiisa meel ay ka muuqan karto in la sudho way caawin kartaa.

    Gacmaha dabarada isugeynta ee 10

    $0 + 10 = 10$
    $1 + 9 = 10$
    $2 + 8 = 10$
    $3 + 7 = 10$
    $4 + 6 = 10$
    $5 + 5 = 10$
    $6 + 4 = 10$
    $7 + 3 = 10$
    $8 + 2 = 10$
    $9 + 1 = 10$
    $10 + 0 = 10$

2. Tiro qaadashada si aan u fahmo waxaan isticmaali karaa qoryo yar-yar oo midabo leh, tanina inagoo isticmaalayna godrugeedka inaan ka shaqayno ayaa bar bilaw lnoo ah. Sidaa darted ardayda lntaad kooxo u kala qaybisid far inay sidan soo socda oo kale uga shaqeeyaan.

    Tusaale $34 + 6 = $ _____

    1. Hal qori madow haddii 10 lagu qiimeeyo hal qori cad ahna lagu qiimeeyo 1.

2.   Taas waxaa u sabab ah 1 qori madaw waxay isku qiima yahiin 10 qori.

3.   Howshaan kor kusoo qabanay sidan soo socotana waa looga shaqayn karaa.

$$38$$

$$+\ 2$$

38 = 3 tobnaad + 8 koowaad
2 = 0 tobnaad + 2 koowaad
        3 tobnaad + 10 koowaad
        3 tobnaad + 1 koowaad
        4 tobnaad + 0 koowaad

$$38$$
Sidaa darkeed $+\ 2$
$$40$$

4.   Godrugeedka inagoo isticmaalayna haddii aan ku barno Habkan kore geedi socad kiisa oo kale ayuu tusayaa. Sidaa ay tahay hadana godrugeedka lnagoo isticmaalayna inaan kaga shaqayno waxaa dhici karta ardaydu inay si fudud u fahmi waydo sidaa awgeed laylisyo fara badan in lagu bar baro ayaa haboon.
       Tusaale 43 + 7 = _____

Marka hore godka koowaadka   **Marka xigtana godka tobnaadka**
        Isugeeya   **Isugeeya**

    tobnaad   koowaad   Tobnaad   koowaad

              43   43
            $+\ 7$ 3 $+\ 7$
Sidaa darteed   0 $+7$ 50
                           10

              43
            $+\ 7$
              50

Tabaha Qiimaynta

1.   Iyagoo isticmaalaya qoryaha midabada lahaa isugaynta tiro qaadashada leh inay karayaan qiimee heer u kartidoodu ku sugan yahay.
2.   Iyagoo isticmaalaya god rugeedka isugaynta lnay karayaan qiimee heerka kartid ardayda.

Jawaabaha laylisyada

Layliska 27

1.   B.   70   T.   80   J.   60   X.   40   KH. 20   D.   80
      R.   30   S.   50
2.

x	16	46	66	36	86
$x + 4$	20	50	70	40	90

y	15	65	35	55	86
$y + 4$	20	50	70	40	90

Layliska 28

2.   60   3.   90   4.   20

Jawaabaha Layliska 29

B.


$39 + 3 = 42$

T.


$42 + 9 = 51$

J.


$26 + 7 = 33$

X.

$27 + 4 = 31$

KH.

$85 + 7 = 92$

D.

$16 + 9 = 25$

Layliska 30

1.   Shaqada Ibrahim iyo ta Hibo ayaa sax ah.

2.   b.   33   t.   35   j.   24   x.   43   kh.   77   d.   73   r.   54   s.   82

3.

+	3	6	9
14	17	20	23
25	28	31	34
36	39	42	45
47	50	53	56
58	61	64	67
69	72	75	78

Layliska 31

1.   19   2.   61   3.   13   4.   41

1.4.1 t Isugaynta tirooyinka wadartoodu ka duwan tahay dhufsaneyaasha 10

1.   Far layliska 3aad inay ku barbartaan iyagoo isticmaalaya falaadha tiro. Ardaydu lntay soo kacdo sabuurada lnay kaga dul shaqeeyaan inaad samaysaa aad ayay u wanaagsan tahay.

2.   Idinkoo isticmaalaya astirooyinka qiima rugeedkooda inaad farto inay sidan soo socota uga shaqeeyaan waad kartaa.

$$\begin{array}{r} 27 \\ +\ 9 \\ \hline \end{array}$$

       27 = 2 tobnaad + 7 koowaad

       9 = 0 tobnaad + 9 koowaad

          = 2 tobnaad + 16 koowaad

          = 2 tobnaad + 1 tobnaad + 6 koowaad

          = 3 tobnaad + 6 koowaad

          = 36

Sidaas darteed
$$\begin{array}{r} 27 \\ +\ 9 \\ \hline 36 \end{array}$$

Tani iyagoo isticmaalaya qoryo yar yar oo midabo leh lnay kaga shaqaysiiso waa kartaa.

3.   Shaqadan soo socota inaad ardayda ku hogaamisid in ay koox koox uga shaqeeyaan waad kartaa. Waa hab ay isugeynta kaga shaqayn karaan iyaga oo aan qaadanin warqad iyo qalin.

Tusaale: isugeeya
$$\begin{array}{r} 27 \\ +9 \\ \hline \end{array}$$

   b.   Tirada ka danbeeyaha 27 ee ah dhufsaneha 10 waa tee?
        Jawaab: waa 30

   t.   27 ka si aan 30 uga dhigno imisa ayaan uga baahanahay in aan 9 ka ka soo qaadano?
        Jawaab; 3

j. Imika $\begin{array}{r} 27 \\ +9 \\ \hline \end{array}$ waxaa loo qori karaa $\begin{array}{r} 30 \\ +6 \\ \hline \end{array}$ taas oo ah $\begin{array}{r} 30 \\ +6 \\ \hline 36 \end{array}$

x. Sidaas darteed $\begin{array}{r} 27 \\ +9 \\ \hline 36 \end{array}$

4. Ku dhiiri gali in isugeynta ka shaqeeyaan iyaga oo isticmaalaya qiima-rugeedyada.

Tusaale: Isugeeya $\begin{array}{r} 73 \\ +9 \\ \hline \end{array}$

Marka hore qiimaha astirooyinka godka koowaadka isugeeya marka xigtana qiimaha astirooyinka godka tobnaadka isugeeya.

Tobnaad	Koowaad		Tobnaad	Koowaad			
7	3		7	3	Sidaas darteed	7	3
+	8		+	8		+	8
	11		8	1		8	1

Tabaha Qiimaynta

1. Weydi ardayda in tiraab ahaan (afka) ka sheegaan in biirooyinka laba godleyad ah ay ku bedalaan tirada kadanbeeyaha ee ah dhufsaneha 10.
2. Waa in aad hubisa in ay isugeyn karaan tiro hal godle ah iyo tiro laba godle ah oo tiro qaadashol eh.

Jawaabaha Layliska 32

B. 25   T. 53   J. 31   X. 74   Kh. 63   D. 82

Jawaabaha Layliska 33

b. 27   t. 17   j. 62   x. 73   kh. 68   d. 53

Jawaabaha Layliska 34

b. 57   t. 27   j. 28   x. 76   kh. 39   d. 38   r. 67   s. 26

1.4.2 Kala goynta Amaahashada leh

1. Adigoo isticmaalaya xarriqda tirada kala goynta bar-bar isugaynta iyokala goynta inay rogaalo lsku yihiin lnay ka fahmaan ayay ka caawin
2. Noocyadan soo socda ee isu bad badalka ah far lnay ka shaqeeyaan.

B.   2 tobnaad + 3 koowaad = 1 tobnaad + 13 koowaad

T.   5 tobnaad + 5 koowaad = 4 tobnaad + 15 koowaad

tobnaad   koowaad   tobnaad   koowaad

$$
\begin{array}{cc}
7 & 2 \\
 & -5 \\
\hline
\end{array}
\longrightarrow
\begin{array}{cc}
6 & 12 \\
 & -5 \\
\hline
6 & 7
\end{array}
$$

Tani waxay ka caawinaysaa fikradda unuga u ah amaahashada inay fahmaan.

3.   Ardaydu iyagoo isticmaalaya god rugeedyada kala goynta si ay ugu bar bartaan shaqsi shaqsi iyo koox kooxba inay uga shaqeeyaan inaad ku cawwiso ayaa loo baahan yahay.

Tusaale kalagooya $32 - 5 =$ _____

| Kala badal | Kalayooya koowaadka | Kalagooya tobnaaka |
| Tobnal koowaad   Tobaad koowaad | tobnaad koowaad | tobnaad koowaad |

$$
\begin{array}{cc}
3 & 2 \\
-5 & \\
\hline
\end{array}
\rightarrow
\begin{array}{cc}
\cancel{3}^2 & \cancel{2}^{12} \\
-5 & \\
\hline
\end{array}
\rightarrow
\begin{array}{cc}
\cancel{3}^2 & \cancel{2}^{12} \\
- & 5 \\
\hline
 & 7
\end{array}
\rightarrow
\begin{array}{cc}
\cancel{3}^2 & \cancel{2}^{12} \\
- & 5 \\
\hline
2 & 7
\end{array}
$$

Sidaas darteed. $32 - 5 = 27$

4.   Markaan tusaalayaal badan ku celcelino kabacdi ardaydu maskaxdooda iyagoo ku xisaabinaya amaahashada far inay hal shaxan oo kaliya ku xisaabiyaan Tusaale $91 - 9 =$

5.   Ardayda intaad kooxo u kala qaybisid laga gooyaha in ay u goraan wadar ka kooban dhufsanehalo iyo tiro hal god ah kadibna ay kashaqeeyaan ku dhiiri gal. Tusaale kala jar $36 - 9 =$ _____

$$
\begin{aligned}
36 - 9 &= 30 + 6 - 9 \\
&= 20 + 10 + 6 - 9 \\
&= 20 + 16 - 9 \\
&= 20 + 7 \\
&= 27
\end{aligned}
$$

$$
\begin{array}{r}
91 \\
-\ 9 \\
\hline
82
\end{array}
$$

Hal ayaan ka soo amaahan god rugeedka tobnaad. Markaa god rugeedka koowaad wuxuu ii noqon 11 kadib $11 - 9 = 2$.

God rugeedkii tobnaad hal marka laga soo amaahdo waxa noogu hadhay waa 8.

Tabaha Qiimaynta

1. far ardayda lnay hawl kooxeed, shaqo guri, iyo sidoo kale fasalka gudihiisa gaar ahaan sabuurada dusheeda, kaga shaqeeyaan kala goynta tirooyinka halgodlayda ah iyo kua laba god layda ah.

B.

$35 - 8 = 27$

T.

$70 - 3 = 67$

J.

$82 - 9 = 73$

X.

$85 - 7 = 78$

Kh.

$90 - 7 = 83$

Layliska 35

b. 28   t. 38   j. 57   x. 46   kh. 18

Layliska 36

1. B. 17   T. 27   J. 64   X. 37   Kh. 58   D. 77

2.

−	3	6	9
14	11	8	5
25	22	19	16
36	33	30	27
47	44	41	38
58	55	52	49
69	66	63	60

3.

Tirada galaysa	26	57	61	73
Tirada baxaysa	17	48	52	64

4.

B.

T.

J.

X.

Layliska 37

1.   45   2.   6   3.   47   4.   78   5.   77

1.5 ISUGEYNTA IYO KALAGOYNTA LABA TIRO OO MIN 2 GOD AH OO AAN LAHAYN TIRO QAADASHO IYO AMAAHASHO MIDNABA.

Waqtiga loo qoondeeyey 15 xiisadood

Ujeedooyinka gaarka ah ee casharka

Qayb hoosaadkan cutubku marka uu dhamaado dabadeed ardaydu

- *Waxay isugeyn laba tiro oo min laba god ah oo aan lahayn tiro qaadasho.*
- *Waxay kala goyn laba tiro oo min laba god ah oo aan laayn amaahasho.*
- *Weedh xisaabeedyo lagaga shaqayn karo isugeyn iyo kalagoyn laba tiro oo min laba god ah ayey samaynayaan oo ay furfurayaan.*

Erayada muhiimka ah

Tiro qaadahso, Amaahasho

Hordhac

Qaye hoosaadkii cutubka ee 1.4 ardaydu waxay ku soo barteen isugaynta tiro halgodlay ah iyo tiro laba godlay ah iyo sidoo kala kala goynte tirooyinka noocan ah.

Casharkana waxay ku baran doonaan isugaynta laba tiro oo min laba godlay ah iyo kala goynta laba tiro oo min laba godlay ah.

Waxqabadyada baris-barasho

Cashar hoosaadka cutubkan si aan u barno waxaan isticmaalaynaa tabihii (nidaamayadii) aan u soo adeegsanay casharkii hore.

1.5.1 Hal qaadasho la'aan isugaynta tirooyinka laba god layda ah

1. Adiga oo sabuurada ku qoraya habkan isugeynta sidan hoos lagu muujiyey waad ugu sharixi kartaa.

$$
\begin{array}{r}
38 \\
+\,11
\end{array}
$$

$$
\begin{array}{l}
38 = 3 \text{ tobnaad} + 8 \text{ koowaad} \\
\underline{11 = 1 \text{ tobnaad} + 1 \text{ koowaad}} \\
\quad 4 \text{ tobnaad} + 9 \text{ halaad} \\
\qquad 49
\end{array}
$$

Sidaas darteed
$$
\begin{array}{r}
38 \\
+\,11 \\
\hline
49
\end{array}
$$

2. Habkan kor ku xusan marka aan heer ku filan inta aan ku celcelino aan ka shaqaysiino dabadeed; waxaan ku hogaaminaynaa inay barbartaan habka isugeynta looga shaqeeyo iyada oo la adeegsanayo god rugeedyada tirooyinka.

Tusaale 43 + 26 = _____

Marka hore godka koowaad **Isugeeya**	**Marka xigtana godka tobnaad** **Isugeeya**
tobnaad koowaad	tobnaad koowaad
$\begin{array}{r}43 \\ +\,26 \\ \hline 9\end{array}$	$\begin{array}{r}43 \\ +\,26 \\ \hline 69\end{array}$

Sidaa darteed
$$
\begin{array}{r}
43 \\
+\,26 \\
\hline
89
\end{array}
$$

3. Waxa loo baahan yahay in la siiyo si ay uga shaqeeyaan weedh xisaabeedyo (masalooyin) fara badan. Intaas ka sakaw haddii ardaydu iyaga oo koox koox ah aad ku hogaamisid in iyaga laftarkooda ay soo saaraan ama ay sameeyaan masalooyin kadibna ay kooxaha kale kajawaabaan tababar wanaagsan ayey u noqon.

Tabaha Qiimaynta

1. Waa ln aad siisaa su'aalo ay kaga shaqaynayaan isugaynta tirooyinka laba godlayda ah.

2.   Waa inaad weydiisaa in ay furfuran (kashaqeeyaan) maslooyin. Ku hogaami in ay sameeyaan masalooyin fudud.

Jawaabaha Laylisyada

Layliska 38

1.	B.	60	t.	50	j.	50	x.	60	kh.	80
2.	B.	70	t.	90	j.	80	x.	70		

Layliska 39

1.	B.	65	T.	86	J.	94	X.	87
2.	b.	86	t.	62	j.	88	x.	56
3.	B.	88	T.	88	J.	99	X.	99

Layliska 40

1.	39	2.	88	3.	99	4.	82

1.5.2   Kala goynta laba tiro oo min laba god ah oo aan amaahasho lahayn

1.   Ardaydu iyagoo isticmaalaya god rugeedyada kala goynta si ay u bar bartaan su'aalo farabadan shaqsi shaqsi iyo koox ahaanba inay kaga shaqeeyaan ayaa loo baahan yahay.
      Tusaale kala goo $39 - 25 = $ _____

Godka koowaadka kala goo   **Godka tobnaadka kala goo**

tobnaad koowaad   tobnaad   koowaad
$$39$$ $$39$$
$$- 25$$ $$- 25$$
$$4$$ $$14$$

2.   Kadib markaan tusaaleyaal badan aan uga shaqayno ardaydu waa in kalagoynta koowaadka iyo tobnaadka ay meel kaliya kaga shaqeeyaan.
      Tusaale $97 - 23 = $ _____

$$97$$
$$- 23$$
$$74$$

Marka hore waxaan kala goyn godrugeedka koowaadka marka xigtana waxaan kala goyn god rugeedka tobnaadka.

Tabaha Qiimaynta

Waa lnay ardaydu hawl kooxeed, shaqo guri, iyo fasal gudihiisa sabuurado dusheeda aad kaga shaqaysiisaa kala goynta tiro hal godlay ah iyo tiro laba godlay ah.

Jawaabaha laylisyada

Layliska 41

1.	B.	50	T.	20	J.	60	X.	0	Kh.	20		D.	10	R.	0
2.	B.	20	t.	70	j.	40	x.	40							

Layliska 42

b.	22	t.	42	j.	24	x.	3	kh.	23	d.	45	r.	42	s.	5	sh.	16

Layliska 43

1.	82	2.	41	3.	52	4.	54	5.	85

1.6 ISUGAYNTA IYO KALAGOYNTA LABA TIRO OO MIN 2 GOD AH OO LEH HAL QAADASHO IYO AMAAHASHO

Waqtiga loo qoondeeyey 15 xiisadood

Ujeedooyinka gaarka ah ee casharka

Casharkani marka uu dhamaado dabadeed ardaydu:

- *Waxay isugeyn laba tiro oo min laba godley ah oo tiro qaadasha leh.*
- *Waxay kalagoyn laba tiro oo min laba godley ah oo amaahasho leh.*

Erayada muhiimka ah

Tiro qaadasho, amaahasho, wey ka weyn tahay, wey kar yar tahay, isle'eg

Hordhac

Qayb hooseedkii cutubka ee 1.5 ardaydu waxay ku soo baratay tiro laba godlay ah u gayn (ku darid) tiro laba godlay ah hal qaadasho la'aan. Iyo tiro laba god lay ah ka gayn (ka jarid) tiro laba god lay ah amaahasho la'aan. Casharkana waxay ku baranayaan tiro laba godlay ah u gayn (ku darid) tiro labo godlay ah iyagoo hal qaadanaya iyo tiro laba god lay ah ka goyn (ka yarid) tiro laba god lay ah iyagoo amaahanaya.

Waxqabadyada baris-barasho

Cashar hoseedka cutubkan si aan u barno waxaan isticmaalaynaa nidaamyadii aan u soo adeegsanay casharkii hore.

1.6.1 Isugaynta laba tiro oo min laba godlay ah oo leh tiro qaadasho

1. Sidan soo socota jid ikhtiyaari ahaan ah waan u isticmaali karnaa, adigoo isticmaalaya tabaashiiro midabo kala duwan leh sidan soo socota inay uga shaqeeyaan far.

Tusaale   38 = 3 tobnaad + 8 koowaad

$$38$$
$$+\ 17$$

17 = 1 tobnaad + 7 koowaad

4 tobnaad + 15 koowaad

4 tobnaad + 1 tobnaad + 5 koowaad

5 tobnaad + 5 koowaad

55

Sidaa darteed

$$38$$
$$+\ 17$$
$$55$$

2. Godrugeedyada inagoo isticmaalayna inaan ka shaqayno maadama ay tahay habka ugu waanagsan, laylisyo ku filan ay ku tababartaan lnaad samayso ayaa haboon.

Tusaale 56 + 26 = _____

Marka hore godka koowaad   **Marka xigtana godka tobnaad**
Isugeeya   **Isugeeya**

Sidaas darteed

$$56$$
$$+\ 26$$
$$82$$

3. Waxaa loo baahan yahay in la siiyo weedh xisaabeedyo (masalooyin) fara badan oo ay ka shaqeeyaan. Taasi kasakaw haddii ardayda intaad koox koox u kala qaybisid aad ku hogaamisid in iyaga laftarkoodu ay soo saaraan ama ay sameeyaan masalooyin oo kooxaha kale na ka jawwaabaan waxay taasi u noqon tobabar ay aqoontooda ku kobciyaan.

Tabaha Qiimaynta

1. Si aad u qiimaysid heerka fahankooda ee casharka ku saabsan sii suuaalo isugeyn ah oo tiro qaadasho leh oo ka kooban tirooyin laba godley ah.

2. Sii weedh xisaabeedyo (masalooyin). Ku hogaami in ay sa meeyaan masalooyin fudud.

Jawaabaha Laylisyada

Layliska 44

1. B. 95   T. 83   J. 92   X. 42

    Kh. 65   D. 81   R. 65   S. 81

2. B. 65 t. 81 j. 65 x. 61 kh. 92

3. B. >   T. <   J. <   X. =

Layliska 45

1. 44   2. 62   3. 76   4. 111   5. 65

1.6.2 Kala goynta laba tiro oo min laba godley ah oo leh amaahasho

1. Marka u hooraysa tiro laba godle ah intaad soo qaadatid weydii ardayda inta tobnaad iyo inta koowaad ee ay tiradaasi ka kooban tahay

2. Kadibna iyaga oo koox koox ah ku hogaami inay ka shaqeeyaan siyaabaha la isugu bedalo tobnaadka iyo koowaadka.

   Tusaale

   1. 97 = 9 tobnaad + 7 koowaad = 8 tobnaad + 17 koowaad
   2. 76 = 7 tobnaad + 6 koowaad= 6 tobnaad + 16 koowaad

3. Iyaga oo shaqa kooxeedka sii wada ku caawi in ay tirooyinka kala gooyaan iyaga oo adeegsanaya tabta isku badalista tobnaadka iyo koowaadka.

   Tusaale

$$\begin{array}{r} 72 \\ -\,15 \end{array} \longrightarrow$$

7 tobnaad + 2 koowaad = 6 tobnaad + 12 koowaad
−1 tobnaad − 5 kowaad = −1 tobnaad − 5 koowaad
5 tobnaad + 7 koowaad = 57

4. Ardaydu iyagoo isticmaalaya qiima rugeedka tirooyinka, kala goynta si barbar aan su'aalo farabadan lnay kali kali iyo koox kooxba uga shaqeeyaan inaad samaysaa loo baahan yahay.

Isku bad badal		Godrugeedka kow Kala gooya		God rugeedka toban kala gooya	
tobnaad	koowaad	tobnaad	koowaad	tobnaad	koowaad
212		2	12	212	
3 2 7		3 2		3 2 7	
− 1		− 1		− 1	
				15	

$$\begin{array}{r} 32 \\ -\,17 \end{array}$$

5. Markaan tusaalayaal badan ku celcelino ka bacdi ardaydu maskaxdooda iyagoo ku xisaabinaya amaahashada far inay hal shaxan oo kaliya ku xisaabiyaan.

$$91$$
$$- 39$$
$$\overline{52}$$

Godrugeed ka tobnaadka 1 ayaan ka amaahan. Kadibna god rugeedka kow 11 ayuu noqon, marka $11 - 9 = 2$. Hadhaagii daynta laga qaatay waa $8 - 3 = 5$ markaas waxaan ku qori god rugeed ka tabnaadka.

6. Ardayda lntaad kooxo u kala qaybiso tirada laga gooyaha ah si ay wadaraha toban uga dhigaan inay wax ka dhimaan (yaraan) far.

Tusaale kala jare $36 - 9 = $ _____

$$36 - 9 = 30 + 6 - 9$$
$$= 20 + 10 + 6 - 9$$
$$= 20 + 16 - 9$$
$$= 20 + 7 = 27$$

Tabaha Qiimaynta

Waa lnay ardaydu hawl kooxeed, shaqo guri, iyo fasalka gudihiisa sabuuradda dusheeda aad kaga shaqaysiisaa kala goynta tirooyinka laba godlayda ah.

Jawaabaha laylisyada

Layliska 46

2) 7 tobnaad, 3 koowad sidaas darted $73 = 70 + 3$
3) 5 tobnaad, 4 koowad sidaas darted $54 = 50 + 4$

Layliska 47

1. t. $54 = 50 + \boxed{4} = 40 + \boxed{14}$ j. $36 = 30 + \boxed{6} = 20 + \boxed{16}$ x. $81 = 80 + \boxed{1} = 70 + \boxed{11}$

kh. $47 = \boxed{40} + 7 = \boxed{30} + 17$ d. $65 = \boxed{60} + 5 = \boxed{50} + 15$

r. $93 = \boxed{90} + 3 = \boxed{80} + 13$ s. $28 = \boxed{20} + 8 = \boxed{10} + 18$

Layliska 48

1. B.   18   t.   18   j.   15
2. B.   27   t.   56   j.   36   x.   36   kh.   28   d.   27

Layliska 49

b.   52   t.   52   j.   28   x.   24

Layliska 50

1. b.   18   t. 24   j. 67   x. 16   kh. 38   d. 33

1.6.3 Natiijada kalagoynta, oo isugayn lagu xaqiijinayo

1. Ardaydu tababar ku filan oo isugaynta ah maadama ay heleen kalagoynte heer ay isugayn ku xaqiijin karaan ayay taagan yihiin. Sidaa darteed cashakan 1.6.3 gudhiisa laylisyada la lnagu siiyay iyo su'aalo kale oo dheeraad ah hadba baahida loo qabo anagoo eegayna intaan siino kala goynta inay ku xaqiiyiyaan isugayn ayaa loo baahan yahay.

Tabaa Qiimaynta

Ardayda su'aalo kalagoyn ah lntaan siino natiijada kasoo baxda inay ku xaqiijiyaan (hubiyaan) isu gayn ahaan inay fahmeen.

Weedh xisaabeedyo tiraab ahaan ah (afka ah)

Ardaydu su'aalo ay si fudud uga shaqayn karaan sida tusaale ahaan layliska 45 su'aalaha lagu siiyay ee weedh xisaabeeda kala goynta ah oo kale inaad kaga shaqay siiso ayaa haboon.

Xirfadooda(kartidooda) akhrintu maadaama aanay xoogaysan koox ahaan inay kaga shaqayaan inaad ku boorisaa aad ayay u wanaagsan tahay. Hawl kooxeed kanna far inay sabuuradda kaga shaqeeyaan.

Tabaha Qiimaynta

Weedh xisaabeedyo (masalooyin) fud fudud si ay uga shaqeeyaan, ardaydu nolol maalmeedkooda iyagoo ka duulaya weedh xisaabeedyo fudud oo kala goyn ah lnay sameeyaan, kadibna ay ka jawaabaan ka dhiiri gali.

Jawaabaha Laylisyada 51

    3) b. 17   t. 36   j. 37   x. 32
    4) b. 42   t. 93   j. 91   x. 93

Layliska 52

    1. 36   2. 38 3. 53

1.7 WEEDH XISAABEEDYADA ISUGAYNTA IYO KALAGOYNTA AH ILAA 100

Ujeedooyinka gaarka ah ee casharka

Casharkani marka uu dhamaado dabadeed ardaydu:

- *Tirooyinka laba godlayda ah iyagoo isticmaalaya isugayn iyo kala gayn su'aalo fudud iyo Eray xidhaalayaal ayay ka samayn, kadibna way ka shaqayn.*
- *Saddex tiro oo min laba godlay ah ayay isugayn.*
- *Su'aalaha aan jawaabta lahayn ee kalagoynta ah ayay sooci.*

Ereyada Muhiimka ah

Lagagooye, Lagooye Natijo, faraq

Hordhac

Cashar hoosaadka cutubkan waxay ku naqtiimayaan casharadii ay horey u soo barteen. Waxaana ku guda jira Eray xidhaalayaal dheeri ah. Intaa waxa dheer waxay isbarbar dhigi tirooyinka, waxaanay ku naqtiimayaan horsonaanto tirooyinka.

Waxqabadyada baris-barasho

1. Eray xidhaalayaal dheeri ah oo isugayn iyo kala goyn ah ka shaqaysii ardayda. Eray xidhaalayaasha waa inay noqdaan kuwo ay ardaydu si fudud u fahmi karto.
2. Layliska 47 su'aalaha laynagu siiyay ardaydu inay koox ahaan kaga shaqayso far. Marka hore markay isugeayaan ama kala gooyaan kadib natiijooyinka ha is bar bardhigeen iyagoo isticmaalaya sumadaha isbar-bar dhigga ee ah "<" = ">".
3. Layliska 48 ardaydu horsonaanta tirooyinka inay fahamaan inuu ka caawiyo ayaa loogu talo galay tirada weyn in loo geeyo tirada yar haday tahay iyo tirada yar in loo geeyo tirada wayn haday tahayba waa in aad bartaa.
4. Bar ardayda 3 tiro oo min laba godlay ah inay isu geeyaan intaa kadib iyaga loftoodu 3 tiro oo min 2 god ah lntay samaystaan inay isu geeyaan far.
5. Tirooyinka taban ma garanayaan ardayda darajadoodu tahay fasalka 2^{aad}. Sidaa darted ardaydiina su'aalaha kala goynta ah ee aad siinaysaan dhamaan waa lnay tiradooda guudi ka yaraato tirada laga gooyaha ah. Tirada guudi haday ka badato tirada laga gooyaha ah jawaab inaanay lahayn waa in aad fahansiisaa, islamarkaana inay sidaas u qeexi karaan ayaa looga barahan yahay. Tusaale su'aalahan kala goynta ah ee soo socda haka shaqeeyaan.

    B. $68 - 83 = $ _____   T. $72 - 27 = $ _____

Jawaabta laga filayo ardayda:-

    B.   Tirada guud maadaama ayka badan tahay laga gooyaha jawaab ma leh.

    T.   Tirada guud way ka yar tahay laga gooyaha. Sidaa darteed jawaab way leedahay, jawaabtuna waa 45.

Tabaha Qiimaynta

Isugayn iyo kala goyn su'aalo fudud oo qoraal ah intaad siiso fasalka gudihiisa iyo shaqo guri ahaanba usii in ay uga shaqeyaan. Si isugayn ah ama kala goyn ah tirooyinka la inna siiyay markaa anu isugayno ama kala goyno kadib. Natiijooyinka iyagoo isticmaalaya sumadaha <, =, >, far inay isbar bar dhigaan. Tirooyinka habka horsonaanta loo taxay dhexdooda tirooyinka ka maqan meelaha banaan inay ku buuxiyaan far.

Saddex tiro oo min laba god ah isugayntooda inay karayaan hawl kooxeed intaad u siiso ku qiimee. Su'aalo kala goyn ah intaad siiso ha kala sooceen kuwii jawaab leh iyo kuwa aan jawaab lalayn.

Layliska 53

1. 25
2. 31
3. 43
4.   B. 13,14,15,16,17 19,20, 21   t. 59, 71, 72,......100

Cutubka 2aad

ISKUDHUFASHADA IYO ISUQAYBINTA TIROOYINKA IDIL ILAA 100

Hordhac

Tirooyinka idil siyaabaha aan ugu adeegsano howlaha la xidhiidha nolol maalmeedkeena waxaa ka mid ah iskudhufashada iyo isuqaybinta tirooyinka idil.

10 qof oo reer ku nooli haddi qof dariskooda ah ay ku deeqaan laba laba kiilo oo qamadi ah waxay taasi ka dhigan tahay 20 kiilo oo qamadi ah ayey qofka siiyeen. Sidoo kale qofi haddii uu 5 qoys oo sabool ah siiyo 50 kiilo oo qamadi ah qoyskasta wuxuu heli 10 kiilo ayey ka dhigan tahay.

Sidaas darted ardayda oo fahanta nuxurka iskudhufashada iyo isuqaybinta tirooyinka idil faaeedadeedu waxa ay tahay in ardaydu ay u fiirsato waxyaabaha ay agagaarkooda ku arkaan. Sidaas awgeed si loo hirgaliyo ujeedooyinka cutubkan waxaa loo baahan yahay oo lama huraan ah in cutubka loo qaybiyo qayb hoosaadyo kala duwan, oo inta loo doorto kaabayaasha barista casharka ku haboon isla markaana loo doorto habka soo bandhigida casharka u qalanta dabadeedna la isku taxalujiyaa sidii loo damaystriayo casharka baristiisa.

Natiijooyinka baris barasho

Cutubkani barashadiisu marka uu dhamaado dabadeed ardaydu waxay

- *isku dhufan kari tirada 2 ama tirada 10 iyo tiro kale oo tarantoodu tahay ilaa 100. Waxay kala sooci karayaan macnaha xisaabeed ka "Isir" iyo "taran"*
- *tirooyinka idil ilaa 100 hadhaa la'aan u qaybinayaan tirada 2 iyo tirada 10.*
- *tirooyinka idil ilaa 100 ku dhufanayaan '0' iyo '1'*
- *tirooyinka idil u qaybin karayaan "1"*
- *tirooyinka idil ilaa 100 u tirin karayaan saddex saddex, afar-afar, shan-shan ilaa sagaal-sagaal.*
- *Isku dhufan karayaan laba tiro oo idil oo min hal god ah oo tarantoodu tahay ilaa 100.*
- *Ka shaqayn karayaan isuqaybinta hadhaa la'aanta ah ee tirooyinka idil ee qaybshahoodu yihiin 3, 4, 5, 6, 7, 8 iyo 9. Waxay kala sooci karayaan laqaybshaha, qaybshaha iyo qaybta*
- *Tirooyinka halgodleyda ah ku isticmaal karayaan xidhiidhka ka dhaxeeya iskudhufashada iyo isuqaybinta.*
- *Furfuri karayaan weedh xisaabeedyada fudud. ee isku dhufashaela iyo isuqaybinta tirooyinka idil ee halgodleyda ah.*

Kaabayaasha baris barasho ee Cutubka

Si ardayda loo fahansiiyo fikradaha nuxurka ee cutubka kaabayaasha la adeegsan karo waxay yihiin

- qoryo yar yar oo koox koox tirooyin kala duwan leh la isugu xidhay.
- abaakas
- shaxda iskudhufashada (oo jaarti weyn lagu diyaariyey)
- Sawiro xarrijimo toosan oo dheraro kala duwan leh oo jaartiyo lagu dul sawiray
- Tamaashiiro midabo kala duwan leh.

2.1 NAQTIINKA ISKUDHUFASHADA 2 AMA 10 IYO TIRO KALE IYO ISUQAYBINTA QAYBSHAHEEDU YAHAY 2 AMA 10

Waqtiga loo qoondee yey 10 xisadood

Ujeedooyinka Gaarka ah ee cashark

Casharkani marka uu dhamaado dabadeed waxay awood u yeelan doonaan in ay

- *isku dhuftaan tirooyinka idil iyo tirada 2 ama 10 ee tarantoodu tahay ilaa 100.*
- *isticmaalaan calaamada isku dhufashada ee ah "X"*
- *kala soocaan macnaha xisaabeed ee "isir" iyo "taran"*
- *tirooyinka idil ilaa 100 hadhaa l'ann uqaybiyaan tirada 2 iyo tirada 10*
- *furfuran (xaliyaan) weedh xisaabeedyada la xidhiidha tirooyinka idil oo lagu dhufanayo ama loo qaybinayo tirada 2 iyo tirada 10.*

Hordhac

Qayb hoosaadkan cutubka waxaa loo baahan yahay in ardaydu ay dhufsaneyaasha 2 iyo 10 ee ilaa 100 tiraab ahaan (afka) sheegi karaan si taas loo fuliyo tirooyinka idil ilaa 100 iyo tirada 2 marka hore kadibna tirada 10 tabaha la isugu dhufto ayaa si fudud oo ay curuurtu ku fahmi karto ayaa qayb hoosaadkan cutubka lagu soo diyaariyey.

Qayb hoosaadkan cutubka waxaa loo qaybiyey laba qaybood oo lagu soo sharaxayo. Qaybta hore waxaa lagu soo bandhigi tirooyinka idil ee ilaa 100 tabaha loogu dhufto tirada 2 iyo tirada 10. Qaybta labaadna waxaa lagu sharaxay tabaha tirooyinka idil ee ilaa 100 hadhaa l'aan loogu qaybiyo tirada 2 iyo tirada 10.

2.1.1 Isku dhufashada tirada 2 ama 10 iyo tiro kale

Waxqabadyada baris barasho

Casharka waxaad ku bilaabi kartaa adiga oo marka hore ardayda xasuusinaya in ay fasalka koowaad ku soo barteen habka tirada 2 loogu dhufto tiro kale. Taasi kadib easharka baristiisa waxaad gogoldhig uga dhigi kartaa adiga oo ardaydu iyaga oo koox koox aad ku hogaamisid in ay falanqeeyaan oo ay ka shaqeeyaan Hawlgalka 1 ee ku muujisan bogga 42 buugga xisaabta ee ardayga. ku dhiiri gali in ay ka jawaabaan su'aalaha Hawgalka. Ardaydu Jawaabaha ay ka bixiyeen

su'aalaha si ay u hubiyaan, saxanimadooda ardayda ku caawi in ay u fiirsadaan tirada sawirka muuska ee sanduuqa ku jirta. Ku hogaami oo u faahfaahi in ay fahmaan in tirada muuska ee sanduuqa weyn ku jirtaa ay tahay 4 kooxood. oo min laba laba muus ah.

Waa in aad ugu celcelisaa oo aad fahamsiisaa in muuska salladda weyn ku jira loo kala dhig dhigay 4 kooxood oo kooxdii kastaaba ka kooban tahay 2 hal oo muus ah. Sidaas darteed u cadee in tirada muuska ku jiray salladda weyn ay ahayed tirada ka soo baxda marka tirada kooxaha lagu dhufto tirada muuka ee ay kooxkasta ka kooban tahay . Taas oo ah sideed.

Ardayda si aad wado gaaban ugu fahamsiisid u horseed in ay isugeeyaan tirada muuska, ku jira salladdaha yar yar. Kadibna 2 da inta jeer ay isugee yeen weydii u xaqiiji in 2 da marka ay afar jeer isugeeyaan ay heli tirada 8. ka dhaadhicl in sidaas ay ka dhigan tahay 4 marka 2 lagu dhufto.

Sidaas darted Hawlgalka 1 natiijada ay ka heleen in ay tahay $2 + 2 + 2 + 2 = 8$ oo ay taasi u dhiganto ama le'eg tahay natiijada 4×2 ardayda fahamsii. Isla markaan u tilmaam in iskudhufashada lagaga shaqayn karo isugeyn ku celcelin ah.

Baruhu (Macalinku) si uu si qoto dheer leh ugu sii falanqeeyo oo islamarkaan uu uxaqiijiyo in aragtida Hawligalka laga helay ay markasta run tahay waa in uu su'aalo dheeraad inta uu siiyo hubiyaa in ardaydu ay fahamtay. Layliska 1, bogga 43 ee buugga ardayga iyo su'aalo kuwaas la mid ah waa in ardayda ku dhiira galisaa in ay ka shaqeeyaan shaqo fasal ahaan ah iyo shaqo guri ahaan ah. Kadibna waa in uu usaxaa shaqadooda.

Hawlgalka 2 habka looga shaqynayaa in ay la mid tahay sidii looga shaqeeyey. Hawlgalka 1 u cadee. Kadibna u faahfaahi in marwo Deeqa laba xidhmood oo qoryo ah ayey leedahay markaan lee nahay ucadee in taasi ay ka dhigan tahay in ay haysato laba kooxood oo qoryo ah oo xidhmadii kastaaba ay ka kooban tahay toban halo oo qori. Sidaas darteed Deeqa inta qori ee ay haysato u cadee in isugeyn lagu garan karo $(10 + 10 = 20)$ oo ay taasi na ka dhigan tahay ama le'eg tahay 2×10.

Murtida Hawlgalka 2 si ay u hantaan ku amar inay ka shaqeeyaan Laylis 2. Kadib marka ay layliska 2 shaqeeyaan ku hogaami ardaydu in ay u fiirsadaan in marka tiro kasta oo eber ka duwan lagu dhufto 10 ay natiijadu tahay taradii oo dhinaca midig laga raaciyey eber '0'. Tusaale ahaan tus in marka 6 lagu dhufto ay natiijadu tahay 60.

Jawaabaha Layliska 1 iyo Layliska 2

Ku dhiiri gali ardaydu in Jawaabaha laylisyadan ay u qoraan qaab shax isku dhufasho ahaan ah. Taas oo ah in ay shaxda ku qoraan su'aasha iyo Jawaabahooda sida hoostan loogu muujiyey kadibna ku dhiirigali in ay korka ka qabtaan.

Jawaabaha Layliska 1   Jawaabaha layliska 2

$1 \times 2 = 2$	$1 \times 10 = 10$
$2 \times 2 = 4$	$2 \times 10 = 20$
$3 \times 2 = 6$	$3 \times 10 = 30$
$4 \times 2 = 8$	$4 \times 10 = 40$
$5 \times 2 = 10$	$5 \times 10 = 50$
$6 \times 2 = 12$	$6 \times 10 = 60$
$7 \times 2 = 14$	$7 \times 10 = 70$
$8 \times 2 = 16$	$8 \times 10 = 80$
$9 \times 2 = 18$	$9 \times 10 = 90$
$10 \times 2 = 20$	$10 \times 10 = 100$

Tabaha Qiimaynta

Xiliga geedi socodka baris carasho ee easharka hirgalintiisa lagu hawlanyahay su'aalaha u baruhu marku fasalka ku weydiiyo Jawaabaha ay ardaydu ka bixinayso inta uu qiimeeyo oo uu islamarkana saxo kasakaw waa in uu su'aalo intu sabuurada ku qoro nasiib ahaan hal ama laba arday intu soo kiciyo uu weydiyaa in ay ka shaqeeyaan. Wuxuuna sidaas ku qiimayn karaa inta ay ardaydu casharka ka fahantay.

Sidoo kale in uu ogaado in si kalsooni ah ay u fahmeen casharka waa in uu layliska 3 u siiyaa shaqo fasal ahaan ah iyo shaqo guri ahaan ah.

Jawa baaha Layliska 3

1.   b.   2   t. 4   j. 16   x. 90   kh. 80   d. 60   r. 20

     s.   12   sh. 18

2. 2, 4 , 6, $\boxed{8}$, $\boxed{10}$, $\boxed{12}$, $\boxed{14}$, $\boxed{16}$, $\boxed{18}$

3. b. 12   t. 20   j. 16   x. 18   kh. 30   d. 90

4. b. b=2   t. x=1   j. t=10   x. d=7   kh. r=10

     d.   t=10   r. c=10   s. f=10

5. 6

6. 10

7. 20
8. 50, 60, 70, 80, 90
9. b. 16   t. 40   j. 40   x. 6

2.1.2 Isuqaybinta qaybshahoodu yahay 2 ama 10 ee aan hadhaaga Lahayn

Casharkan baristiisa waxaad ku bilaabi kartaa adiga oo ardayda xusuusinaya in casharadii qayb hoosaadkai 2.1.1 ay ku soo barteen iskudhufashada tirooyinka idil iyo tirada 2 ama tirade 10. Islamarkaana xusuusi in ay taranta ku soo saareen iyaga oo isticmaalaya isugeyn ku celcelin ah. Tusaale ahaan xusuusi in natiijada $2 \times 3 = 6$ la heli karo haddii 3da laba jeer la isugeeyo sidoo kale natiijada 4×2 waxaa la heli karaa 2 da marka 4 jeer inta lagu celceliyo la isugeeyo.

Kadibna, isuqaybinta bilaabisteeda waxaad gogoldhig uga dhigan kartaa su'aalaha Hawlgalka 3. Kuwaas oo ardaydu iyaga oo koox koox ah markay falanqeeyaan oo ay ka shaqeeyaan dabadeed in intaad Jawaabaha u soo bandhigtid oo aad casharka sidaas ku bilawdid waad kartaa. Hawlgalka 3 ee bogga 46 buugga xisaabta ee ardayga lagu dhigay su'aasha ku taala waxay tahay macalin Daahir 12 kubadood haddii uu 2 kooxood u qaybiyo kooxkastaa imisa kubadood ayey heli. Suaashaas. Jawaabteeda si aad ardayda ugu falanqaysid laba arday dooro. Kadibna 12 qalin qori ardayda intad ka soo u rurusid dabdeedna labad arday ee aad dooratay kolba midi gacantaada hal galin ha ka qaataan ilaa inta uu qalin qorigu gacantaada ka madhnayo. Ugu danbaysta weydii labada arday midkastaaba inta qalin uu hayo oo ha u sheego ardayda fasalka. Su'aalo la mid ah weydii Adiga oo hawlgalkaas ka amba qaadaya. U soo bandhig ardayda in isuqaybinta lagaga shaqayn karo kalagoyn ku celalin ah. Si ay fikradaas u fahmaan ku hogaami in ay su'aalo badan ka shaqeeyaan.

Tabaha Qiimaynta

Geedi socodka baris barasho ee casharka loogu Jiro su'aalaha kolba la weydii ardayda inta loo fiirsado habka barsista casharka inta kolba la badalo oo lagu beego heerka ay ardaydu ku sugan tahay waxqabadyada baris barasho waa la toos toosin karaa. Intaas ka sakaw si loo hirgaliyo ujeedooyinka gaarka ah ee casharka su'aalo la mid ah sida $12 \div 2$, $20 \div 10$, $40 \div 2$ inta la weydiiyo fahankooda waa la qiimayn karaa.

Jawaabaha layliska 5

1. b. 14   t. $14 \div 2 = 7$
2. $18 \div 2 = 9$

3. b.

t	10	20	30	40	50	60	70	80
t ÷ 10	1	2	3	4	5	6	7	8

c	8	6	14	18	12	5

c ÷ 2	4	3	7	9	6	5

t.

Jawaabaha Layliska 6

b. 7   t. 8   j. 9   x. 7   kh. 8   d. 9

r. 2   s. 2   sh. 2   dh. 2   c. 2   g. 2

Jawaabaha Layliska 7

b. $4 \div 2$
$$\begin{array}{cc} 4 & 2 \\ \dfrac{-2}{2} & \dfrac{-2}{0} \end{array}$$
sidaas darteed $4 \div 2 = 2$

j. $18 \div 2$
$$\begin{array}{ccccccccc} 18 & 16 & 14 & 12 & 10 & 8 & 6 & 4 & 2 \\ \dfrac{-2}{16} & \dfrac{-2}{14} & \dfrac{-2}{12} & \dfrac{-2}{10} & \dfrac{-2}{8} & \dfrac{-2}{6} & \dfrac{-2}{4} & \dfrac{-2}{2} & \dfrac{-2}{0} \end{array}$$

sidaas darteed $18 \div 2 = 9$

x. $10 \div 2$
$$\begin{array}{ccccc} 10 & 8 & 6 & 4 & 2 \\ \dfrac{-2}{8} & \dfrac{-2}{6} & \dfrac{-2}{4} & \dfrac{-2}{2} & \dfrac{-2}{0} \end{array}$$

sidaas darteed $10 \div 2 = 5$

kh. $20 \div 2$
$$\begin{array}{cccccccccc} 20 & 18 & 16 & 14 & 12 & 10 & 8 & 6 & 4 & 2 \\ \dfrac{-2}{18} & \dfrac{-2}{16} & \dfrac{-2}{14} & \dfrac{-2}{12} & \dfrac{-2}{10} & \dfrac{-2}{8} & \dfrac{-2}{6} & \dfrac{-2}{4} & \dfrac{-2}{2} & \dfrac{-2}{0} \end{array}$$

sidaas darteed $20 \div 2 = 10$

d. $14 \div 2$
$$\begin{array}{ccccccc} 14 & 12 & 10 & 8 & 6 & 4 & 2 \\ \dfrac{-2}{12} & \dfrac{-2}{10} & \dfrac{-2}{8} & \dfrac{-2}{6} & \dfrac{-2}{4} & \dfrac{-2}{2} & \dfrac{-2}{0} \end{array}$$

sidaas darteed $14 \div 2 = 7$

2.2 ISKUDHUFASHADA 0 AMA 1 IYO TIRO KALE IYO ISUGAYBINTA QAYBSHAHEEDU YAHAY 1

Wagtia 100 goondeeyey 8 xiisaddod.

Ujeedooyinka gaarka ah ee casharka

Casharkani marku dhamaado dabadeed ardaydu waxay awood u yeelan doonaan in ay:

- *iskudhuftaan tirooyinka idil iyo tirada '0' ama tirada 1.*
- *isugaybin karaan isugaybinta gaybshaheedu yahay 1.*

Hordhac

Ardaydu waxay qayb hoosaadkii 2.1 ee cutubkan ku soo barteen in ay isku dhuftaan tirooyinka idil ilaa 100 iyo tirada 2 ama tirada 10 iyo isuqaybinta tirooyinka idil ilaa 100 oo loo qaybinayo tirada 2 ama 10. Haatanna qayb hoosaadkan cutubka waxay ku baran islu dhufashada tirooyinka idil iyo tirada '0' ama tirada 1 iyo isuqaybinta tirooyinka idil iyo tirada 1.

2.2.1 Iskudhufashada 0 ama 1 iyo tiro kale

Ardaydu si ay u fahmaan fikrada nuxurka u ah marka tiro idil lagu dhufto tirada '0' ama tirada'1'

Waxaa loo baahan yahay inaad ardayda ku hogaamisid in ay si sax ah u fahmaan hawlgalka 5 ee lagu muujiyey buugga xisaabta ee ardayga bogga 50. Ardaydu si ay u fahmaan hawlgalka waxa loo, baahan yahay in hawlgalka lala xidhiidhiyo hawlaha nolol maalmeedka.

Tusaale ahaan ganacsada liinta ka ganacsada halkii killo haddii uu ku gado 8 Birr laba kilo haddii uu gado qayb hoosaakii 2.1 sidaad ku soo barateen tirada killooga iyo qiimaha halka kiilo marka la isku dhufto inay 16 Birr noqon u cadee. Sidoo kale hadaba 1 kiilo haddii uu gado waa in aad ardayda u cadaysaa in qiimuhu uu noqon natiijada isku dhufashada 1 iyo 8. Sidoo kale ganacsaduhu haddii uunan liin gadin maalintaas in dhakhli liinta ka soo gashay ayn jirin sida arintaas loo cadayn karaa in ay tahay 0×8=0 ardayda usharax.

Baruhu weedh xisaabeedyo fara badan oo la xidhiidha ku dhufashada '0' iyo '1' inta u siiyo waa in uu ardayda ku hogaamiyo in ardaydu ku gabagabeeyaan in " Tiro kasta marka lagu dhufto "0" ay tarantoodu tahay '0' iyo in " Tiro kasta marka lagu dhufto "1" ay tarantoodu tahay isla tiradii".

2.2.2 Isugaybinta qaybshaheedu yahay 1

Ardaydu markay ka shaqaynayaan isuqaybin qaybsha heedu yahay 1 waa in aad u cadaysaa in ay isticmaali karaan habkii hore ay usoo barteen. Tursaale ahaan u falanqee an natiijada 5÷1 ay heli karaan iyaga isticmaalaya habkii ay casharkii hore ku so barteen ee ahaa habka ku celcelinta kalagoynta. Habkaas oo ahaa sidan

$$5\div1= \quad \underset{4}{\dfrac{-1}{}}^{\;5} \quad \underset{3}{\dfrac{-1}{}}^{\;4} \quad \underset{2}{\dfrac{-1}{}}^{\;3} \quad \underset{1}{\dfrac{-1}{}}^{\;2} \quad \underset{0}{\dfrac{-1}{}}^{\;1}$$

Sidaas darteed. $5 \div 1 = 5$

Kadibna ku hogaami ardaydu inay ku soo gabagabeeyaan in 'Tiro Kasta marku uu qaybshaheedu yahay 1 in qaybtu ay tahay isla tiradii.

Tabaha Qiimaynta

Ardayda ku dhiiri gali in ay shaqo fasal ahaan ah iyo shaqo quri ahaan uga shaqeeyaan layliska 8 iyo layliska 9. Intaas ka sakaw su'aalo dheeraad ah subuurada intaad ugu qortid ku dhiiri gali in ay ku shaqeeyaan

Jawaabaha Layliska 8

b. 5   t. 16   j. 10   x. 0   kh. 0   d. 0

r. 0   s. 0   sh. 0

Jawaabaha Layliska 9

1. b. 8   t. 0   j. macma xisaabeed ma laha.

    x. 0   kh. 1   d. macma xisabeed ma laha.

    r. macna xisaabeed ma laha.

2. b. 1   t. 0   j. 1   x. 0   kh. 12   d. 0

3. b. $0 \div 2$ $\boxed{<}$ 2   b. $0 \div 1$ $\boxed{=}$ 0   j. $6 \div 1$ $\boxed{>}$ 6×0

    x. $6 \div 2$ $\boxed{=}$ $12 \div 4$ kh. 8×1 $\boxed{>}$ $6 \div 1$

4. 16.

2.3 ISKUDHUFASHADA 3, 4, 5, 6, 7, 8, 9 IYO TIROKALE. IYO ISUQAYBINTA QAYBSHAHEEDU YIHIIN 3 ILAA 9

Waqtiga loo qoondeeyey 22 xisadood

Ujeedooyinka gaarka ah ee casharka

Casharkan kadib ardaydu waxay awood u yeelan doonaan, inay

- *Tirooyinka idil ilaa 100 u tirin karaan saddex - saddex, afar - afar, shan - shan ilaa sagaal - sagaal waxayna sidaasi ka dhigan tahay inay tixi karaan dhufsaneyaasha 3, 4, 5, 6, 7, 8, 9*

- *Tiro kasta oo 1-God ah ku dhufan karaan tiro kale oo 1 - god ah oo tarantoodu ilaa 100 gaadhayso.*

- *Furfuri karaan weedh - xisaa beedyada fudud ee ah tiro 1 - god ah oo lagu dhuftay tiro kale oo 1 - god ah.*

- *Ka shaqayn karaan isuqaybinta aan lahayn hadhaa ee uu qaybshaheedu yihiin 3 ilaa 9 laqaybshaheeduna yihiin tirooyinka idil ilaa 100.*

- *Adeegsadaan xidhiidhka ay leeyihiin iskudhufashadu iyo isuqaybinta tirooyinka 1 - God ah.*

Erayada Muhiimka ah

Isku dhufasho, Isuqaybin.Tiro ku tirinta saddex - saddex, afar - afar IWL.

Dhufsaneyaasha 3, 4, 5, 6, 7, 8, 9.

Waxqabadyada baris - barasho

- Si aad ardayda u fahamsiisid isku dhufashada 3, 4, 5, 6, 7, 8, 9 iyo tiro kale waxaad adeegsan kartaa laydi loo qoybiyey labajibbaaranayaal yar - yar tusaale ahaan marka la rabo in la helo taranta 3 iyo 6 ama 3 × 6 tus ardayda sida laydiga loogu adeegsada isaga oo labajibaaraneyaal yar-yar loo qaybinayo.

$3 + 3 + 3 + 3 + 3 + 3$

$3 \times 6 = 18$
$6 \times 3 = 18$

Kadib markaad sidaas u tustid waydi ardyada iyaga oo koox koox ah oo adeegsanaya laydi loo qaybiyey labajibaaraneyaal yar yar in ay soo saaraan taranadan hoos lagu tilmaamay

b. 3 × 5   t. 3 × 7   j. 3 × 9   x. 3 × 9

Ardaydu iyaga oo hawlgalkan ka amba qaadaya ku dhiirigali in ay soo saaraan taranta ilaa 100 ee 4, 5, 6, 7, 8, 9 iyo tiro kale.

Tus ardayda sida ay tirooyinka idil u tirin karaan saddex - saddex iyaga oo adeegsenaya xarriiqa tirada sida hoostan lagu muujiyey

Sidaas darted ardayda u sharrax marka tirooyinka idil saddex-saddex loo tiroyo sida xariiqa tirada ka muuqata tirooyinka la helayaa in ay yihiin 3, 6, 9, 12, 15 --- u sheeg ardayda in tirooyinkaas loo yaqaano dhufsaneyaasha 3. Sidoo kale weydii ardyda in sida tusalaha lagu muujiyey ay tirooyinka idil u tiriyaan afar-afar, shan-shan IWM oo isla markaana ay qoraan dhufsaneyaasha 4 dhufsaneyaasha 5 IWM. Ardayda waxaa looga baahan yahay in dhufsaneyaasha 3, 4, 5, 6, 7, 8 iyo 9 inta ay ku celceliyaan ay xafidaan islamarkaana ay afka tiraab ahaan ka sheegi karaan. Taa kasakow waa in ay qoraal ku muujin karaan.Hadaba si ay taasi u suurta gasho u hogaami ardyda in ay sameeyaan.

Shaxo kala duwan oo iskudhufasho ah.Tusaale ahaan ku diiri gali in ay sameeyaan shaxda dhufsaneyaasha 3 ilaa 30.Sidoo kale ha sameeyaan shaxda dhufsaneyaasha 4 ee ilaa 40.Waxaa loo baahan yahay in ardydu ay xafidaan oo ay afka ka sheegi karaan shax kasta dhufsaneyaasha ay ku qoreen.

Marka aad u sharaxaysid sida loo sameeyo shaxda iskudhufashada ee 3 waxaad isticmaali kartaa Hawgalka 6^{aad} buugga xisaabta ee ardayga ee ku yaala bogga 52.Caawi ardayda si ay ugu fiir sadaan oo ay u fahmaan sida isugeynta loo adeegsado marka la dhisayo ama la samaynaya shaxda iskudhufashada.

Jawaabta Hawlgalka 6 (bogga 52)

△ 1 saddexagal oo min 3 dhinac ah $3 = 1 \times 3$

△ △ 2 saddexagl oo min 3 dhinac ah $3 + 3 = 2 \times 3 = 6$

△ △ △ 3 saddexagl oo min 3 dhinac ah $3 + 3 + 3 = 3 \times 3 = 9$

△ △ △ △ 4 saddexagl oo min 3 dhinac ah $3 + 3 + 3 + 3 = 4 \times 3 = 12$

Jawaabaha hawlgalka markaad sidaas ugu sharaxdid dabadeed ku hogaami ardayda in iyaga oo adeegsanaya isugeyn ay sidan hoos lagu muujiyey ay u sameeyaan ama dhisaan shaxda isku dhufashada ee 3 (ama shaxda dhufsaneyaasha 3).

Shaxda dhufsaneyaasha 3

$$
\begin{aligned}
1 \times 3 &= 3 \\
2 \times 3 &= 3 + 3 = 6 \\
3 \times 3 &= 3 + 3 + 3 = 9 \\
4 \times 3 &= 3 + 3 + 3 + 3 = 12 \\
5 \times 3 &= 3 + 3 + 3 + 3 + 3 = 15 \\
6 \times 3 &= 18 \\
7 \times 3 &= 21 \\
8 \times 3 &= 24 \\
9 \times 3 &= 27 \\
10 \times 3 &= 30
\end{aligned}
$$

Shaxda Dhufsaneyaasha 4

$$
\begin{aligned}
1 \times 4 &= 4 \\
2 \times 4 &= 4 + 4 = 8 \\
3 \times 4 &= 4 + 4 + 4 = 12 \\
4 \times 4 &= 4 + 4 + 4 + 4 = 16 \\
&. . \\
&. . \\
&. . \\
10 \times 4 &= 4 + 4 + 4 + 4 + 4 + 4 + 4 + 4 + 4 + 4 = 40
\end{aligned}
$$

Marka ad hubisid in ardaydu ay fahmeen tusaalooyinka sare ee ku saabsan samaynta shaxaha dhufsaneyaasha 3 iyo 4 iyada oo la adeegsanayo isugeyn lagu celcelinayo.Hase yeeshee waa in aad

ardayda u cadaysaa in dhufsaneyaasha ilaa 100, oo la isku dayo in shaxda sare oo kale loo sameeyo iyada oo la adeegsaneyo isugeyn ay dhib badan tahay.Sidaas darteed ardayda u cadee in marka laga shaqaynayo xisaabfalka iskudhufashada ay muhiim tahay in la isticmaalo shaxda iskudhufahada.

Sida haatan ka hor aan u soo falanqaynay marka la barayo xisaabfalada iskudhufashada iyo isuqaybinta waxaa la adeegsan karaa laydi labajibaaranayaal yar-yar loo qaybiyey.

2.3.1 Iskudhufashada 3 iyo tiro kale Iyo Isuqaybinta u qaybshaheedu yahay 3

Casharka waxaad ku bilaabi kartaa adiga oo ardyda xasuusinaya marka laga shaqaynayey Hawlgalka 6^{aad} bogga 52 ee buuga xisaabta ee ardyga ee ku saabsanaa raadinta inta qori ee loo baahan yahay in la sameeyo 4 saddexagal haddii halkii saddexagal uu ubahan yahay 3 qori.

$$3 + 3 + 3 + 3 = 4 \times 3 = 12$$

Adiga oo adeegsanaya laydi loo qaybiyey labajibaaraneyaal yar - yar, cawi ardyda si ay u fahmaan iskudhufashada.

Laydigan gudihiisa marka

Aan u tirino bidix ilaa dhinaca

Midigta waxaan helaynaa 3 min

6 labajibaaraneyaal ah.

$6 + 6 + 6 = 3 \times 6 = 18$. Weedhaas

Markaaan iskudhufasho lagu qeexo

Waxay ka dhigan tahay 6 da marka aan 3 jeer isugeyno waxay la mid tahay oo ay noqon 3×6.Sidaas darteed guud ahaan laydiga waxaa ku jirta 18 hal oo labajibarne yaal ah.

Isuqaybinta U qaybshaheedu Yahay 3

Shaxda iskudhufahada ee dusha lagu muujiyey iyada oo la adeegsanayo habka isuqaybinta ayaa sidan loo qeexi karaa.

Laydigu wuxuu ka kooban yahay oo gudihiisa ku jirta 18 labajibaaraneyaal.Laydiga haddii dhinaca jiifka ah aan u qaybino 3 meelood oo isle'eg, qaybtii walba waxay lahaaneysaa 6 labajibaarenayaal.

Sidaas darted $18 \div 3 = 6$ ayey noqon sababto ah $6 \times 3 = 18$.

Anaga oo halkaas ka amba qaadayna ayaa waxaan gabagabaynayna sidan.

Hadii $6 \times 3 = 18$ ay tahay markaas b. $18 \div 3 = 6$

<div align="center">t. $18 \div 6 = 3$ ayey noqon</div>

Markaad sidaas u tustid dabadeed waxaad ardayda ka dhaadhicin oo aad fahamsiin kartaa xidhiidhka ka dhexeeya isku dhufashada iyo isuqaybinta Ardydu in ay si taaba gal ah u fahamto xidhiidhka iskudhufashada iyo isuqaybinta oo ah fikrada xudunta u ah qayb hoosaadka cutubkan, waxaa loo baahan yahay in ardayda la siiyo su'aalo dheeraad ah. Sidaas darteed su'aalahan soo socda ama kuwa la mid ah sabuurada inta ad ugu qortid fasalka iyaga oo koox koox ah ha ka shaqeeyaan.

b. haddii $5 \times 3 = 15$ markaas $15 \div 3 =$ _____ ayey noqon

t. haddii $8 \times 3 = 25$ markass $24 \div 3 =$ _____ ayey noqon

j. haddii $3 \times 9 = 27$ markaas $27 \div 9 =$ _____ ayey noqon

x. $30 \div 3 = 10$ sababtuna $3 \times$ _____ = _____

Su'aalaha sare waxaan ka fahmaynaa in natiijada isuqaybinta lagu hubin karo iskudhufasho; taas kasakaw waxa inoo muuqata in fikrada nuxurka u ah isuqaybinta lagu qeexi karo iskudhufashada.

Si hadaba aragtidaas xooga loo saaro oo ay ardydu u fahamto labada xisaabfal ee iskudhufashada iyo isuqaybinta ardyda ku diirigali in ay sameeyaan shaxda iskudhufashada ee 3 iyo shaxda isuqaybinta ee 3 sida hoos loogu muujiyey.

Shaxda Iskudhufashada ee 3   **Shaxda Isuqaybinta ee3**

$1 \times 3 = 3$	$3 \div 3 = 1$
$2 \times 3 = 3 + 3 = 6$	$6 \div 3 = 2$
$3 \times 3 = 3 + 3 + 3 = 9$	$9 \div 3 = 3$
$4 \times 3 = 3 + 3 + 3 + 3 = 12$	$12 \div 3 = 4$
$5 \times 3 = 3 + 3 + 3 + 3 + 3 = 15$	$15 \div 3 = 5$
$6 \times 3 = 3 + 3 + 3 + 3 + 3 + 3 = 18$	$18 \div 3 = 6$
$7 \times 3 = 3 + 3 + 3 + 3 + 3 + 3 + 3 = 24$	$21 \div 3 = 7$
$8 \times 3 = 3 + 3 + 3 + 3 + 3 + 3 + 3 + 3 = 24$	$24 \div 3 = 8$
$9 \times 3 = 3 + 3 + 3 + 3 + 3 + 3 + 3 + 3 + 3 = 27$	$27 \div 3 = 9$
$10 \times 3 = 3 + 3 + 3 + 3 + 3 + 3 + 3 + 3 + 3 + 3 = 30$	$10 \div 3 = 10$

Shaxahan oo ardayda ka caawinaya siday u fahmayaan fikrad-nuxurka aasaasiga u ah iskudhufashada iyo isuqaybinta Baruhu (macalinku) waa in u ardayda ku diiri galiyo si ay iyaga ku celcelinaya ay labada shaxood intay akhristaan ay korka ka qabataan.

Ardaydu ilaa imika waxay soo barteen si aad u sii xoojisid waa in aad laylisyada 10, 11 iyo 12 ee ku yaala buuga xisaabta ee ardayga (boggaga 53, 54 iyo 55) aad ku amartaa in su'aalaha qaarkood shaqo guri ahaaneed kuwa kale na ad shaqo fasal uga dhigtid.

Kadib marka ay ka shaqeeyaana waa in aad saxdid.

Tabaha Qiimaynta

Hayaanka loogu jiro fulinta hawlaha baris-barasho su'aalaha la xidhiidha ee ardayda la weydiiyo, jawaabaha ay ardaydu ka bixinayaan, iyo xogaha laga soo ururiyo aragtida fasalka dhexdiisa laga lakulmo marka la wado hawlaha baris-barasho iyada oo laga amba qaadayo waxa la diyaarin karaa tabo lagu xoojin karo hawlaha baris-barasho.Si hadaba loo hubiyo hanashada ujeedooyinka baris - barasho waa in aad ardayda weydiisaa in ay ka jawaabaan su'aalahan soo socda, ama kuwa la mid ah.

Tusaale 1. Taxa dhufsaneyaasha 3 ilaa 25

       2. 15 buug, 9 qalin iyo 6 qalin qori haddii 3 arday loo qayqaybiyoo ardygii kasta imisa hal oo buug imisa qalin, imisa qalin qori ayuu heli?

Jawaabaha Layliska 10

2. b. $\boxed{4} \times \boxed{3} = 12$ $\boxed{5} \times \boxed{3} = \boxed{15}$

3.   Dhamaan tirada xiddiguhu waa $\boxed{6} \times \boxed{3} = \boxed{18}$

4.   b.   6   t.   21   j.   18   x.   0   kh.   27

     d.   3   r.   0   s.   15

5.   b.   18   t.   24   j.   27   x.   21   kh.   30

Jawaabaha Layliska 11

1. b.   t.

b	$3 \times b$
7	21
4	12
10	30
1	3
6	18

b	$b \times 3$
3	9
8	24
5	15
0	0
9	27

2. t. 21   j. 27   x. 15, 18, 21

Jawaabaha Layliska 12

1.   15,   5   2. 7

3.   b. 2   t. 1   j. 4   x. 3   kh. 9   d. 8   r. 7   s. 9   sh. 6

4.   4

5.   9

2.3.2 Iskudhufashada 4 iyo tirokale Iyo Isuqaybinta uu Qaybshaheedu yahay 4

B.　　Isku dhufashada 4 iyo tiro kale

Iskudhufashad 4 hawlgalka ku saabsan ee ku yaala buuga xisaabta ee ardyga marka ay ka shaqeeyaan dabadeed waxaad kari kartaa in inta aad weydiisid masaloo fudud aad u sharaxdid sida looga shaqeeyo.

Tusaala ahaan weydii in ay ka shaqeeyaan masaladan hoose:

"5 caruur ah midkashtaba haddii uu gurigooda agagaarkiis ku beero 4 geed guud ahaan imisa geed ayey beereen"

Jawaab5ta caruur geedaha ay beereen: 4+4+4+4+4 = 20

$$5 \times 4 = 20$$

Sidaas darteed 5ta caruur tirada geedaha ay beereen waa 20.Haddii loo baahdo in la siiyo tusaale dheeraad ah sidii haatan ka hor aan u adeegsanay inta laydi loo qayb qaybiyo labajibaaraneyaal yar yar ayaa ardayda la tusi karaa xisaabfalka isku dhufashada.

Tusaale.

4
4
4
4
　6　6　6　6

Laydigan gudihiisa bidix ilaa dhinaca midigta marka aan u socono waxaa helaynaa 4 min 6 labajibaaraneyaal.

　　6+6+6+6 = 24

　　Isugeyntan sida ka muuqata 6 da afar jeer ayaan isugeynay

Sidaas darteed 6+6+6+6= $4 \times 6 = 24$

Dusha waxqabadyada aan gogol dhig ahaan u soo bandhignay ardaydu marka ay fahmaan dabadeed shaxda iskudhufashada ee 4 intaad samaysid ku diiri gali ardaydu si ay akristaan.

Shaxda isku dhufashadaee 4

$1 \times 4 = 4$
$2 \times 4 = 8$
$3 \times 4 = 12$
$4 \times 4 = 16$
$5 \times 4 = 20$
$6 \times 4 = 24$
$7 \times 4 = 28$
$8 \times 4 = 32$
$9 \times 4 = 36$
$10 \times 4 = 40$

Ardaydu markay ku dhufashada 4 korka intay ka qabtaan ay markasto lawegdiiyo ay afka ka sheegi karaan dabadeed waa in aad layliska 13 ee ku yaala buugga xisaabta ee ardayga aad ku amartaa in ay uga shaqeeyaan shaqo fasal ahaan ah iyo shaqo guriahaan ah. Intaas ka sakaw weydii in ay tirooyinka idil ee ah dhufsane yaasha 4.

Isuqaybinta uu qaybshaheedu yahay 4

Hawlgalka 9^{aad} ee casharka gogoldhiga u ah ee ku yaala buugga xisaabta ee ardayga inta ayn ka shaqayn horteed fikrada isuqaybinta 4 iyo tiro kale waxaad ardayda ugu sharixi kartaa adiga oo adeegsanaya laydi loo kala qayb qablyey laba jibaraneyaal yar yar.

4			
4			
4			
4			
4			
4			

6 6 6 6

Sida ka muqata laydigu wuxuu leeyahay 24 labajibarneyaal.Laydiga dhinaciisa jiifka ah haddii loo qaybiyo 4 qaybood oo isle'eg qaybtii kastaa waxay lahaan 6 labajibaaraneyaal.Sidaas darteed 24 ÷ 4 = 6 sababtuna waxay tahay 4 × 6 = 24.

Haatan ka hor sidii aan ku soo aragnay qayb hoosaadyadii hore ee cutubkan imikadan na waa in aad ardayda u sharaxda sida natiijada isuqaybinta loogu hubin karo isku dhufasho. Sidoo kale waa in aad ardayda ku amartaa in ay sameeyaan (dhiisaan) shaxda iskudhufashada ee 4 iyo shaxda isuqaybinta ee 4. Ardaydu aqoontooda la xidhiidha xisaabfalka isuqaybinta si loo kobciyo waxa loo baahan in ardayda la aqoonsiiyo si ay karti ugu yeeshaan kala saarista erayaada muhiimka u ah isuqaybinta ee kala ah laqaybshe, qaybshe iyo qaybta. Tusaale ahaan weedha 12 ÷ 4 = 3 tirooyinka ay ka kooban tahay in 12 ay ta hay laqaybshe, 4 qayshe iyo 3 qayb markaad u sharaxdid dabadeed waa in aad u soo bandhigtaa fikrada isuqaybinta nuxurka uu ah. Laqaybshe = qabshe × qayb. Si aad fikrad nuxurkaas aad ardayda u fahamsiisid waxaad samayn kartaa in su'aalaha layliska qaar kood ad tusaale ahaan u isticmaashid.

Jawaabaha Layliska 13

1.   b. 24   t.16   j.36   x.4   kh. 28   d. 40   s. 32   sh.   12

2.   b. $\boxed{4}$ t. $\boxed{3}$ j. $\boxed{7}$ x. $\boxed{5}$ kh. $\boxed{1}$

3.   b.   t = 6   t.   c = 4   j.   m = 4   x.   h = 4   kh.   d = 1

4.   b.   <   t.   <   j.   =   x.   =   kh.   >d.   >

5.   16, 20, 24, 28, 32, 36.

6.   5

5.   16, 20, 24, 28, 32, 36.

6.   5 × 4 = 20

7.   4 × 10 = 40

Jawaabaha Layliska 14

j.   4   x.   7   kh.   1   d.   8   r.   0   s.   9

Jawaabaha Layliska 15

1. b.   laqaybshe = 20, qaybshe = 4 qayb = 5

    t.   laqaybshe = 40, qaybshe = 4 qayb = 8

    j.   laqaybshe = 6, qaybshe = 2   qayb = 3

    x.   laqaybshe = 12, qaybshe = 4 qayb = 3

    kh. laqaybshe = 24, qaybshe = 4 qayb = 6

    d.   laqaybshe = 27, qaybshe = 3 qayb = 9

    r.   laqaybshe = 15, qaybshe = 3 qayb = 5

    s.   laqaybshe = 18, qaybshe = 3 qayb = 6

    sh. Laqybshe = 24 qaybshe = 4   qayb = 6

2. b. $\boxed{7}$ t. $\boxed{5}$ j. $\boxed{3}$ x. $\boxed{7}$ kh. $\boxed{5}$ d. $\boxed{3}$ r. $\boxed{4}$

    s. $\boxed{4}$ sh. $\boxed{4}$ dh. $\boxed{4}$ c. $\boxed{4}$ g. $\boxed{4}$

3. t. $12 \div 4 = \underline{3}$, $12 \div 3 = \underline{4}$

    j. $36 \div 4 = \underline{9}$, $36 \div 9 = \underline{4}$

4. b. >t. =   j. >x. >

5. $28 \div 7 = 4$. Sidaas darteed hal bug qiimihiisu waa 4 Birr

6. $20 \div 4 = 5$ sidaas darteed waxay ku iibsan 5 xabo oo sabuun ah

7. $\boxed{24} \xrightarrow{\div 4} \boxed{6} \xrightarrow{\div 2} \boxed{3} \xrightarrow{\times 4} \boxed{12}$

Jawaabaha Layliska 16

1. b.   32   t.   3   j.   4

2. Da'da warsame aabihii waa $4 \times 10 = 40$ sano.

3. $24 \div 4 = 6$ sidaas darteed muuse wuxuu leeyahay 6 neefoo geel ah.

4. $2 \times 9 = 18$. Sidaas darteed tirada bukaanka ee ay bishan qaabishay waa 18

2.3.3 Isku dhufashada 5, 6 iyo tiro kale iyo Isuqaybinta qaybshaheedu yahay 5 ama 6

B.   Iskudhufashada 5 ama 6 iyo tiro kale

Fikrada Iskudhufashada 5 ama 6 iyo tiro kale si aad u bartid waxaad casharka ku bilaabi kartaa adiga oo u falanqaynaya hawlgalka 10^{aad} ee ku yaala buugga xisaabta ee ardayga.Jawaabta hawlgalka u falanqee. 6 baakidh oo yar yar haddii midkastaaba qaado 5 qalin qori guud ahaan tirada qalin qorigu waa imisa?

$5 + 5 + 5 + 5 + 5 + 5 = 30$

$6 \times 5 = 30$

Sidaas darteed tirada guud ee qalin qoriga waa 30.

Adiga oo casharka baristiisa sii wada waxqabadyadaada waxa kaloo ka mid noqon kara in intaad samaysid (dhistid) shaxaha iskudhufashada 5 iyo 6 kadibna ad ardayda ku hogaamisid in ay akhristaan oo ay korka ka qabtaan.

Shaxda iskudhufashada ee 5   Shaxda iskudhufashada ee 6

$1 \times 5 = 5$	$1 \times 6 = 6$
$2 \times 5 = 10$	$2 \times 6 = 12$
$3 \times 5 = 15$	$3 \times 6 = 18$
$4 \times 5 = 20$	$4 \times 6 = 24$
$5 \times 5 = 25$	$5 \times 6 = 30$
$6 \times 5 = 30$	$6 \times 6 = 36$
$7 \times 5 = 35$	$7 \times 6 = 42$
$8 \times 5 = 40$	$8 \times 6 = 48$
$9 \times 5 = 45$	$9 \times 6 = 54$
$10 \times 5 = 50$	$10 \times 6 = 60$

Ardaydu si ay firkarada isku dhufashada ula xidhiidhin karto hawlaha nolol maalmeedkooda waxa loo baahan yahay in ardayda la weydiiyo in ay furfuran masalooyin fudud.

Tusaale: Gaadhi ayaa hal litir oo shidaal ah ku socon kara 5 kiilo mitir. Gaadhigu 6 litir oo shidaal ah imisa kilo mitir ayuu ku socon?

Habka looga shaqeeyo sabuurada sidan soo socota ugu sharax.

1 litir = 5 kilomitir ayuu socdaa

2 litir $2 \times 5 = 10$ kilo mitir ayuu socon

3 litir $3 \times 5 = 15$ kilo mitir ayuu socon

Sidaas darteed.6 litir $6 \times 5 = 30$ kilo mitir ayuu socon.

T.   Isuqaybinta Qaybshaheedu yahay 5 ama 6

Hawlgalka 11^{aad} ee ku yaala buugaa xisaabta ee ardayga markay ka shaqeeyaan dabadeed sidii casharadii hore oo kale adiga oo adeegsanaya laydi loo qayqaybiyey labajibaaranayaal yar yar isuqaybinta waad u falanqayn kartaa.

6   Sida ka muuqata laydiga wuxuu ka kooban yahay 30
6   labajibaraneyaal. Laydiga dhinaciisa qotoma marku 5 meelood oo
6   isle'eg loo qaybiyo, qaybtii kastaa waxay lahaan 6 labajibaraneyaal.
6
6   Sidaas darteed 30 ÷ 5 = 6. Sidoo kale laydiga dhiniciisa jiifka ah
marka 6 meelood oo isle'eg loo qaybiyo qaybtii kastaa waxay lahaan
5 labajibaaraneyaal. Sidaas darteed. 30 ÷ 6 = 5.

Isuqaybinta shaxda iskudhufashada oo qudhaata iyada oo la adeegsanayo waa laga shaqayn karaa.

Tusaale: b.   6 × 5 = 30. Sidaas darteed 30 ÷ 5 = 6

              t.   30 ÷ 5 = 6 sababtu waxay tahay 5 × 6 = 30

                      30 ÷ 6 = 5 sababtuna 6 × 5 = 30

Tusaalahan adiga oo raadraacaya su'aalahan tiraab ahaan (afka) weydii sababtana ha sheegaan.

b.   5 ÷ 5   15 ÷ 3   32 ÷ 4

      5 ÷ 1   20 ÷ 5   30 ÷ 6

      15 ÷ 5   20 ÷ 4   36 ÷ 6

      10 ÷ 2   35 ÷ 5   24 ÷ 4

Su'aalo kuwaas la mid ah sii oo ardayda caawi si ay casharka u fahmaan. Ugu danbaysti ardayda u sheeg shaxahan hoose ee kala ah shaxda isuqaybinta ee 5 iyo shaxda isuqaybinta ee 6 haddii ay xafidaan oo ay korka ka qabtaan in shaqada isuqaybintu ay u fududaan.

5 ÷ 5 = 1	30 ÷ 5 = 6	6 ÷ 6 = 1	36 ÷ 6 = 6
10 ÷ 5 = 2	35 ÷ 5 = 7	12 ÷ 6 = 2	42 ÷ 6 = 7
15 ÷ 5 = 3	40 ÷ 5 = 8	18 ÷ 6 = 3	48 ÷ 6 = 8
20 ÷ 5 = 4	45 ÷ 5 = 9	24 ÷ 6 = 4	54 ÷ 6 = 9
25 ÷ 5 = 5	50 ÷ 5 = 10	30 ÷ 6 = 5	60 ÷ 6 = 10

Ardaydu si ay kartidooda isuqaybinta ugu isticmaali karaan hawlaha nolol maal-meedkooda la xidhiidha waa in aad siisaa si ay uga shaqeeyaan masalooyin garaadkooda u kobcin kara.

Tusaale: Qoys haddii 5 kiilo garaam oo sonkor ah ay todobaad ku filantahay, 20 kiilo garaam oo sonkor ah imisa todobaad ayey ku filnaan?

Ardaydu si ay ufurfuraan baraha waxa looga baahan yahay in ardayda uu u sheego in horta ay fahmaan su'aashu waxa ay tahay.Ardayda horay u tijaabisa waa in u dhiirigaliya $20 \div 5 = 4$ todobaad ayey sonkortu ku filnaan.

Jawaabaha Layliska 17

1.   b. 20   t.30   j.50   x. 49   kh.50   d. 40   r.   0   s. 5

2.   b.   10   t.14   j.48   x. 30

3.   b. 12   t. 48

4.   b. $3 \times 6 \le 20$ t. $0 \times 6 = 0$ J. $9 \times 5 \le 8 \times 6$

x. $7 \times 5 \le 6 \times 6$ kh. $3 \times 6 \le 20$ d. $6 \times 4 \equiv 4 \times 6$

5.   5 10 15 <u>202530354045</u>

6. b.

J	X	$J \times X$
5	9	45
4	5	20
3	5	15
5	7	35

t.

C	$C \times 5$
8	40
4	20
10	50
6	30

7. $6 \times 9 = 54$ bug ayey u bahan.

8. $4 \times 10 = 40$ ∴sidaas darted farahoodu waa 40.

9. 42

Jawaabaha Layliska 18

1. b. 7   t. 1   J. 3   x. 10

2. b. $10 \div 5 = 2$ sababtuna $5 \times 2 = 10$ t. $45 \div 5 = 9$ sababtuna $5 \times 9 = 45$

   J. $45 \div 5 = 1$ sababtuna $5 \times 1 = 5$ x. $25 \div 5 = 5$ sababtuna $5 \times 5 = 25$

   Kh. $14 \div 2 = 7$ sababtuna $2 \times 7 = 14$ d. $42 \div 6 = 7$ sababtuna $6 \times 7 = 42$

   r. $54 \div 6 = 9$ sababtuna $6 \times 9 = 54$ S. $6 \overline{)30}^{\,5}$ sababtuna $5 \times 6 = 30$

   sh. $6 \overline{)24}^{\,4}$

3. b.

X	15	40	25	35	0	20
$x \div 5$	3	8	5	7	0	4

X	30	60	6	36	18	42
$x \div 6$	5	10	1	6	3	7

Jawaabaha Layliska 19

1. b. J= 8   t. d=32   J. r=8   X. t=8   kh. X=5

   d. x=4   r. x=3   s. b=4   sh. t=4

2. 7 Birr   3.b. 3muus   t. 4 liin macaan

2.3.4 Iskudhufa shada 7, 8, 9 Iyo Tiro kale Iyo Isuqaybinta Qaybshaheedu yahay 7, 8 ama 9

Ardaydu madaama ay casharadii hore ka soo shaqeeyeen shaqooyin iskudhufasho iyo isuqaybn ah casharkan baristiisa waxaad ku bilaabi kartaa adiga oo ardayda ku amraya in ay horta ka shaqeeyaan hawlgalada gogoldhiga u ah casharka. Kadib shaxaha iskudhufashada ee 7, 8 iyo 9 intaad samaysid ardayda ku dhiirigali in ay xafidaan.

 Shaxda iskudhufashada ee 7   shaxda isku dhufashada ee 8   shaxda Iska dhufashada ee 9

$1\times 7=7$	$1\times 8 = 8$	$1\times 9 = 9$
$2\times 7=14$	$2\times 8 = 16$	$2\times 9 = 18$
$3\times 7= 21$	$3\times 8 = 24$	$3\times 9 = 27$
$4\times 7=28$	$4\times 8 = 32$	$4\times 9 = 36$
$5\times 7=35$	$5\times 8 = 40$	$5\times 9 = 45$
$6\times 7=42$	$6\times 8 = 48$	$6\times 9 = 54$
$7\times 7=49$	$7\times 8 = 56$	$7\times 9 = 63$
$8\times 7=56$	$8\times 8 = 64$	$8\times 9 = 72$
$9\times 7=63$	$9\times 8 = 72$	$9\times 9 = 81$
$10\times 7=70$	$10\times 8 = 80$	$10\times 9 = 90$

Sidii casharadii hore adiga oo adeegsanaya laydi loo qayqaybiyey labajibaaraneyaal yar yar; ayaad isuqaybinta u falanqayn kartaa.Sidoo kale ardayda u sharax sida iyada oo la isticmaalaya shaxda iskudhufashada looga heli karo natiijooyinka isuqybinta. Sidaas darted sidan hoos lagu muujiyey ugu caddee.

$72\div 8 = 9$ sababtu $9\times 8 = 72$

$72\div 9 = 8$ sababtu $8\times 9 = 72$

$90\div 9 = 10$ sababtu $9\times 10 = 90$

Ugu danbays ardayda ku amar iyaga oo koox ah an ay sameeyaan (dhisaan) shaxha isuqaybinta ee 7, 8 iyo 9.

$7\div 7 = 1$	$8\div 8 = 1$	$9\div 9 = 1$
$14\div 7 = 2$	$16\div 8 = 2$	$18\div 9 = 2$
$21\div 7 = 3$	$24\div 8 = 3$	$27\div 9 = 3$
$28\div 7 = 4$	$32\div 8 = 4$	$36\div 9 = 4$
$35\div 7 = 5$	$40\div 8 = 5$	$45\div 9 = 5$
$42\div 7 = 6$	$48\div 8 = 6$	$54\div 9 = 6$
$49\div 7 = 7$	$56\div 8 = 7$	$63\div 9 = 7$
$56\div 7 = 8$	$64\div 8 = 8$	$72\div 9 = 8$
$63\div 7 = 9$	$72\div 8 = 9$	$81\div 9 = 9$
$70\div 7 = 10$	$80\div 8 = 10$	$90\div 9 = 10$

Adiga oo hubinaya ilaa imika casharadii ay soo barteen in ayardaydu fahantay ugu dan bays waxaad cutubkan aad ku soo gabagabayn adiga oo ardaydayda tusaya sida iskudhufashada iyo isuqaybinta tirooyinka 0 ilaa 10 looga heli karo shaxdan hoose.

	0	1	2	3	4	5	6	7	8	9	10
0	0	0	0	0	0	0	0	0	0	0	0
1	0	1	2	3	4	5	6	7	8	9	10
2	0	2	4	6	8	10	12	14	16	18	20
3	0	3	6	9	12	15	18	21	24	27	30
4	0	4	8	12	16	20	24	28	32	36	40
5	0	5	10	15	20	25	30	35	40	45	50
6	0	6	12	18	24	30	36	42	48	54	60
7	0	7	14	21	28	35	42	49	56	63	70
8	0	8	16	24	32	40	48	56	64	72	80
9	0	9	18	27	36	45	54	63	73	81	90
10	0	10	20	30	40	50	60	70	80	90	10

Jawaabaha Layliska 20

1. b. 14   t. 24   J. 36   x. 63   kh. 40   d. 54
2. b. 14   t. 56   J. 49   x. 54   kh. 48   d. 90
3. $7 \times 9 = 63$ maalmood.
4. .

b	$7 \times b$	$8 \times b$	$9 \times b$
5	35	40	45
3	21	24	27
0	0	0	0
8	56	64	72
1	7	8	9
10	70	80	90
6	42	48	54

5. b. $7 \times 8 \geq 50$ t. 24   J. 36   x. 63   kh. 40   d. 54

x. $2 \times 9 \geq 8 \times 2$ kh. $8 \times 9 \geq 7 \times 10$ d. $0 \times 9 \equiv 7 \times 0$

Jawaabaha Layliska 21

1. b.   0, 7, 14, _21_ , _28_ , _35_ , 42, 49, _56_
       t.   72, 64, 56, _48_ , 40, 32, 24, 16, 8
2.   b. B iyo F,   C iyo H,   D iyo G
t. A iyo E   B iyo G,   C iyo H   D iyo F
3. $7 \times 8 = 56$ kilomitir .
4. $7 \times 10 = 70$ Birr
5. b. $C = 3$ t. q=10   J. $C = 5$ x. $b = 0$ kh. q = 5   d. $C = 7$
6. $8 \times 9 = 72$

Jawaabaha Layliska 22

1. b. 2   t. 1   j. 8   x. 3   kh. 6   d. 7

    r. 7   s. 9   sh. 72

2. b. 3   t. 2   j. 3   x. 4   kh. 9   d. 0
   r. 6   s. 5

3. b.

t	$t \div 7$
35	5
0	0
14	2
42	6
2	3

t.

c	d	$c \div d$
24	8	3
70	7	10
0	9	0
35	7	5
27	9	3

4. $35 \div 7 = 5$ buug

5. 72 Birr $\div 8$ Birr $= 9$ buug

6. 9, 18, 27, 36, 45, 54, 63, 72, 81, 90

Juwaabaha Layliska Guud

2. b. 24   t. 7   j. 30   x. 18   kh. 9   d. 63
   r. 18   s. 64   sh. 90   c. 35   q. 40

3. b. 24   t. 56   j. 56   x. 30   kh. 6

4. b. 6   t. 6   j. 7   x. 9   kh. 5   d. 1
   r. 2   s. 7   sh. 5   dh. 7   c. 5   g. 5
   f. 1   n. 10   m. 3

5. b. 9   t. 6   j. 3   x. 4   kh. 8   d. 9

   r. 5   s. 9   sh. 1   dh. 4   c. 4   g. 7

6. b. $n = 4$ t. $c = 8$ j. $c = 8$ x. $c = 4$ kh. $n = 0$ d. $c = 9$

7. $5 \times 8 = 40$ Birr.

8. $8 \times 9 = 42$ Birr.

Cutubka 3aad CABBIRAADDA

Hordhac

Nolol maalmeedkeena waxaa inala darsa waxyaabo kala duwan sida cabbirka dhereka iyo culayska qiyaasta mugga. Tusaale ahaan waxaan cabbirnaa qiyaasta dherekeena. Wakhtiyada aynu iibsanayno xadhkaha laydhka (korontada) iyo maro waaraad ah waxaan u adeegsanaynaa in dhererkooda aan cabbirno. Marka aan adeega cuntada ku jirno waxaan qiyaasnaa ama cabbirnaa culayska shayga oo aan miisaan u adeegsano. Dhererka, culayska iyo mugga waa waxyaabaha nolol maalmeedkeena la xidhiidha ee ugu waa wayn ee aan cabbirno markaan isticmaalayno.

Haddaba cutubkan waxa ardayda lagu barayaa waxyaabaha la cabbiro sida qiyaasta dhererka, culayska iyo mugga. Islamarkaana iyagoo adeegsanaya halbeega cabbiradda waxay baranayaan sidii ay ugu qiyaasi lahaayeen dhererka, culayska iyo mugga.

Ujeeddooyinka Guud ee Cutubkan:

Cutubkani marka uu dhammaado kadib, Ardaydu waxay Awood u yeelan doonaan (Awood u yeelan karaan)

- *Adeegsiga Dhererka oo lagu cabbirayo Sentimitir (sm) iyo mitir (m)*
- *Isugeynta iyo kalagoyn Halbeegyada dhererka ee isku midka ah.*
- *Adeegsiga halbeegga Litir oo lagu cabbirayo waxyaabaha Dareeraha ah (Liter in Capacity).*
- *Isugeynta iyo kalagoynta Halbeegga Litir ka (L)*
- *Adeegsiga Halbeegga Kiilogaraam (kg) oo lagu cabbirayo Culayska walxo kala duwan.*
- *Isugeynta iyo kalagoynta ee Halbeegga kiilogaramm (kg)*

Kaabayaasha Waxborasho

Kaabayaasha loo baahan yahay barashada cutubkan:

- Mastarad, mitir
- Qalin qori, kuraasta lagu fadhiisto, miisas, daaqado iyo albaabada.
- Muuqaalo sawir oo ah xariiqa toosan
- Quraarado, caagadaha (jeerikaan), baaldi
- Rodaal 1ka, 2da, 3da, 4ta iyo 5ta kilo kala ah, iyo miisaan (kafado)
- Tamaashiiro midaba kala duwan leh.

3.1 DHERERKA OO LAGU CABBIRAYO MITIR M IYO SANTIMITIR SM

Cutub-hoosaadkan xiisadaha loo qoondeeyey waa 2xiiso

Ujeedooyinka gaarka ah ee casharka

Casharkani marka uu dhammaado kadib Ardaydu waxay awood u yeelanayaan in ay:-

- *Cabbiri karaan Dhererka walxo kala duwan iyaga oo adeegsanaya Mastarad sentimir ah.*

- *Cabbiri karaan Dhererka walxaha iyaga oo adeegsanaya mitir.*

- *Soo sooci karaan sumaddaha "sm" iyo "m".*

- *Sharxi karaan isla markaana muujin karaan xidhiidhka ka dhexeeya "sm" iyo "m"..*

Ereyada Muhiimka ah dherer, halbeega cabbirka mitir, santimitir.

Hordhac

Cutub-hoosaadkan ardaydu waxay ku baranayaan hababka kala duwan ee loo cabbiro dhererka iyagoo adeegsanaya mitir iyo sentimitir. Sidaa daraadeed santimitir sax ah oo ku diyaarsan mastarad iyo mitir ama mid u eg oo si taxadur leh loogu diyaariyey iyagoo adeegsanaya ayay xidhiidhka ay leeyihiin mitirka iyo santimitirka iyo waliba cabbiraadda waxyaabo kala duduwan sida ay ku fahmi lahaayeen nooca halbeega ku habboon mitir ama santimitir ayaa loo baahan yahay in ardaydu hadda kadib ku xisaabtamaan.

Waxqabadyada baris barasho

1. Tus ardayda mastarad dhererkeedu hal mitir ka yar sida mastarad 50 santimitr ah ama 30 sanitmir ah. Kadibna weydi in ay ku tusaan (tilmaamaan) 1 santimiitir, 2 santimitir IWM: meelahooda.

2. Ku dhiiri gali iyaga oo koox koox ah in ay ka shaqeeyaan Hawlgalka 1 iyo Hawlgalka 2 ee ku yaala buugga ardayga ee xisaabta boogga 71 iyo bogga 72. Inta ay ka shaqaynayaan kor meer ka caawi siday u cabbirayaan.

3. Waa in aanad ku ekaan uun shaqooyinka Hawlgalada ee waa inaad siisaa shaqooyin dheeraad ah. Kuwaas oo ah cabbiraada walxaha laga helo fasalka dhexdiisa iyo walxaha laga helo agagaarka iyaga oo isticmaalaya mastarad leh santimitr iyo mitir.

Tabaha Qiimaynta

1. Cutub-hoosaadkan intiisa baadan nuxurka guud waxa uu kaga ballaadhan yahay shaqooyin waxqabadyo ah. Haddaba ardaydu iyaga oo adeegsanaya mitir iyo sanatimitir wax yaabaha la su'aalay in ay si sax ah u cabbirrayaan ayaad si shaqsi ah iyo si kooxo ah xilliga ay uga shaqeeynayaan adigoo indha indhaynaya dabagalna kusamaynaya waad ogaan kartaa.

2. Intaa waxaa dheer arday waliba waxyaabo kala duwan & adigoo ku hawlgalinaya inayku cabbirraan mitir iyo santimitir dabadeedna dabagal si sax inay u fulinayaan shaqadaas.

Jawaabaha Hawlgalada 1 iyo 2

Ardaydu su'aalaha la siiyey ee buugga ardayga sawirada kala duwan inay ka jawaabaan iyagoo adeegsanaya mastarad kadibna jawaabahooda isu hubi ama isbarbardhig.

Siyaabo lamid ah Hawlgalka 2 su'aalaha laga siiyey dhererka alaabta jawaabahooda maadaama uu kala duwanaan karo ku xaqiiji jawaabaha adigoo u cabbirraya.

3.2. ISUGEYNTA IYO KALAGOYNTA SM AMA M

Cutub-hoosaadka xiisadaha loo qoondeeyay waa 2 xiisadood

Ujeedooyinka gaarka ah ee casharka

Casharkani marka uu dhamaado dabadeed

- *Waxay Isugeyn karaan Halbeegyada dhererka ee isku midka ah.*

- *Waxay Kalagoyn karaan Halbeegyada dhererka ee isku mid ah.*

Ereyada muhiimka ah:-Xarriiq toosan oo isle'eg, isugaynta iyo kalagoynta dhererada.

Waxqabadyada baris barasho

Ardaydu waxay horay u soo barteen waxyaabo dhererkoodu kala duduwan yahay iyo adeegsiga halbeegyada mitir iyo saantimitir. Cutub-hoosaadkana iyagoo adeegsanaya calaamadaha isugaynta iyo kala goynta ayey joog ahaan isugu gaynayaan islamarkaana kala goynayaan, halbeegyada dhererka.

1. Laba shay oo noocyadoodu is ku dhow dhow, balse dhererkoodu kala duwan yahay tusaale ahaan ulo yar yar, qalinqori, xadhko IWM si hal hal ah cabbiraadooda ha u barbartaan

2. Kadib shayada iyagoo is barbar dhigaya u cadee si ay u helaan dhererka labadooda adigoo adeegsanaya shayadaas isla markaas cabbirraya qoraal ahaan calaamada kala goynta adigoo adeegsanaya ka gacansii si ay u xaqiiqsadaan.

3. Kadib sida buugga ardayga Hawlgalak 3 xarriijimaha ku sawiran sida lagu su'aalay kacaawi in ay isugu geeyaan

4. Sawiro muuqaalo ah oo ku sawiran karaatoon ama ugu sawir sabuurada adigoo adeegsanaya tabaashiiro midabo leh dherarda iyago ku cabbiraya mastarado si ay isugu geeyaan.

5. Buugga ardayga bogga 73 laylis 1 su'aalaha ku xusan ku hawlgali in ay buuggooda qoraalka kaga shaqeeyaan intaa waxaa dheer isla layliskan su'aalaha masallooyinka ah iyagoo laba-laba ah oo wada falanqaynaya u dir ama ku hawl gali islamarkaana ka caawi si ay uga shaqeeyaan.

Tabaha Qiimaynta

- Indha indhayn ku xaqiiji shaqooyinka cabbirrka ah inay si sax ah u fulinayaan.

- Su'aalaha layliska ah ee la siiyey si sax ah buuggtooda qoraalka ah inay kaga shaqeeyeen adigoo ka eegaya caawimaadna ka sii.

Jawaabaha Layliska 1

1.   B. 74sm   T. 60sm   J. 56sm X. 73sm Kh. 69sm d. 91m
2.   B. 13sm   t. 4sm   J. 17m   X. 13m
3.   B. 89m   T. Caasha wuxuuna dheer yahay 15m.
4.   B. 86sm   t. 158sm.

3.3. Cabbirrka Mugga Dareeraha oo lagu cabbirayo litir

Cutub-hoosaadkan xiisadaha loo qoondeeyey 1xiiso

Ujeedooyinka gaarka ah ee casharka

Casharku marka uu dha maado ardaydu

- Mugga ayay Litirka ku cabbirayaan.
- Waxay Isbarbardhigi karaan walxo ay ku jiraan waxyaabo Dareere ah oo lagu cabbiray Litir.

Ereyada Muhiimka ah

Litir, baaldi, mugg

Waxqabadyada baris-barasho

1.   Casharka qayb hoosaadka cutubkan ku xusan waxaad ku bilaabi kartaa Hawlgalka 4. Ardaydu iyagoo koox koox ah ku dhiiri gali in ay ka jawaabaan su'aalada hawlgalka. Intaas kasakaw darerayaasha kala duwan ee ay agagaakooda ku arkaan sida biyaha, caanaha iyo saliida weydi in ay afka ku jawaabaan walxaha loo adeegsado marka la cabbirayo.

      U sharrax ardayda in walxaha muggoodu hal litir sida qadaadaha, baaldiga inta ay qaadi karayaan la cabbiri karo iyadoo la adeegsanayo qaruurad ama daasad muggoodu yahay6 hal litir.

2.   Weydi ardaydu haddii ay heli karaan in ay fasalka keenaan walxo ku cabbiran litir. Sida qaruuradaha (dhalooyinka). Kadibna ka gacansii ardayda iyaga oo lammane ah inay cabbiraan cadad biyo ah.

Tabaha Qiimaynta

- Su'aalaha laga waydiiyey Hawlgalka 4 jawaabahooda adigoo dhagaysanaya waa inaad caawisaa si ay xirfad ama firkir sax ugu yeeshaan.
- Dabagal oo indha indhee si aad u xaqiijiso shaqada cabbirraada ah inay si sax ah u fulinayaan.

3.4 ISUGAYNTA IYO KALAGOYNTA LITIRKA

Cutub- hoosaadkan xiisadaha loo qoondeeyey waa 2 xiisad

Ujeedooyinka gaarka ah ee casharka

*Casharkani markuu dhamaado kaddib ardaydu waxay awoodi inay:-*

- *Isugeyn karaan Hal beegga Litirka ee mugga*

- *Kalagoyn karaan Halbeegga Litirka ee mugga.*

Ereyada Muhiimka ah

Litir, baaldi, isugaynta iyo kala goynta litirka

Waxqabadyada baris-barasho

1. Marka hore buugga ardayga sawir muuqaaleedka ku xusan laba shay oo muggoodu kala duwan yahay kuna cabbirran litir ahaan islamarkaana shay saddexaad (muggiisu qaado isugaynta labadaa shay) oo lagu rogo labada shay muggooda habka la isugugeeyo litirkooda ayaad ku barbaraysaa ardayda.

2L+5L=7L

Shaqooyinkan markaad ku hawlgalisid kadib buugga ardayga bogga 75 laylis 2 su`aalaha qoraalka ah ee ku xusan ku hawlgali hana kaga shaqeeyaan buuggooda qoraalka ah.

Tabaha Qiimaynta

Dabagal iyo indo-indhayn ku saabsan shaqooyinka cabbirraada mugga isugaynta iyo kala goynta mugga in ay si sax ah uga shaqaynayaan hubi kadib gacan ka sii ardayda taageerada u baahan.

Jawaabaha Layliska 2

1. B.   38L   T.   42L   J.   49L   X.   32L

2.   58L

3.   56L

4.   9L

3.5 CULAYSKA OO LAGU CABBIRO KIILOGARAAM

Cutub –hoosaadkan xiisadaha loo qoondeeyey 1 xiiso

Ujeedooyinka gaarka ah ee casharka

Casharkan marka uu dhammaado ardaydu waxay awood u yeelan doonaan

- *Inay Cabbiri karaan culayska walxo kala duwan iyaga oo adeegsanaya kiilogaraam (kg)*

- *Inay isbarbardhigi karaan culayska walxaha oo ku cabbiran kulogaraam (kg)*

Waxqabadyada baris –barasho

Marka hore Hawlgalka 5 waydii (su'aalaha) shayada ku xusan qiyaastooda midka culus iyaga oo ku tilmaamaya farahooda. Qiyaastooda ardaydu sida hoos ku xusan miisaankan oo kale iyagoo adeegsanaya ka caawi si ay u xaqiijiyaan u cadee ardayda in miisaan la adeesado marka laba shay culayskooda la isbarbar dhigayo. Kadibna u sharax.

Shayga dhinaca ay u dheeliday kafadu ayaa culus sababtoo ah kafadu hoos ayay u dheelidey adigoo leh isbar-bardhigga shayada bar-bar dhig.

Intaa kadib 1kg, 2kg, 3kg IWM oo ah carro(ciid) ama dhagaxaan yar yar oo jawaano ama kiishash ku jira adigoo adeegsanaya miisaan ku hawlgali ama shayo kale si ay ugu cabbirraan.

Tabaha Qiimaynta

- Waxaad ku hubin kartaa jawaabaha ardayda in ay si sax ah u fuliyeen shaqooyinka la siiyey.
- Ku hubi indha-indhayn culayska in ay si sax ah u cabbirrayaan.
- Su'aal adigoo ardayda mid-mid u soo kicinaya si ay u cabbirraan walxo kala duwan culayskooda iyagoo miisaan saaraya.
- Adigoo siinaya walxo culayskoodu kala duwan yahay si ay isu bar-bar dhigaana su'aal.

3.6 ISUGAYNTA IYO KALAGOYNTA HALBEEGGA KIILOGARAAM(KG)

Xiisadaha loo qoondeeyay cutub-hoosaadkan 2 xiisadood

Ujeedooyinka gaarka ah ee cashirka

Casharkani marka uu dhammaado ardaydu waxay awood u yeelan doonaan:

- *Inay Isugeyn karaan culayska oo kiilogaraam ah*

- *Inay Kalagoyn karaan culayska oo kiilogaraam ah*

Erayada Muhiimka ah

Culays kiilogarram

Hordhac

Hadda ka hor qaybaha casharkan ee qayb hoosaadkii 3.5 ardaydu waxay awood u yeesheen cabbiraadda shayo kala duwan iyagoo adeegsanaya kiilogiraam haddaba casharka qayb hoosaadkan ardaydu waxyaabaha isku nooca ah culayskooda iyagoo cabbiraya ayey labada shay culayskooda isu gaynayaan.

Intaa waxaa dheer shayada (walxaha) lasiiyey ee la su'aalay culayskooda inay kalagooyaan. Ayaa Su`aalaha buugooda ku xusan aad ku hawl galinaysaa inay ka shaqeeyaan.

Waxqabadyada Baris-Barasho

Buugga ardayga bogga 76 tusaalaha 1. iyo 2. ku xusan iyaga oo lagu salaynayo marka hore waxyaabaha deegaankooda laga helo adigoo u diyaarinaya islamarkaana adeegsanaya kiilogiraam cabbirrayana culayskooda ay yeelanayaan marka la isku geeyo waa inaad ku hawlgalisaa si ay u sheegaan wadarta culayskooda. Si lamid ah shayo kala duwan adigoo siinaya culays kala waaweyn waa inaad ku hawlgalisaa shaqooyin ay ku baranayaan kala goynta culaysyada.

Buugga ardayga bogga 76 laylis 3 su'aalaha lagugu siiyey ku hawl gali si ay buuggooda qoraalka ugaga shaqeeyaan. Layliskan haddana waxaa ku xusan weedho masallooyin ah iyagoo lammaane ah ama koox-koox ah oo kawada tashanaya ku hawl gali islamarkaana ka caawi si ay uga jawaabaan.

Tabaha Qiimaynta

- Ardaydu walxo culayskoodu kala duwan yahay ku xaqiiji indho-indhayn oo dabagal in ay si sax ah u cabbirrayaan.
- Hubi oo xaqiiji culaysyada inay si sax ah isugu gaynayaan ama ay kala goynayaan.
- Dabagal laylisyada la siiyey inay si sax ah uga shaqeenayaan. Sii su'aalo dheeraad ah oo isugu jira shaqo fasal iyo shaqo guriba kadib jawaabahooda ka eeg oo usax kana caawi.

Jawaabaha Layliska 3

1.	B.	91kg	T.	15kg	J.	70kg	X.	77kg	Kh.	59kg
2.	B.	48kg	T.	81kg	J.	33kg				
3.	B.	7 kg	t.	77 kg						

Cutubka 4aad BARASHADA JAJABYADA

Hordhac

Ardaydu casharadoodii xisaabta ee fasalka 1aad waxay ku soo barteen oo ay sooci karaan astirada tirooyinka idil ee ilaa 100.

Cutubkana waxay ku baran doonaan hal shay (walax) badhkeeda (nuskeeda), rubuceeda iyo saddex daloolkeeda.

Sidaas darteed iyada oo la isticmaalayo waxyaabo kala duwaan ee laba, saddex ama afar meelood oo isle'eg loo qaybin karo in ay fahmaan badh (nus), rubuc iyo saddax dalool waxa ay yihiin.

Ujeeddooyinka Guud ee Cutubkan:

Cutubkani marka uu dhammaado kadib, Ardaydu waxay Awood u yeelan doonaan.

- Kala soocidda Badh (Nus) iyo Rubuc

- Inay walaxda u kala Qaybiyaan saddex – Meelood (Qaybood)

- In ay fahmaan xidhiidhka ka dhexeeya walax (shay idil), Badhkeed, Rubuceed iyo Saddex – Daloolkeeda

- Qoridda Astirada Jajabyada badhadhka (Nusaska) Rubucyada iyo saddex – Daloollada.

Kaabayaasha baris-barasho

Kaabayaasha cutubkani u baahan yahay

- Goobo, laydi, laba jibaarane, saddex xagal, shan dhinacle iyo lixdhinacle oo sawiradooda lagu soo sawiray warqad adag (filaash kaardh) dushiisa.
- Waxyaalo kala duwan oo 2, 3 iyo 4 meelood oo isle'eg ukala qaybsami karo.
- Tamaashiiro midabo kala duduwan leh.

66

4.1 NUSASKA (BADHADHKA) IYO RUBUCYADA

Casharkan waxa loo qondeeyay (la siiyay) 2 xiisadood

Ujeedooyinka Gaarka ah ee Casharka

Casharkani marka u dhamaado kadib ardydu waxa ay awood u yeelan doonaan.

- *Inay Sawir ku muujiyaan (Tilmaaman) badhka (Nusaska) walxaha.*

- *Inay walxaha u kala dhigi karaan qaybo sida sadex dalool meel.*

- *Inay isu geeyaan Muujiyaana xidhiidhka ka dhexeeya Nusaska iyo Rubucyada iyaga oo adeegsanaya sawir.*

- *Inay saddex daloolka walxaha sawir ku muujiyaan.*

- *Inay kala soocaan xidhiidhka hal shay iyo badhkiisa, rubuciisa iyo saddex daloolkiis ka dhexeeya.*

- *Inay aastiro ku qoraan badhka, rubuca, iyo saddex daloolka.*

Erayada Muhiimka ah

Jajab, badh, rubuc

Waxqabadyada baris-barasho

1. Maadaama oo ay fikrada jajabku ardayda ku cusub tahay marka u horaysa adiga oo adeegsanaya liin ama waxkale oo la mid ah inta aad laba, sadax ama afar meelood oo isle'eg u kala qayqaybisid tus ardayda, badh, saddax-dalool hal iyo rubuc waxa ay yihiin.
2. Sawirada goobada, laydiga iyo sadexagalka inta aad kaartoon ku dul sawirtid laba sadex iyo afar meelood oo isle'eg u kala qaybi kadibna badhkiisa, rubuciisa ama qayb ka mid ah saddexda meelood ee hal inta aad midabaysid u faahfaahi si ay u fahmaan.
3. Adiga oo sii wada buuga xisaabta ee ardayga hawlgalka 1 iyo hawlgalka 2 dhaxdooda sawirada ku xusan inta ay buugtooda ku sawiran dabadeedna weydii in ay midabeeyaan qaybaha rubuca iyo badhka kadibna waa in ay ku tusaan si aad uga saxdo.
4. Sido kale kaartoon ama warqad adag dushiisa(dusheeda) inta ay goobo,laydi iyo labajibaarane in ay ku sawiraan oo ay 2 iyo 4 meelood oo isle'eg inta ay u qaybiyaan adigoo tusaya sida loo jarjaro oo rubuc iyo badh looga soo saaro kadib iyaguna sidaas habartaan iyagoo ku tartamaya.
5. Buugga aradyga dhaxdiisa laylisyada 1 iyo 2 sawirada ku yaalla sida loo midabeeyo rubuc iyo badhka marka aad tustid dabadeed iyaguna in ay midabeeyaan gacan ka sii.

Taabaha Qiimaynta

Sawirada laylisyada lagu tilmaamay in ay rubucyada iyo badhadhka ay qumaati u midabayn karayaan ka hubi.

4.2 SADDEX DALOOLKA WALXAHA

Waqtiga loo qoondeeyay (2 xiisadood)

Hordhac

Qayb-hoosaadkan cutubka ardaydu waxay ku baran doonaan nuxurka fikrada sadex-daloolka walxaha waxayna taasi ficil ahaan ku baranayaan iyaga oo madoobaynaya qaybaha shaxanada ay ka midka yihiin laydi, labajibaarane iyo goobo. Sidoo kale waxay baran doonaan macnaha laba ama sadex daloolada walxaha.

Ujeedooyinka gaarka ah ee qayb-hoosaadkan

Ardaydu marka ay qaybtan dhameeyaan waxay karti u yeelanayaan in ay

- Sawiraan sadex daloolka walxaha.
- tilmaamidda saddex-Daloolka walxaha

Waxqabadyada Baris-barasho

- Fursad u sii ardayda in ay goobo sawiraan kadibna saddex meelood oo isle'eg inta ay u qaybiyaan meelo ka mid ah midabeeyaan (madoobeeyaan)
- Ku hoggaami ardaydu in ay sawiraan goobo kadibna inta ay saddex meelood oo isle'eg u qoybiyaan kadib waa in ay muujiyaan "sadex – dalool hal" iyo "sadex dalool laba"
- Su'aalo la mid ah su'aasha 2^{aad} ee layliska 1 ee buuga ardaydga ee xisaabta in ay ka shaqeeyaan ku hoggaami.

Tabaha qiimaynta

1. Hawlgalyada iyo laylisyada in ay qumaati uga shaqeeyeen ka hubi ardayda.
2. Shaxano dheeraad ah inta aad sabuurada ku sawirtid haddii la heli karayo tamaashiirta midabada kala duwan leh in ardayda mid mid intaad u kicisid waa in ay midabeeyaan rubuc, badh, sadex meelood meel iyo sadex meelood laba ku amar.

Jawaabaha Layliska 1

1.

| b | t | j | x |

| kh | d | r |

2.

| b | t | j |

| x | kh |

4.3 WALXAHA IYO JAJABYADA (ASTIRADA JAJABYADA WALAXDA)

Waqtiga loo qoondeeyay (2 Xiosadood)

Hordhac

Cutubkan qaybihiisi hore ee 4.1 iyo 4.2 waxay ardaydu awood u yeelatay in shaxanada goobo, laydi, sadexagal iyo lix-dhinacle oo loo qaybiyey dhawr qaybood oo kala duwan oo isle'eg oo ay midabeeyaan rubuc, badh, saddex meelood meel, iyo saddex meelood laba. Ardaydu cutub-hoosaadkan waxay ku baran doonaan qaybaha ay midabeeyeen ee ahaa rubuc, badh, saddex meelood meel iyo saddex meelood laba sida astiro loogu qoro. Sidaas darted waxaa loo baahan

yahay in shaxanadii ay midabeeyeen ee ku yaalay cutub-hoosaadyada 4.1 iyo 4.2 iyaga oo adeegsanaya waa in ay astiro ahaan ku qoraan kuna celceliyaan.

Erayada Muhiimka ah

Laba badh (qeybo)   4 rubucyo 3 rubucyo
sadex daloolka hal,   sadex dalool laba

Waxqabadyada Baris – Barasho

1. Buugga ardayga ee xisaabta tusaalaha 4 adiga oo raadraacaya waa in aad casharka ka hor shaxanada ama kuwo la mid ah intaad kaar biligleh (filaash kaarka) ama sabuurada aad ku sawirtid ku hoggaami siday ardaydu astiro ugu muujin lahaayeen

2. Kadibna waydii ardayda in buuga xisaabta ee ardayga dhaxdiisa hawlgalka 3 qaybaha shaxanada ee la midabeeyay ay astiro (tiro ahaan) ku cadeeyaan.

Tabaha Qiimaynta

*   Hawlgalka 3 dhaxdiisa shaxanada qaybahooda la midabeeyay in ay si sax ah astiro (tiro ahaan) ugu muujiyeen jawaabahooda eeg oo xaqiiji.

*   Sabuurada intaad ku sawirtid shaxano lamid ah kuwa Hawlgalka 3 dabadeedna intaad midabaysid rubu, badh saddex rubuc, saddex dalool meel iyo saddex dalool laba ardayda mid mid intaad usoo kicisid ku amar in ay astirada (tirada) ku haboon ku qoraan.

Jawaabaha Hawlgalka 4

1. $\dfrac{3}{4}$ 2. $\dfrac{1}{3}$ 3. $\dfrac{1}{2}$ 4. $\dfrac{1}{4}$ 5. $\dfrac{2}{3}$ 6. $\dfrac{1}{3}$ 7. $\dfrac{1}{2}$

Jawaabaha Layliska 2

1. Saddex meelood meel $\dfrac{1}{3}$

    <u>Afar meelood shan</u> $\dfrac{5}{4}$

    Sadex meelood laba $\dfrac{2}{3}$

    <u>Lix meelood shan</u> $\dfrac{5}{6}$

    Lix dalool sadex $\dfrac{3}{6}$

    Afar dalool hal $\dfrac{1}{4}$

2.

Qaybta la midabeeyey	Qaybta aan la midabaynin
t. Afar meelood laba $\dfrac{2}{4}$	Afar meelood laba $\dfrac{2}{4}$
j. Afar meelood sadex $\dfrac{3}{4}$	Afar meelood hal $\dfrac{1}{4}$
x. Saddex meelood hal $\dfrac{1}{3}$	Saddex meelood laba $\dfrac{2}{3}$
kh. Sidded meelood afar $\dfrac{1}{4}$ ama $\dfrac{4}{8}$	Siddeed meelood afar $\dfrac{1}{4}$ ama $\dfrac{4}{8}$
d. Saddex meelood meel $\dfrac{1}{3}$	Saddex meelood laba $\dfrac{2}{3}$
r. Toban iyo laba meelood afar $\dfrac{4}{12}$ ama $\dfrac{1}{3}$	Toban iyo laba meelood sided $\dfrac{8}{12}$ ama $\dfrac{2}{3}$

Cutubka 5aad TIROOYINKA IDIL ILAA 1000

Waqtiga loo qoondeeyay (12 xiisadood)

Hordhac

Ardydu fasalka 1aad waxay ku soo barteen sida loo kala sooc tirooyinka ilaa 100 ayay iyaga oo adeegsanaya qoryo yar yar oo toban toban la isugu xidhay waxayna ku soo barteen tirinta dhufsanayaasha 10 iyo qorista astirooyinka .Sidoo kale cutubkana tirooyinka idil ee ilaa 1000 ah astirooyinkooda iyo tirada baaxadeed iyaga oo adeegsanaya shaxda qiima-rugeedka tirooyinka iyo rugaha godadka tirooyinka muujintooda ayay qalabka loo diyaariyay ee loo yaqaano abaakas waxay ku baran doonaan akhrinta, qorista, isbarbardhigida iyo horsanaantooda.

Ujeeddooyinka Guud ee Cutubkan:

Cutubkani marka uu dhammaado kadib, Ardaydu waxay awood u yeelan doonaan (Awood u yeelan karaan).

- *Soo saaridda dhufsanayaasha 100 ee ka yar 1000*

- *Akhriska iyo Qoraalka Astirooyinka ee Tirooyinka Idil laga bilaabo 101 ilaa 1000.*

- *Sharxidda iyo Muujinta Qiima-Rugeedka tirooyinka Idil ilaa 1000*

- *Isbar-bardhigidda iyo Horsanaanta Tirooyinka Idil ilaa 1000 iyaga oo adeegsanaya calaamadaha kala ah "<" ">" iyo "=".*

Kaabayaasha baris barasho

- Qoryo yar yar oo toban toban loo xidhay; moodheelada nootyada birrka.
- Abaakas; shaxda qiima – rugeedka tirooyinka oo kaartoon laga sameeyay
- Tamaashiiro midabo kala dawan leh.
- Shaxda isugaynta iyo iskudhufashada.

5.1 DHUFSANYAASH 100 ILAA 1000

Waqtiga 1oo qoondeeyay (4 xiisadood)

Ujeedooyinka gaarka ah

Casharkani marku dhamaado kadib ardaydu waxay karti u yeelan in ay:

- *Taxaan dhufsanayaasha 100 ilaa 1000.*

- *Inay dhufsanayaasha 100 u kala saaraan ama qoraan biirooyin ah Isugeyn (sida 300 = 200 + 100) .*

- *Tirinta, Akhriska, iyo qoraalka dhufsanayaasha 100.*

- *Isugeynta tiro hal-god ah iyo dhufsaneyaasha 100.*

Erayada Muhiimka ah

Dhufsanaha 100, tiro 1-god ah noodhadhka (nootyada) birrka , xidhmooyin qoryo toban toban ah.

Waxqabadyada Baris-barasho

- Ku hoggaami ardayda in ay soo saaraan dhufsanayaasha 100 ilaa 1000 iyaga oo 100 ku dhufanaya tirooyinka idil ee 1 ilaa 10.
- Fursad u sii ardayda in ay taxaan dhufsanayaasha 100 islamarkaana ay ku muujiyaan xariiqa tirada.
- Noodhadhka (nootyada) 100 birr oo waraaq laga sameeyay iyaga oo adeegsanaya. Ku dhirigeli in ay tiriyaan ilaa 1000.
- Ka caawi ardayda in ay dhufsanayaasha 100 u kala saaraan ama u qoraan biirooyin kala duwan sida 500 = 300 + 200 ama 500 = 400 + 100.

Jawaabaha Layliska 2

1. b) shan   t) todoba   j) afar   x) siddeed   d) shan
2. b) 500   t) 700   j) 600   x) 900   kh) 400   d) 1000
   r) 800   s) 300   sh) 600
3. b) 200 = <u>100</u> + <u>100</u>   t) 600 = 200 + <u>400</u>   j) 700 = 300 + <u>400</u>
   x) 800 = <u>200</u> + 600   kh) 900 = 400 + <u>500</u>   d) 1000 = 700 + <u>300</u>

Tabaha qiimaynta

1. Fasalka dhaxdiisa xaqiiji in ay dhufsanayaasha 100 ay si sax ah u tiriyaan iyaga oo adeegsanaya xidh mooyinka qoryaha yar-yar, noodhadhka (nootyada) 100 Birr.
2. Buugga ardayga ee xisaabta shaxaha iyo laylisyada in ay sida ku haboon uga shaqeeyaan goorkasta kormeer ku same oo hubi.

5.2 TIROOYINKA IDIL 101 ILAA 1000

Waqtiga loo qoonleeyay (4 xiisadood)

Ujeedooyinka gaarka ah

Casharkani marku dhamaado kadib ardaydu waxay karti u yeelan

- *Tirooyin 3 god ah ayay u kala saarayaan dhufsanayaasha 100 iyo tiro hal god ah.*

Erayada muhiimka ah:- tirooyinka 3da god ah, tiro hal god ah.

Hordhac

Horay ardaydu waxay fasalkii 1^{aad} ku soo barteen dhufsanayaasha 100 tirintooda, akhrintooda iyo astiro ku qoristeeda. Hadda qeyb hoosaadkan waxaa loo qorsheeyay oo loo diyaariyay inay horsanaan u taxaan tirooyinka u dhexeeya dhufsanayaasha 100 ee ilaa 1000.

Waxqabadyada Baris barasho

1. Marka hore adiga oo u adeesanaya 100 laba jibbaarane oo la raseeyay ama noodhadhka (nootka) 100 Birr marka loo geeyo 1, 2, 3, . . . 9 tirada la helay ha akhriiyaan hana qoraan.

Hal labajibaarane

$$100 + 1 = 101$$

1 boqol oo laba jibbaarane
$$100 + 1 = 101$$

1. Tusaalayaasha buugga ardayga ee xisaabta adiga oo adeegsanaya tus ardayda sida dhufsanayaasha 100 iyo tiro 1 godle ah la isugu geeyo iyo sida loo kala saaro dhufsanaha 100 iyo tiro 1 godle ah.

Tabaha qiimaynta

1. Hawsha tirinta, akhrinta iyo qorista tirooyinka inay garteen hubi.
2. Buugga ardayga ee xisaabta laylisyada ku yaala in ay si haboon uga shaqeeyeen, hubi ardayda ay ku adkaatana gacan ka sii.

5.3 QIIMA-RUGEEDKA TIROOYINKA IDIL ILAA 1000

Waqtiga loo qoondeeyay (2 xiisadod)

Ujeedooyinka gaarka ah

Casharkan kadib ardyadu waxay karti u yeelanayaan:

- *Qoridda iyo Muujinta Qiima-Rugeedka tirooyinka IDil ilaa 1000.*

Erayada Muhiimka ah

Tirooyinka 3 – god ah, tiro 1 – god ah. Qiimo – rugeedka tirooyinka abaakas. Boqolo (boqolol) tobano koowaad.

Hordhac

Cutub-hooseedkan waxa loo soo diyaariyay in ardaydu ay fahmaan tiro 3-god ah qiimo-rugeedka godadka. Sidoo kale in ay fahmaan inta boqol, inta toban iyo inta koowaad ee tiro 3-god ee ay ka kooban tahay.

Waxqabadyada baris-barasho

1. Marka ugu horaysa tiro 3-god ah adiga oo adeegsanaya laba-jibaarane sawir ahaan ku tus – Tusaalahan

2. Kadibna Hawlgalka 3[aad] su'aalaha la xidhiidha ku dhiirigeli
3. Abaakas tusaale ahaan loo siiyay sabuurada ku qor oo fahamsi
4. Weydimaha layliska 5 kuwo lamid ah warqad jarti ah intaad ku sawirtid gidaarka ugu dhaji.

5.4 ISBARBAR DHIGIDA IYO HORSANAANTA TIROOYINKA IDIL ILAA 1000

<div align="right">Waqtiga loo qoondeeyay (2 xiisadood)</div>

Ujadooyin Gaar ah

Casharkan kadib ardydu

- *Iyaga oo adeegsanaya xarriiqda tirada tirooyinka idil ilaa 1000 ayay hoorsanaan u qorayaan.*

- *Waxay qorayaan Horreeyaha iyo Dambeeyaha tiro kasta oo la siiyey ilaa 1000.*

- *Waxay sheegayaan tirooyinka u dhexeeya laba tiro oo la siiyey.*

- *Waxay Isbar-bardhigayaan laba tiro oo kasta oo tirooyin idil ah ilaa 1000 iyaga oo adeegsanaya calaamadahan ">" "<" iyo "=".*

Erayada Muhiimka ah

Xariiqa tirada udhaxeeya, ka weyn, ka yar, horsanaan ,ka horeeye ,ka danbeeye.

Waxqabadyada Baris-Barasho

1. Ku hoggaami ardaydu in ay sheegaan ama qoraan tirooyinka idil ee u dhaxeeya laba tiro oo la siiyay.
2. Ku dhiirigeli ardayda in ay isbarbardhigaan laba tiro oo kasta oo kamid ah tirooyinka idil ilaa 1000 iyaga oo adeegsanya calaamadaha '<' '>' ama '='.

Habka qiimaynta

1. Kadib hubi in ay si sax ah horsanaan ugu tixi karaan falaadha tirada.
2. Buugga ardayga ee xisaabta .Hawlgalada iyo laylisyada ku jira in ay kashaqeeyeen ka hubi kadibna uga shaqee islamarkaana buugtooda u sax.

Jawaabaha Layliska 6

1.	b)	200	t)	207	j)	Kahoreeye 206 kadanbeeye 208	
2.	b)	303 & 305	t)	505 & 507			
	j)	126 & 128	x.	242 & 244	kh. 118 & 120	d.	848 & 850
	r.	998 & 1000					

4.	b. >	t. =	j. <	x. >	kh. >	d. <				

Cutubka 6aad BARAHA, XARIIQAHA IYO SHAXANNO KALE

Hordhac

Ardaydu waxay cutubkan ku baranayaan nuxurka aasaaska u ah joomatariga sida barta xariiqaha toosan iyo xaglaha. Sidaas darteed fasalka waxaa loo baahan yahay xaglaha farshaxano (qaabab) u eeg ama u dhigma oo deegaankeena laga helo isla markaana la taaban karo si laysugu barbardhigo isla markaana ay asal ugu noqoto aqoontooda iyo fahan ay u yeelan doonaan barashada cutubkan.

Hadaba cutubkan cutub-hoosaadyada ku xusan ama uu ka kooban yahay shaqo ama waxqabadyo ay caruurtu u yeelan doonaan waxyaabaha soo socda ee ay ku barandoonaan joomatariga

Ujeedooyinka Guud ee cutubka

Cutubkani marka uu dhammaado kadib, Ardaydu waxay awood u yeelan doonaan (Awood u yeelan karaan)

- Sawiridda Xarriiqaha iyaga oo adeegsanaya Mastarad.
- Sawiridda Labajibbaaraneyaasha, laydiyada, saddexagallada iyo Goobooyinka.
- Waxay kala soocayaan oo ay sawirayaan walxaha qaabkoodu yahay Laydi, Saddexagal iyo Goobo ee degaankooda (agagaarkooda) laga helo.
- Waxay sawirayaan laba jibbaaranaha, laydiga, xariiqda toosan, saddex xagalka iyo goobada.

Kaabayaasha bari-barasho

Kaabayaasha baris-barasho ee looga baahan yahay barista cutubkan:

- *Mastarad ,qalin ama qalin qori ,looxaamo toostoosan, warqado adag iwm.*
- *Khariidyada tilmaamaysa magaalooyin kala duwan meelahooda gaarka u ah*
- *Kaartoon ama waraaqo adadag oo loo sameeyay qaabab kala duwan sida laba jibaaranaha, laydi, saddexagal iyo goobo.*
- *Silig qaloocsami kara , baakidhada kibriidka iyo buskudka ,lacagta qadaadiic furarka qaruuradaha,waxyaabo kala duduwan oo qaababka kala duwan leh sida qaruurada saliida furkeeda ,caagadaha fururkooda .*
- *Tamaashiiro kala muunad(midab) duwan,qalimada midabada leh sida maarkarada, qalabka is wata ee joomatariga (compass).*
- *Albaabada ,daaqadaha iyo miisaska fasalkooda*

6.1 SAWIRIDDA XARRIIQAHA

Qayb hoosaadkan xiisadaha loogu talagalay
waa shan xiisadood (5 periods)

Ujeedooyinka

Casharkani marku dhamaado dabadeed ardaydu waa in ay Awood u yeelan karaan:-

- *Sawiridda xarriiqaha Dherekooda la siiyey iyaga oo adeegsanaya mastarad.*

- *Magacaabiidda xarriiqaha.*

- *Sawiridda xarriiqo Isgoynaya, iyo Magacaa bidda Barta ay iska gooyaan.*

- *Ku muujinta Baro ka korreeya, Baro ka hooseeya iyo Baro ku dul dhaca xarriiqo ka dusa Bar la siiyey iyaga oo adeegsanaya Mastarad*

Erayada Muhiimka ah

Bar, xariiq toosan,ereyada, qaab, hoose,dhexe iyo isgoys.

6.1.1. Nakhtiin baraha iyo xariiqaha toosan

Hordhac

Qayb-hoosaadkan ardaydu caaradda hore ee qalinka mastarad ama looxaan toosan iyaga oo adeegsanaya ayaad fahansiinaysaa sidii ay baraha iyo xariiqaha buuggooda qoraalka ah ugu sawiraan adiga oo baraya asalka joomatariga fahansiinayana casharkan intiisa badan in uu ku salaysan yahay ardaydu si ay ugu kala sooc soocaan shaxanada

Waxqabadyada baris barasho

1. Sida buugga ardayga ku xusan Hawlgalka 1 waa in ardaydu qalinka ama qalin qoriga buuggooda dushiisa iyaga oo ku xajinaya ka dib waa in aad waydiiso waxa uga soo baxay kuna tilmaamaan ereyo ka dib calaamadahana aad fahansiiso in dhibco loo yaqaano ama ay yihiin.

Hab gaar ah oo baris barasho

1. Khariirad tilmaamaysa magaalooyin ay garanayaan ardaydu meelahooda gaarka oo aad u soo diyaarisid dhibco u taagan meelo gaar ah oo ardaydana aad fahansiinayso dhibcaha iyo xiriirka ka dhexeeya meelaha gaarka ah isla markaana ku tilmaamto ereyo ka dib dhibcuhu in ay u taagan yihiin meelo islamarkaana ardayda ku hawlgaliso .

2. Ka dib buugga ardayga bogga ee 94 laylis 1 sida ku xusan oo kale dhibcaha iyaga oo adeegsanaya mastarad ha isku xidhiidhiyaan dhibcaha kadibna waydii in ay sameeyaan xarfaha xaglahooda(adiga oo wargalinaya xarfaha la waydiiyay ama la su'aalay in ay yihiin dhibcahan ay xidhiidhinayaan sababta oo ah sida ay iyagu rabaan haday u xidhiidhayaan waxa suurto gal ah in ay xarfaha heli waayaan) kuna dhiiri gali in ay awood u yeeshaan abuurista

xarfaha qaabka ay doonaan iyaga oo adeegsanaya xarfo kala duwan, sida soomaaliga iyo ingiriiska u samayn lahaayeen (haddaad karto xirfadooda sawirka si ay iyana kor ugu qaadaan barbarasho fudud adiga oo u samaynaya xariiqooyin mar laysu xidhiidhiyo guri, salaan, miis, IWM in ay sameeyaan), marka xariiqaha ay kulmiyaan ama ay isku xidhaan ha ku tilmaaman ereyo

6.1.2. xidhiidhka ka dhexeeya baraha iyo xariiqaha toosan

Casharka ardaydu waxay ku baranayaan adeegsiga mastarada ee xariiqaha toosan iyo xidhiidhka ka dhexeeya baraha iyo xariiqa toosan.

Waxqabadyada baris-barasho

1. Buugga ardayga sida tusaalaha1aad samuurada dusheeda ama waraaqaha sawirka ee shaxda leh oo aad ku samayso xariiqaha toosan iyo farqiga u dhexeeya laba barood,xariiqaha korkooda iyo hoostooda baraha ku yaala xarfo ahaan in lagu tilmaamo ku tababar .ardaydu in ay ugu dhawaaqaan xariiqda korkeeda,hoosteeda dhexdeeda(si shaqadu u noqoto mid xiiso galisa ardayda u adeegso tamaashiir midabo kala duwan leh).
2. Ka dib ardayda ku hawlgali sida buugga ardayga laylis 2 su'aalaha ku xusan in ay kaga shaqeeyaan buuggooda qoraalka.

6.1.3. xidhiidhka ay leeyihiin xariiqaha toosan

Hordhac

Casharakan waxa ardayda lagu hawlgalinayaa sidii ay u tilmaami lahaayeen ama samaynta xariiqaha isgooya iyo baraha ay wadaagaan

Waxqabadyada baris-barasho

1. Sida tusaalaha 2aad ee ku xusan waydii ardayda baraha ay wadaagaan xariiqaha isgooya ka dib marka aad ugu sawirto sabuurada adiga oo adeegsanaya tamaashiir midabo kala duwan leh ama qalimaan midbo kala duduwan leh (markaro) oo aad ugu sawirto waraaqaha wax lagu sawiro ee shaxda leh.
2. Haddana si la mida ku hawl-gali ardayda buuggooda qoraalka in ay ku sawiraan xariiqaha isgooya hana ku dhawaaqaan baraha ay wadaagaan.
3. Intaa ka dib buugga ardayga Hawlgalka 2 baraha ku xusan ha ku rogaan buuggooda qoraalka qaabka ay ugu sawiran yihiin buugga kale si sax ah, ka dibna ha ku dhawaaqaan baraha ay wadaagan marka ay u adeegsadaan mastarad xidhiidhinta xariiqaha

Tabaha qiimaynta

1. Su'aal ardayda su'aalo afka ah(odhaah/tiraab)si ay u sheegaan baraha xidhiidhinaya xariiqaha.
2. Dabagal ku samee in ay ardaydu si saxa uga shaqaynayaan shaqooyinka ku yaala buugga ardayga

Jawaabaha layliska 2

1.   G

    t.   B, T, J iyo X

    j   B, T, J iyo X   x.   T waxay u dhaxaysa barta B iyo J.

    kh.   <u>G</u> waxay ku taalaa meel xariiqa ka saraysa <u>M</u> waxay ku taallaa meel ka hoosaysa

2.   b)   B, T, J iyo X

    t)   B, T, J iyo X

    j)   B iyo J

    x).   T iyo J

6.2. LAYDI, LABAJIBBAARANE, SADDEXAGAL IYO GOOBO

Casharka xiisadaha loogu talagalay waa 7 xiisadood

Ujeedooyinka gaarka ah ee casharka

Casharkan marka uu dhamaado ardaydu :

- *Waxay sawirayaan islamarkaasna tilmaamayaan Laydiga iyaga oo adeegsanaya mastarad.*

- *Waxay sawirayaan islamarkaasna tilmaamayaan Laba Jibbaaranaha iyaga oo adeegsanaya mastarad.*

- *Waxay sawirayaan islamarkaasna tilmaamayaan saddexagal iyaga oo adeegsanaya mastarad.*

- *Waxay sawirayaan islamarkaasna tilmaamayaan goobo iyaga oo adeegsanaya walxo sida shilinka lacagtaah.*

Ereyada muhiimka ah

Laydi ,laba jibaarane,sadexagal iyo goobo

Hordhac

Qayb hoosaadkan ardaydu sidii qayb-hoosadkii ugu horeeyay ee kala soocida shaxanada joomatariga ayay ku barbaranayaan, sida loo sawiro shaxanada kala duwan una adeegsan karaan.

Waxqabadyada baris-barasho

Laba jibaaranaha, laydiga, sadexagalka iyo goobada sawiradooda inta sabuurada lagu sawiro waa in ay u ekaysiiyaan sawirada iyaga oo adeegsanaya kartoon ama baakidho oo ay isugu xidhayaan silig cidhifyada. ardaydu iyaga oo laba-laba ah waa in lagu hawlgaliyaa ardayda fasalka dhexdiisa iyaga oo dhex wareegaya soona ururinaya xaglo la mid ah.

Marka ay shaqadan dhameeyaan ka dib mastarada iyagoo adeegsanaya waa in ay sawiraan laba jibaaranayaasha, laydiga, sadexagalada ku qoran buugga ardayga tusaale 1. ka dibna la waydiiyo dhererka dhinacyada shaxanada.

Xasuus:- dhererka dhinacyada saddex xagalka samaynteeda marka hore in la siiyo heerka fasalka ardayda way ku adagtahay sidaas awgeed waa in aad bartaan saddex xagalkasta in ay sameeyaan iyaga oo adeegsanaya mastarada.

Buugga ardayga bogga 98 layliska 3 shaqooyinka lagu siiyay ku hawlgali ardayda si sax ah in ay ugu shaqeeyaan kadibna dabagal ku samee dhererka dhinacyada shaxanada iyaga oo mastarad ku dhererinaya waydii si ay ku dhawaaqaan.

Tabaha qiimaynta

- Daba gal in ay si sax ah uga shaqaynayaan .
- Su'aal in ay sabuurada korkeeda ku sawiraan laydiga, laba jibaaranaha iyo sadexagalka.
- Adiga oo ka caawinaya ha ku barbartaan sidii ay ugu sawiri lahaayeen goobada iyaga oo adeegsanaya furar kala duwan iyo qadaadiic buuggooda qoraalka dushiisa.

6.3. SHAXANNADA QAABABKOODA LAGA HELO DEGGAANKA

Cutub hoosaadkan xiisadaha loo qoondeeyay waa 2 xiisadood

U jeedooyinka

Casharkani markuu dhamaado ardaydu:

- *Waxay sawirayaan goobo iyaga oo adeegsanaya waxyaabo u samaysan qaabka goobada .*

- *Waxay kala garanayaan walxaha qaabkoodu yahay Laydi, Labajibbaarane, Saddexagal iyo Goobo ee laga heli karo Deggaankooda*

Waxqabayada baris-barasho

Sida buugga ardayga layliska 4 su'aasha 2 ka muuqata oo kale sida guryaha deegaankooda laga helo masaajid,sar dhagax (bangalo) ah iyo waxyaalaha caruurtu garankaraan oo ah dhismayaal oo aad u adeegsanayso waraaqaha sawirka ee waaweyn albaabada,daaqadaha,dayrka xaafada oo laba jibaarane,laydi, sadex agal iyo goobo ah adiga oo ku salaynaya waa in aad ku hawl-galisaa marka sawirada ay daawadaan ka dib waa in ay sheegaan ama ay faahfaahiyaan waxa ay yihiin, ka dib adiga oo kooxo u samaynaya ama lammaane (qindi) agagaarka dugsiga laba jibaaranayaasha, laydi, sadexagalada iyo goobada kuwa la mid ah waa in aad ku hawl-galisaa si ay u soo ururiyaan .

Fasalka dhexdiisa waxyaabaha goobada,laydiga,sadexagalka iyo labo jibaaranaha u eg iyaga oo adeegsanaya karaatoon waa in ay laba jibaarane,laydi, sadexagal ay buuggooda qoraalka ama samuurada ku sawiraan islamarkaana caawinaya.

Tabaha qiimaynta

- Daba gal si fiican in ay waxyaabaha sawirada tilmaamaya intay eegaan sawirada si sax ah in ay u kala sooc soocayaan.

- Waa in aad jawaabahooda is barbar dhigtaa koox walba ama lammaane kasta in ay si sax ah u tiriyeen waxyaabaha laga helo deegaanka ee laba jibaarane, laydi, sadexagal iyo goobada ah.

- Su'aal si ay u sheegaan arday walba waxyaabaha gurigooda u yaal ee laydi,laba jibaarane ama goobo ama sadexagal qaabkooda leh.

- Tilmaan ku xaqiiji in ay si sax ah ugu sawirayaan sabuurada dusheeda ama buuggooda qoraalka iyaga oo sawirada aad siisay si sax ah uga eeganaya.

LACAGTA ITOOBIYA

Hordhac

Lacagta waxyaabo kala duwan ayaan ugu ibsanaa nolasheena cadiga ah. Hadaba ardayga fasalka labaad (2aad) kala duwanaanshaha lacagta itoobiya sida Birka, shanta Birr boqolka Birr iyo kuwa kaleba midabkooda (muunadooda), & calaamadahoodaba. Waxaa ardayda laga sugayaa in madada xisaabta ee fasalkii 1aad ay ku barteen lacagta.

Qadaadiicda sida 1(hal) saantii, shanta saanti 10ka saanti 25ka saanti iyo 50ka saanti inay fahmaan-Qaabka Sarifka Birrka qadaadiicda hadaba barashada cutubkan inta aynaan u galin. Waxaa haboon in ardayda afka su,aalo laga waydiiyo kala duwanaan shaha lacagta noodhka ah. Iyo xidhiidhka ka dhaxeeya sarifka nootyadaka iyo qadaadiicda si aad ugarato aqoonta ay u leeyihiin. Islamarkaana dib u xasuusin ku samayno kadib ayaa lagaaga baahan yahay qaybaha casharada eecutubkan in aad soo ban dhigto.

Ujeedooyinka Guud ee Cutubkan:

Cutubkani marka uu dhammaado kadib, Ardaydu waxay Awood u yeelan doonaan (Awood u yeelan karaan)

- Isugeynta iyo kalagoynta lacagta, iyaga oo Adeegsanaya lacagteena Itoobiya.
- Sameynta (Jilidda) Matalaadda Dukaanlaha iyo Macaamiishiisa oo wax ku kala iibsanaya Lacagteena Itoobiya.

Waxqabadyada baris-barasho

Iyagoo adeegsanayna lacagta itoobiya waxay baranayaan isu gaynta iyo kala goynta lacagaha. Waxay awood uyeelan inay riwaayad ahaan ku sameeyaan habka wax kukala iibsiga ku saabsan ee lacagteena itoobiya.

Kaabayaasha wax barasho

Kaabayaasha wax barashasho ee loo bahan yahay barashadan cutubkan.

Lacagaha nootyada (lacagta waraaqda) ee itoobiya.

Lacagaha Qadaadiicda ah ee itoobaiya.

Karaaton ama baakidho madhan sida kuwa buskudka, saabunta iwm.

Karaatoon usamaysan qaabab kala duwan islamarkaana muujinaya shayo.

Waxyaabo kala duwan sawiradooda.

Qaruuradaha saliida oo madhan ama dhagax tooshka(bitijoorka/baytariga) oo ah kuwo dhamaaday aan shaqaynayn iwm.

7.1. ISUGAYNTA IYO KALA GOYTA LACAGAHA

Ujeedooyinka

Ardaydu waa in ay Awood u yeelan karaan:-

- *Isugeynta Lacagteena Itoobiya.*
- *Kalagoynta(sarrifida) Lacagteena Itoobiya*

Erayada muhiimka ah

Lacag qadaadiic ah, Birrka (noodh), sanaati, isu gayntooda iyo kala goyntooda

Hordhac

Ardaydu waxay baranayaan isu gaynta iyo kala goynta qaybaha casharkan cadadka lacagaha. Qaybta lacagaha waraaqaha ah (noodhadhka) iyo qaybta Qadaadiicda ah ee loo dhiibay iyagoo islamarkaa lafahansiinayo qiimaha sarifka ee lacagaha.

Waxqabadyada Habka baris barasho:

1. Ugu horaynta lacagta itoobiya ma muhiimbaa? Waxaa su,aalo afka laga waydiinayaa ardayda iyagoo la tusayo dhinacyada iyo qaababka Ugaarka ah ee riyaaladada iyo Qadaadiicda.
   Fiiro gaara: wakhtigan ay ardaydu ka shaqaynayaan waa inaad fahansiisaa lacagta waraaqaha Sida hal riyaal oo warqad ah iyo hal riyaal oo Qadaadiic ah.
2. kadib si ay u xasuusnaadaan waa in ay ardaydu ka shaqeyaan faraqa sarifka lacagaha riyaaladka waraaqaha ah(noodhka ah) iyo lacagta Qadaadiicda ah ee ku xusan buugga ardayga ee bogga 101.
3. intaa kadib waa inaad faah-faahin ka bixisaa tusaalayaashaa ku xusan buugga 1 iyo 2 fahfaahinta kadib waa in aad sisaa layliska ku qoran si ardaygu uga shaqeyaan.

Jawaabaha shaqada 1

1.   B.   200 saa nti T.   15 J. 6   x. 16
2.   10 qalin qori

Qaabka hubinta

- inaad xaqiijiso ama hubiso jaawabaha ardayda in ay sidii saxda ahayd ukala saareen qimaha lacagaha Riyaaladka iyo qaybta Qadaadiicda ah

- adigoo eegaya ama indho indhaynayaa ardayda sida saxda ah in ay uga shaqeyeen hawl galka 1 su'aalaha ku xusan ee sarifka lacagaha riyaalaadka iyo Qadaadiicda ayaga oo buuggooda qoraalka ah dushiisa kaga shaqaynaya waa inaad u saxdaa.
- dabagal ku samee isla hawl galka 1 su'aalaha ku xusan ee ah lacagaha in ay ardaydu isu gaynayaan isla-markaana kala goynayaan

Jawaabaha layliska 2^{aad}

1.	B.	110 riyaal	T.	90 saanti	J.	300 saanti	X.	140 riyaal
2.	B.	30 riyaal	T.	35 saanti	J.	55 riyaal		

7.2. DUKAAN LAHA IYO MACAAMIISHIISA

Ujeedooyinka

- *Waxay samaynayaan wax ku iib siga lacagaha itoobiya*
- *Waxay kal saarayaan qiimaha sarifka ee lacagaha itoobiya*

Hordhac

Cutub hoosaadkii hore ardaydu waxa ay ku soo barteen sarifka lacagaha itoobiya ,isu gaynta iyo kala goynta lacagaha, cutub hoosaadkana casharadiisa waxaa ardayda lagu barayaa qaabka wax ku iibsiga lacagta iyagoo ku tababaranaya fasalka dhaxdiisa.

Erayada Muhiimka ah

Kala iibsiga,iibsade,iibiye,majaajilo iyo riwaayado ku saabsan tukaano

Waxqabadyada baris barasho:

1. Cutub hoosaadkan casharkiisa ardayda waxaa la fahansiinayaa sidii ay awood ugu yeelan lahaayeen adeegsiga lacagaha iyo wax ku iibsigooda intaa marka ay awoodaan kadib waxaa lagaaga baahan yahay in ardayda aad u diyaarisid lacago kala duduwan riyaalaadka iyo qadaadiicba ama kuwo aad u ekaysiisay kadibna iyagoo adeegsanaya waa in aad u samayso riwaayad leh iibiye ,iibsade si ay ugu barbartaan fasalka dhaxdiisa balse tukaanada riwaayada dhaxdeeda waxaa loo baahan yahay alaabaha ardaydu kala iibsanayaan in ay la mid noqoto qiimaha dhabta ee suuqa ka jira.

2. Kadib hawl galka 2 sida ku xusan tukaanada kala duduwan alabaha ay ka iibsadeen iyo lacagaha baaqiga ah ee ardaydu haystaan markaad hubiso kadib waa inaad ardayda siisaa layliska ku qoran buugga ardayga ee cutub hoosaadkan inay buuggooda qoraalka ah kaga shaqeeyaan islamarkaana inay ka shaqaynayaan dabagal waa inaad ku samaysaa.

Qaabka qiimaynta

- Muuqaalka riwaayada si fiican inay uga soo bexeen si muuqaal ah u hubso
- hawl galka 2 su`aalaha ku yaala si fiican inay u fahmeen alaabaha ay soo iibsadeen iyo baaqiyada kala duwan adigoo eegaaaya jawaabahooga hubso
- Layliska 2 inay ka shaqeeyeen iyo inkale waa in aad ka eegto kadibna aad u saxdo
- Shaqo fasal iyo shaqo guri adiga oo siinaya waad qiimayn kartaa jawaabahooga

Jawaabaha shaqada 2

1. b. 50 saanti   t. 5 riyaal iyo 50 saanti   j. 75 saanti x. riyaal & 40 saanti Kh. 2 riyaal d. 50 saanti
2. b. 95 saanti   t. 95 saanti   j. 7 riyaal   x. riyaal iyo 40 saanti

Jawaabaha layliska 3

1. 7 riyaal iyo 50 saaanti
2. 8
3. 30riyaal
4. 1 riyaal iyo 50 saanti
5. 3 riyaal 50 saanti

Cutubka 8aad WAQTIGA (AMINTA)

Hordhac

Hawlaha nololmaalmeedkeena la xidhiidha ee aan qabano waxay ku kooban yihiin oo xadida waqtiga. Tusaala ahaan beeralaydu waqtiga ay wax beeraan, waqtiga ay beeraha tacabka ka goostaan, waqtiga ay midhaha ururiyaan way kala duwan yihiin. Sidoo kale ardaydu waqtiga ay wax bartaan, waqtiga ay imtaxaanada u fadhiistaan iyo waqtiga ay fasaxa yihiin way kala duwan yihiin.

Dhaqdhaqaaqeena oo dhan wuxuu ku xidhan yahay saacad tusaale ahaan hal cutub intee in le'eg oo saacado ah ayaan ku dhamaynaa, Halkii xiiso imisa saac / daqiiqo ayay qaadan kartaa, shaqooyinka kale een qabanayno waxaa haboon in la ogaado wakhtiyada aan qabanayno, inta saacadood iyo inta daqiiqadood aynu ku qabanayno.

Haddaba ardaydu waxaa looga baahan yahay inay ogaadaan nuxurka ama murtida wakhtiga degaankooda waxyaabaha kala duwan dhaqaaqoodu inay ku xidhan yihiin wakhti ama xilli, saacado iyo daqiiqado kala duduwan iyo inay gartaan wakhtiga waxbarashadooda, saacadaha iyo daqiiqadaha ay waxbartaan si ay ugu xisaabtamaan saacadaha ama daqiiqadaha intee in le'eg ayey wax kubaran karaan ama ku fahni karaam. Cutubkan qaybihiisu ugu badnaan waxa ay xooga saarayan sidii ay u baran lahaayeen waxyaabaha kor ku xusan.

Ujeeddooyinka Guud ee Cutubkan

Cutubkani marka uu dhammaado kadib, Ardaydu waxay Awood u yeelan doonaan (Awood u yeelan karaan)

- *Ku sheegidda waqtiga saacada, Nus-Saac, iyo Rubuc-Saac iyaga oo adeegsanaya Saacadda kabaalada leh iyo Saacadda Dhijitaalka ah (Saacaddaha aan kabaalada lahayn).*

- *Sharraxidda Xidhiidhka ka dhexeeya saacadda iyo Daqiqaddaha.*

Kaabayaasha baris barasho

Kaaayaasha loo baashan yahay barashada cutubkan

- Noocyo kala duwan oo tilmaama ama sheega saacada ama wakhtiga.
- Shay loo sameeyay sida saacada gidaarka la sudho oo sifiican uga muuqdaan kala duwanaan shaha daqiiqadaha iyo saacada.

8.1. AKHRINTA SAACADDA OO LOO ADEEGSANAYO RUBUC-SAAC IYO NUS- SAAC

Ujeedooyinka gaarka ah ee casharka

Aradaydu waa in ay Awoodi karaan:-

- *Akhrinta saacadaha kabaalada leh iyo sheegidda waqtiga sida saacad, Nusasaac, Rubuc-Saac.*

- *Akhrinta saacadaha aan kabaalada lahayn (Digital clock) iyo sheegidda waqtiga sida saacad-buuxda, Nus-Saac , iyo Rubuc-Saac.*

Ereyada Muhiimka ah

Saacad, nusa-saac iyo rubuc saac

Hordhac

Cutub- hoosaadkan waxaa ardayda looga baahan yahay inay fahmaan ama gartaan saacada in aynu u adeegsano tirinta waqtiga ama qalab lagu tiriyo waqtiga in ay saacadu tahay.

Waxqabadyada baris barasho

Ardayda waa inaad ku hawlgalisaa si ay u tilmaamaan waqtiga iyagoo adeegsanaya shay ka samaysan qaabka saacada oo kale isla markaana ay tilmaamaan hal-saac, nusa-saac iyo rubc-saaca.

Tabaha qiimaynta

Xiliga waxbarashada fasalka dhexdiisa sida lagu siiyey warbixinta waqtiga ardaydu inay si sax ah u fahmeen adigoo kasaxaya wixii khaladaad ah iyo joogtaynta dabagalka ardayda kadib marka uu dhammaado casharku waa in aad nakhtiin u samaysaa. Haddaba sabuurada dusheeda waa in aad ugu sawirtaa saacad wayn adiga oo ogaanaya inay fahmeen ayaad saddex arday si bakhtiyaa nasiib ah u kicinaysaa si ay u tilmaamaan su`aalahan midka hore waxaad tilmaami 5 saac, midka kale 3:30 ardayga saddexaadna 6:15 kadib ardayda kala ee fasalka ha isku dayaan sida kuwan oo kale inay gartaan. Intaa waxaa dheer waa in aad ardayda ku howlgalisaa inay kashaqeeyaan xidhiidhka ka deexeeyaa halka saac, nusa-saac iyo rubuc-saaca. Intaa markay sameeyaan kadib buugga ardyga laylis 8:1 su'aalaha ku xusan usii shaqo fasal iyo shaqo guri inay kaga shaqeeyaan si aad u ogaato inay ardaydu si fiican u fahmeen.

8.2. XIDHIIDHKA KA DHEXEEYA SAACADDA IYO DAQIIQADDAHA

Ujeeddooyinka gaarka ah ee casharka

Casharkan marka uu dhammaado ardaydu waxay awood u yeelan doonaan inay:-

- *Sharraxaan xidhiidhka ka dhexeeya saacadda iyo Daqiiqaddaha*

Ereyada Muhiimka ah

Saacad, daqiiqad

Hordhac

Ardayda sidii ay casharkii hore ee cutub-hoosaadka 8.1 ay ku soo barteen nuxurka saacada adigoo hordhac uga dhigaya saacad iyo daqiiqado ku dhaji sabuurada. Ardayda waydii saacad iyo daqiiqada midka wayn hordhac ahaan kadib adigoo jawaabahooda ka duulaya fahamsii saacadu inay kawayn tahay daqiiqadaha islamarkaana halka saac inuu yahay 60 daqiiqadood.

Ufiirsada

- Daqiiqad waa mid ka kooban saacad
- Halka daqiiqo waxaa loo qoraa 1daqiiqo.
- Halka saac waxaa uu ka kooban yahay 60 daqiiqo.
  Kadib ardayda ku hawlgali inay laba-laba iyagoo ah is waydiiyaan sida:- 2 saac waa imisa daqiiqadood?,1 saac iyo badh waa imasa daqiiqadood? intaa marka ay kawada sheekaystaan ardaydu kaddib saacad badh keed inay tahay 30 daqiiqo, rubuc-saacna yahay15 daqiiqo adiga oo ufaahfaahinaya fahansii ardayda.

Tabaha Qiimaynta

Habka cashar bixinta ardayda qaababka kala duwan ay u guddoomayaan casharkooda, su'aalaha xaggaaga kaga imanaya jawaabaha kala duduwan ee ardaydu ku siinayso iyo dooda ardayda dhexeeda oo ah mid ku sallaysan su'aalo iyo jawaabo sida kaaga muuqata adigoo ka duulaya una soo naqtiimaya islamarkaana waydii su'aalahan soosocda iyo su'aalo kale oo lamid ah waa in aad way diisaa.

B. 60 daqiiqo iyo 30 daqiiqo inay yihiin saacad iyo badh inay sheegaan iyo inkale.

T. Rubuc-saacu waa imisa daqiiqo? su'aalo noocaas oo kale ah markaad waydiiso nuxurka ujeedada casharka hadafka laga leeyaha ardayda sida degdega ah u fahantay su'aalo dheeraad ah tusaale ahaan laba saac oo rubuc la' iyo waliba 1saac oo labatan la' iyo su'aalo kale oo fudud waydii ama su'aal adigoo ka guddoomaya qiyaastooda kadib sii jawaabahooda adiga oo u saxaya meelaha ay ka qaldameen. Si aad cashakan u gunaanado ama aad u dhamayso sii ardayda su`aalaha ku xusan buugga ardayga ee laylis 8:2 adigoo ugu kala qaybinaya shaqo guri iyo shaqo fasal.

Jawaabaha laylis 8.2

i.   1.   j   2.   kh   3.   B   4.   T   5.   X

Cutubka 9aad HABKA XOG URURINTA

Hordhac

Nolosheena caadiga ah ee maalinba maalinta xigta waxa yaabaha aan qabano xogta aan kahelno oon urursano waxay inaga caawinayaan inaan sabab uga dhigno waxyaabaha aynu samaynayno.

Sidaas darted si ay inooga caawiso waxyaabaha aynu qabanayno, maxaynu u qabanaynaa, wakhti intaa inle'eg ayey inagu qaadan kartaa waxaynu qabanayno iyo waliba shayga aan mar qabanay side ayey sal ugu noqon kartaa si shayga kale aan u aqonsano iyo waliba shaqadaan qabanayo side xidhiidh ula yeelan kartaa shaqidi hore waa in markaa ay noqotaa mid inoo tilmaamaysa xogtu.

Haddaba ardaydu waxay kamid yihiin xubno ka tirsan bulshada. Hadba intay jiraan marar badan waxay ay qabanayaan, arkayaan, ama ay maqlaanba sida ugu fudud inay u bartaan xog ururinta waxay u suurta galinaysaa in ay sifiican deegaankooda u gartaan iyo waliba wax walba oo ay qabanayaan inay ku salleeyaan xogtay haysteen iyo inay haboon tahayba. Hadaba xiliga caruurnimadooda xog ururaqa ay barbarnayaan waxay ka dhigaysaa kuwo ku xeel dheer habka xog ururaqa iyo arday laga tusaale qaato.

Si haddaba cutubkani uga caawiyo ardayda xog ururaqa fudud, sanduuq (Shax) fudud oo xog ururaqi ah iyo tirooyin iyo farshaxano isdaba taxan si ay dhamaystiraan ayaa cutubkan loogu qayb qaybiyey

Ujeedooyinka Gaarka ah ee Cutubkan

Cutubkani marka uu dhammaado kadib, Ardaydu waxay Awood u yeelan doonaan (Awood u yeelan karaan)

- Soo ururinta xogaha ama Macluumaadka Fudud.

- Shaxaynta (ku muujinta shaxda) xogaha ama Macluumaadka Fudud ee ay soo ururiyeen.

- Dhammaystirka iyo sameynta Hab-yaallada Fudud ee wal xaha iyo Tirooyinka.

Kaabayaasha Waxbarashada

- Shax ama sanduuqyo fudud
- Mastarada kala duwan oo fudud
- Boodhadh ay ka muuqdaan tirooyinka iyo alaabuhu
- Waraaqaha jaartiga (Kuwa sawirka ee xariiqda leh)

9.1. SOO URURINTA XOGAHA FUDUD

Xiisadaha loogu tala galay cutub – hoosaadkan waa 2 xiisadood

Ujeedooyinka

Ardaydu waa in ay Awoodi karaan:-

- Soo ururinta xogaha Fudud

Hordhac

Adigoo adeegsanayaa waxyaabaha laga helo deegaankeena ee ay ardaydu u adeegsan karaan xog ururrinta shaqooyinka habka baris-barasho ee uu casharku tusayo waad ku billaabi kartaa.

Fiirogaar   ah: Cutub-hoosaadkan   ardaydu   waxay   ururrinayaan   xogta   fudud   iyagoo adeegsanaya waxyaalaha laga helo deegaankooda. Tusaale ahaan adigoo siinaya inta nooc ee khudaar ah tiradooda (Tusaale liin, Cananis, canbe laf, cinab, iwm waad ugu kala duwi kartaa hadba sida deegaanka ay uga jiraan) intee arday ayaa liinta, Canansis, canbe laf, cinab, Afokaadho iyo kuwo kaleba inta badan isticmaala adigoo waydiinaya kadib adigoo ka duulaya jawaabta (Xogta) tirada khudaarta ugu badan ee aadka loo istaacmaalo ama loogu jecel yahay midka uu yahay adigoo waydiinaya inay sheegaan kadib waad fahamsiin kartaa.

Habka Qiimaynta

Xilliga waxbarista ardayga shaqooyinka fasalka dhexdiisa ay ku qabanayaan haddii la karayo inay xog ururiyaan kadib waxaa lafahan siinayaa sidii fasalka oo kale inay ardaydu xog ka soo ururiyaan qoyskooda kadib layimaadaan., Haddaba si loo ogaado inay ardaydu si fiican u fahmeen cutub-hoosaadkan waxaa loogu xijisiinayaa layliska 9.1 ee buugga ardayga su'aalaha ku xusan iyaga oo aad u siinayso qaybna shaqo fasal, qaybna shaqo guri kadib waad ku qiimayn kartaa ardayda.

Jawaabaha Laylista 9.1

1. 9   2. kubada gacanta   3. Kubadda cagta   4. 2

9.2. SHAXDA (SANDUUQA) XOGAHA FUDUD

Xiisadaha loogu tala galay cutub-hoosaadkani waa 2 xiisadood

Ujeedooyinka

Ardaydu waa in ay Awoodi karaan:-

- Shaxaynta xogahaas ay soo ururiyey (ku muujinta shaxda xogaha).

Ereyada Muhiimka ah

Ardaydu waxay awood u yeesheen inay xogta fudud sida loo ururiyo ku barteen cutub-hoosaadkii 9.1 Adigoo ka duulaya xogaha fudud ee ay ardaydu ururriyeen waa inaad tustaa xogta ay heleen

sida shaxda loogu muujiyo ee ugu fudud islamarkaana fahansiinaya in ujeedada cutub-hoosaadkan ay tahay kadib ayaa loo billaabi karaa casharka. Kadib su'aalo kala duwan adigoo waydiinaya habka xogta shax (Sanduuqa) loogu muujiyo islamarkaana waa in aad tustaa.

Habka Baris-barasho

Sidii ay xogaha fudud ardaydu u ururriyeen ayaa cutubkana looga baahan yahay habkii ay shax (Sanduuq) ugu muujin lahaayeen.

Habka Qiimaynta

Xiliga waxbarashada ardaydu fasalka dhexdiisa iyo deegaankoodaba, xogaha ay ku arkeen waa in ay ururinyaan kadib shax (Sanduuq) ku muujiyaan kadib in ay casharka fahmaan si aad u ogaato su'aalo ayaad waydiin kartaa ardayda si bakhtiyaanasiib ah dhawr arday oo ka mid ah u waydii.

Kadib casharka intay fasalka kaga bilaabaan si ay aad ugu bartaan maalinba maalinta xigta dhaqdhaqaaqooda waxyaabaha ku haboon iyagoo kaga shaqaynaya koox ahaan xog intay usoo ururiyaan siday shax ahaan ugu muujiin lahaayeen. Tusaale. Mudana jaamac saddex Sac, 8 Wan iyo 52 Dameer ayuu leeyahay, Marwo muxubo 1 Sac, 3 Wan iyo 2 Dameer ayey leedahay, Hooyo Faadumo 2 Sac, 2 Dameer, iyo 2 Wan ayay leedahay Xogtan ku muuji shax (Sanduuq)

	Sacaha	**Wananka**	**Dameeraha**
Mudana jaamac	3	8	52
Marwo Muxubo	1	3	2
Hooyo Faadumo	2	2	2

9.3. HAB-YAALLADA FUDUD EE WAAXAHA IYO TIROOYINKA

Cutub-hoosaan xiisadaha loogu talagalay waa 2 xiisadood

Ujeedooyinka

Ardaydu waa in ay Awoodi karaan:-

- *Dhammaystirka Hab-yaallada wal xaha iyo Tirooyinka.*

- *Sameynta (Habaynta) Hab-yaallada waaxaha iyo Tirooyinka.*

EreyadaMuhiimka ah

Farshaxanka, Tixidda

Hordhac

Waxaa loo baahan yahay cutub-hoosaadkan inay ku bar-bartaan kuna fahmaan qaababka waxa loo dhigdhigo (taxo) iyagoo adeegsanaya farshaxanka iyo tirooyinka.

Taabaha baris-barasho

Ardayda oo awood buuxda loo siiyo qaabka fudud ee wax la isu garab dhig-dhigo (ama loo toxo)

Tusaale:-

1, 3, 5, …, …,

Waxaa haddana haboon in ardaydu iygoo saaxiibadood laba laba iyo koox ahaan isku kaashanaya inay sameeyaan is garab dhigdhigida shayada (Farshaxanka).

MUQARARKA XISAABTA FASALKA 2^{aad}

Waxa Tarjumay

Mr.Cabdi Salaad Max'ed

XISAABTA FASALKA 2^{AAD}

Baris – Barashada Xisaabta fasalka 2^{aad}

Ardayga Fasalka 2^{aad} ah wuxuu ku soo qaatay Fasalka 1^{aad} Bilowga Tirada, cabbiraadda, xog-ururinta iyo Qaababka walxaha. Dhammaan Qaybahaas xisaabeed ee uu soo qaatay waxaa loogu sii Fidiyey Fasalkan 2^{aad}. Waxaana lagu Rajo weyn yahay in Barashada xisaabta Fasalka 1^{aad} ay aad u xissagelisay Ardayda, isla markaana waxaa lagama Maarmaan ah in la sii xoojiyo loona sii wado xiisogelintaas. Heesihii, Gabayadii iyo ciyaarihii Fasalka 1^{aad} waa in Fasalka 2^{aad} na loo sii wado.

Sidaas oo kale waa in si isdabajoogah loogu Faahfaahiyo Ardayda isku xidhka xisaabta iyo Nolol Maalmeedkooda, isla markaana waa in la siiyo weedh-xisaabeedyo badan oo si dhab ah uga Tarjumaya Nolosha Guryahooda iyo Deggaankoodaba.

Xisaabtu waa maaddo isugu xidhan sida silsilada Taas darted kartida uu Ardaygu ku Fahmi karo shaqo cusub waxay ku xidhan tahay Aqoontii uu horay u soo qatay hal Qayb ama Qaybo badan oo ka mid ah oo loogu xidho shaqada cusub. Carruurta heerkan ah haddii aanay si sax ah u dhuuxin Macnaha (Fikraddaha) waxay Dhaawacaysaa ama caqabad ku noqonaysaa waxbarashadiisa Mustaqbalka (Alifka Bilowga kaa xumaada, La-Baqruu ku dhibaa). Sidaas awgeed xisaabta fAsalka 2^{aad} Tallaabada 1^{aad} ee la qaadayo waa in sii Taxadar leh Naqtiin loogu sameeyo dhammaan xisaabtii Fasalka 1^{aad}. Waa in aad Maskaxda ku haysaa in carruurta ah, Fasalka 2^{aad} ay aad ugu kala duwan yihiin heerka Fahamka waxa la barayo. Sida ay ugu kala duwan yihiin carruurta Fasalka 1^{aad} ah. Haddaba mar kasta oo la arko Arday (cunug) Dhibaato ka haysato dhinaca Fahamka waxaa khasab noqonaysa in la siiyo kabis waxbarasho, iyada oo loo sameynayo waqti gaar ah, lagana caawinayo sidii uu u qaban lahaa (xafidi lahaa) waxa la barayo.

Heerkan Qodobka kale ee aad muhiimka u ah waxaa weeye in Hababka waxdhigistu (Barisfu) ay noqdaan kuwo kala duwan kuna habboon isla markaana xuddun u ah Ardayga (child centered melhods).

Isku Tijaabi in aad Raadiso Fursado kala duwan oo ay ka mid yihiin kuwan soo socda:

* Matalaadda Baraha ee Ardayga

* Falanqayn u dhexaysa Baraha iyo Ardayda

* Falanqayn u dhexaysa Ardayda Naftooda.

* Shaqada ku habboon oo ay si ficil ah ugu celcelinayaan (Appropriate pratical work)

* Xirfaddaha Asaasiga oo la xoojiyo sificil ahna loogu cel celiyo.

* Xallinta Mas'alooyinka (xallinta Dhibaatooyinka) ay ku Jiraan Dabbakhadda ah xisaabta oo lagu dabbakhayo xaaladdaha Maalin kasta dhacaya.

Cutubyada, Qaybaha iyo casharrada ku Qoran Muqararkan xisaabta fasalka 2^{aad} waxaa khasab ah in lagu dhammaystiro 150 xisadood. Tirade Xisaddaha sanad-Dugsiyeedka marka laga reebo kuwaas kor ku 'Qoran waxaa loogu Talo galay Baruhy in uu u adeegsado Hawlaha Naqtiinka ugu dambeeya, Imtixaannada Tijaabada ay iyo Hawlgallada kale.

Ujeeddooyinka Barahsada Xisaabta Fasalka 1^{aad}

Dhammaan casharrada xisaabta Fasalka 2^{aad}

Waa in ay ku Jabaysaan yihiin xirfaddaha Nolosha ee kala ah:

* Nobcinta kartida ardayda ee wax xisaabinta.

* Horumarinta kartida ardayda eek u wajaha ka shaqaysiinta Maskaxda iyo sharrax-Bixinta.

* Awoodsiinta Ardayda in ay u shaqeeyaan si sax ah oo Qurux badan (Habaysan).

- Awoodsiinta ardayda in waxyaabaha ay ka barteen Dugsiga ay ku Dabbakhaan Nolol Maalmeedkooda.

- Kobcinta kartida Ardayda ee xallinta Mas'alooyinka.

Si loo gaadho ujeeddooyinkaas xirfaddaha Nolosha, Marka ay dhammaato xisaabta Fasalka 2aad, Ardaydu waa in ay Awood u yeelan karaan Gaadhitaanka ujeeddooyinka Barashada xisaabta ee soo socda:-

- Akhriska iyo Qoraalka Tirooyinka idil ilaa 1000.

- Ku shaqaynta Afarta xisaabtal ee Aasaasiga ah ee Tirooyinka idil Ilaa 100.

- Xallinta weedh – xisaabeedyada ka kooban Isugeynta iyo kalagoynta Tirooyinka idil ilaa 100.

- Adeegsiga Astaanta kala hormarinta Isugeynta iyo iskudhufashada Tirooyinka idil ilaa 100.

- Soo soocidda Halbeegyada ay leeyihiin Dhererka, culayska iyo inta darer aha shaygu ka qaadi karo (capacity).

- Soo soo cidda Jajabyada $\dfrac{1}{2}$; $\dfrac{1}{4}$; $\dfrac{3}{4}$ iyo $\dfrac{1}{3}$

- Aqoonsiga iyo sawiridda walxaha isku Qaabka ah ee laga helo Agagaarkooda (Deggaankooda).

- Isugeynta iyo kalagoynta Lacagta Itoobiya.

- Akhrinta saacaddaha iyo sheegista saacaad buuxda, Nus-saac iyo Rubuc-saac.

- Soo ururinta iyo shaxaynta xogaha Fudud.

- Dhammaystirka iyo sameynta Hab-yaalka walaxaha, Tirooyinta.

- Xallinta Mas'alooyinka Fudud iyaga oo adeegsanaya Afarta xisaabfal.

CUTUBKA:1ᵃᵃᵈ: <u>ISUGEYNTA iyo KALAGOYNTA ILAA 100 (54 Xisadood)</u>

Cutubkani marka uu dhammaado kadib, Ardaydu waxay Awood u yeelan doonaan (Awood u yeelan karaan)

- Tirinta, Akhriska, Qoraalka,Isbarbardhigga, iyo Horsanaanta Tirooyinka Idil ilaa 100

- Isugeynta Tirooyinka idil ee wadartoodu ka yar tahay 100 ee aan lahayn Hal-qaadashada iyo kuwa leh Hal-Qaadashada.

- Kalagoynta iyo laba god ah oo laga goynayo Tiro hal-God ah iyo Tiro lagba-God ah ee aan lahayn Amaahashada iyo kuwa leh Amaahashada.

- Soo soocidda xidhiidhka ka dhexeeya Isugeynta iyo kalagoynta Tirooyinka idil.

- Xallinta weedh-xisaabeedyada Isugeynta iyo Kalagoynta ah.

Ujeeddooyinka gaarka ah ee casharka	Ciwaanada Cutubka qaybaha iyo Casharada	Wax-qabadyada Baris-barashada iyo Qalabyada loo baahan yahay	Tallaabooyinka Qiimeynta
Casharkani Marka uu dhammaado kadib Ardaydu waa in ay;- ■ Tirin karaan, Akhrin karaan isla markaan Tirooyinka idil ilaa 100. ■ Soo sooci karaan Qiima-Rugeedka ee shaxda Qiima-rugeedka ee shaxda Qiima-Rugeedka ee Godadka koowaadka iyo Tobnaadka. ■ Isbarbardhigi karaan, isla markaana Horsanaan u Qori karaan Tirooyinka idil ilaa 100. ■ Isbarbardhigi karaan Tirooyinka idil Ilaa 100, iyaga oo adeegsanaya calaamaddaha ">" "<" iyo "=".	1. Isugeynta iyo kalagoynta ilaa 100. Naqtiin Tirooyinka idil ilaa 100 (4 xiso)	■ Ku hoggaami ardayda in ay Tiriyaan, Akhriyaan, isla markaana Qoraan Tirooyinka idil ilaa 100, iyaga oo adeegsanaya kaadhadh (Flasha cards) , walxo la Taaban karo, xarriiqda Tirada iyo/ ama Abaakas. ■ Ka Gacansii ardayda in ay soo sooc aan isla markaana muujiyaan Qiima-Rugeedka Tirooyinka idil ilaa 100. ■ Ka caawi ardayda in Is barbar-dhigaan isla markaana u qoraan Horsanaan Tirooyinka idil ilaa 100, utaga oo adeegsabata xarriiqda Tirada. ■ Fursad u sii ardayda in ay sii wadaan Isbarbar dhisidda Tirooyinka idil ilaa 100 iyaga oo adeegsanaya calaamaddaha ">", "<" iyo "=" IWM.	■ Weydii aralayda in ay Horay iyo Gadaalba u Tiriyaan Tirooyin idil oo aad siisay. ■ Weydii ardayda in ay akhriyaan Tirooyinka idil ilaa 100. ■ Weydii Ardayda in ay Qoraan tirooyinka idil ilaa 100. ■ Weydii Ardayda in ay Isbarbar-dhigaan Tirooyinka idil ilaa 100. ■ Weydii Ardayda Qiima-rugeedka Tirooyinka min 2-da God ah.

Ujeeddooyinka gaarka ah ee casharka	Ciwaanada Cutubka qaybaha iyo Casharada	Wax-qabadyada Baris-barashada iyo Qalabyada loo baahan yahay	Tallaabooyinka Qiimeynta
▪ Soo saari karaan wadarta laba Tiro oo wadartoodu ka yar tahay 20 iyaga oo adeegsanaya calaamaddaha "+" iyo "=". ▪ Raadin karaan Farqiga laba Tiro oo idil ilaa 20, iyaga oo adeegsanaya Calaamaddaha "-" iyo "=". ▪ Xallinta Mas'alooyink iyo weedh-xisaabeed yada isugeynta iyo kalagoynta ah ee Tirooyinka idil ilaa 20.	**1.2. NAQTIIN** ISUGEYNTA iyo KA LAGOYNTA ILAA 20 (4 Xiso)	▪ Ku hag ardayda in ay Naqtiin ku sameeyaan Isugeynta iyo kalagoynta Tirooyinka idil ilaa 20, iyaga oo adeegsanaya walxo kala duwan isla markaana ay Fasalka dhexdiisa kaga shaqeeyaan Tusaaleyaal sida Dhammaystirka Derbiyada / Gidaarada isugeynta, sida kuwan soo socda:- <table><tr><td>17</td><td></td><td>19</td><td></td></tr><tr><td>10</td><td>7</td><td>15</td><td></td></tr><tr><td>5</td><td>5</td><td>2</td><td>5</td></tr></table> ▪ Fursad u sii ardayda in ay Isbarbardhigaan Tiorooyinka iyaga oo adeegsasanaya calaamaddaha ">", "<" iyo "=" sida 3 + 4 > 4. ▪ Ka caawi ardayda in ay helaan Qiimaha Doorsoomaha, iyaga oo isku bedelaya Isle'egyada la siiyey sida 5 + □ = 19. ▪ Ka gacansii Ardayda in ay xalliyaan weedhxis aabeedyada, isla markaana sameeyaan weedh-xisaabeedyo sida "cabdi Aabihi wuxuu Bishiu dambaysay bixiyey 12 Birr cashuuraha. Bishanna wuxuu bixiyey mid 4	▪ Weydii Ardayda in ay soo saaraan wadarta iyo Faraqa Tirooyinka idil ee wadartoodu ka yartahay 20. ▪ Sii ardayda weedh-xisaabeedyo kala duwan kana hubi shaqadooda. ▪ Weydii Ardayda in ay shaeegaan tirade ka maqan masalo kasta iyo weliba sumaddaka maqan sida "ku Qor calaamadda ka maqan masaladan 19? 10? 9

Ujeeddooyinka gaarka ah ee casharka	Ciwaanada Cutubka qaybaha iyo Casharada	Wax-qabadyada Baris-barashada iyo Qalabyada loo baahan yahay	Tallaabooyinka Qiimeynta
		Birr ka badan tii Bishii hore oo cashuurah. Haddaba cabdi Aabihii waa immisa Birr cashuurta uu bixiyey Bishan?	
- Isugeyn karaan Tiro 1-God ah iyo Tiro 2-God ah aan lahaynHal-Qaadasho. - Sababayn karaan Faraqa laba Tiro iyaga oo adeesanaya Isugeyn. - Xalin karaan weedh-xisaabeedyada Isugeynta/kalagoynta iyo Tiro hal God ah.	**1.3**. ISU GEYNTA iyo KALAGOYNTA TIRO 1-God ah iyo Tiro 2-God ah oo aan lahayn Hal-Qaadasho Iyo amaahasho. (7 xiso)	- Ku hoggaami ardayda in ay isugeeyaan Tiro 2-God ah iyo Tiro 1-God ah oo aan lahayn Hal-Qaadasho sida $34 + 5 = 39$. - Ku hoggaami ardayda in ay sameeyaan Tusaaleyaal ah kalagoynta Tiro 2-God ah iyo Tiro 1-God ah oo aan lahayn Amaahasho. - Sida $39 - 5$ $39 - 5 = 30 + 9 - 5 = 30 + 4 = 34$. - Ku caawi ardayda in ay Aqoonsadaan xidhiidhka ka dhexeeya Isugeynta iyo kalagoynta Tirooyinka idil. Sida $35 + 4 = 39$, isla markaa $39 - 4 = 35$. - Fursad u sii ardayda in ay xalliyaan weedh-Xisaabeedyada isugeynta ama kalagoynta ah ee Tiro 2-God ah iyo Tiro 1-God ah oo aan lahayn Hal-Qaadasho iyo Amaahsho midna sida "caasha oo ah Gabadh Dukaanley ah ayaa Gelinkii hore waxay inka iibisay 23 xabbo oo ukun ah. Gelinkii	- Sii Ardayda laylisyo ka kooban mas'alooyin ah Isugeynta iyo kalagoynta Tiro 2-God ah iyo Tiro 1-God ah oo shaqo Fasal iyo shaqo Guri ah. Kadibna ka Hubi shaqadooda. - Weydii Qaarka mid ah Ardayda in ay sab u arada ku saaraan Faraqa laba Tiro iyaga oo adeegsanaya Isugeyn. - Sii ardayda Laylisyo ka kooban weedhxisaabeedyo Isugeyn iyo kalagoyn ah oo shaqo Fasal iyo shaqo Guri ah kadibna Hubi shaqada Arday kasta.

Ujeeddooyinka gaarka ah ee casharka	Ciwaanada Cutubka qaybaha iyo Casharada	Wax-qabadyada Baris-barashada iyo Qalabyada loo baahan yahay	Tallaabooyinka Qiimeynta
		dambena waxay iska iibisay 4 xabbo oo ukun ah. Haddaba casho Immsa xabbo oo ukun ah ayey iska iibisay?	
▪ Isugeyn karaan Tiro idil oo 2-God ah iyo Tiro 1-God a oo Hal-Qaadasho leh. ▪ Kalagoyn karaan Tiro idil oo 2-God ah iyo Tiro 1-God ah oo leh Amaahasho.	**1.4**. Isugeynta iyo kalagoynta Tiro 2-Godah oo Hal-Qaadasho iyo Amaahasho leh. (10 Xiso)	▪ Ku hoggaami ardayda in ay isugeeyaan Tiro idil oo 2-God ah iyo Tiro 1-God ah oo Hal-Qaadasho leh. Iyaga oo ka bilaabaya kuwa wadartoodu tahay Dhufsanaha 10. sida $46 + 4 = 50$, kadibna kuwa kale sida $57 + 8 = 65$, Iyaga oo adeegsanaya xarriiqda Tirada. ▪ Ka gacansii Ardayda in ay ka shaqeeyaan Mas'alooyinka iyo Weedh-xisaabeedyada isla markaana ay sameeyaan Mas'alooyin iyo Weedh-Xisaabeedyo Isugeynta Noocaashah sidaas oo kale ay xalliyaan Isugeynta Tirada Geedaha ee Tirooyinka 2-da God ah. ▪ Ku Hoggaami ardayda in ay kalagooyaan Tiro idil oo 2-God ah iyo Tiro 1-God ah oo Amaahasho leh, iyaga oo adeegsanaya Tusaaleyaal. Sida 35-9	▪ Sii Ardayda Laylisyo kala duwan oo ku saabsan Isugeynta Tiro 2-God ah iyo Tiro 1-God ah oo Hal-Qaadasho leh kadibna Hubo shaqadooda. ▪ Sii ardayda Laylisyo kala duwan oo ku saabsan kalagoynta Tiro 2-God ah oo Amaahasho leh kadibna Hubi shaqadooda.

Ujeeddooyinka gaarka ah ee casharka	Ciwaanada Cutubka qaybaha iyo Casharada	Wax-qabadyada Baris-barashada iyo Qalabyada loo baahan yahay	Tallaabooyinka Qiimeynta
		<table><tr><td>Tobnaad</td><td>Kowaad</td></tr><tr><td>3</td><td>5</td></tr><tr><td>-</td><td>9</td></tr><tr><td>2</td><td>6</td></tr></table> ▪ U ogolow ardayda in ay si ficil ah ugu cel celiyaan kalagoyntaas Adiga oo siinaya Laylisyo kala duwan. ▪ Ka gacansii ardayda in ay ka shaqeeyaan Mas'alooyin iyo weedh-xisaabeedyo kalagoyn ah oo ku saabsan xaaladdaha Noloshooda ee Maalin kasta. Kadibna ay iyagu sameeyaan (Dhisaan) mas'alooyin iyo weedh-xisaabeedyo kuwaas la mid ah.	
▪ Isugeyn karaan laba Tiro oo Tirooyin idilah oo min 2-God ah oo aan lahayn Hal-Qaadasho. ▪ Kalagoyn karaan laba Tiro oo Tirooyin idil ah oo min 2-God ah oo aan lahayn Amaahasho. ▪ Xallin karaan Isla markaana meyn karaan Mas'alooyinka iyo weedh-Xisaabeedyada Isugeynta iyo kalagoynta aan	**1.5.** Isugeynta iyo kalgoynta Laba Tiro oo min 2-God ah oo aan lahayn Hal-Qaadasho iyo Amaahasho midana. (15 Xiso)	▪ Ku hoggaami ardayda in ay shaqeeyaan Tusaaleyaal Isugeyntiyo kalagoyntah laba Tiro oo min 2-God ah oo aan lahayn Hal-Qaadasho iyo Amaahasho. Sida $14 + 51 = 65$, $78 - 35 = 43$ ama <table><tr><td>T</td><td>K</td></tr><tr><td>1</td><td>4</td></tr><tr><td>+5</td><td>1</td></tr><tr><td>6</td><td>5</td></tr></table> <table><tr><td>T</td><td>K</td></tr><tr><td>7</td><td>8</td></tr><tr><td>-3</td><td>5</td></tr><tr><td>4</td><td>3</td></tr></table> ▪ Fursad u sii Ardayda in ay ka shaqeeyaan	▪ Sii Ardayda laylisyo kala duwan oo ah Isugeynta iyo kalgoynta laba Tiro oo min 2-God ah oo aan lahayn Hal-Qaadasho iyo Amaahasho. ▪ Sii Ardayda weedh-Xisaabeedyo Fudud oo ku saabsan Molosha dhabta ah oo Isugeyn ugu kalagyoyn ah

Ujeeddooyinka gaarka ah ee casharka	Ciwaanada Cutubka qaybaha iyo Casharada	Wax-qabadyada Baris-barashada iyo Qalabyada loo baahan yahay	Tallaabooyinka Qiimeynta
lahayn Hal-Qaadasho iyo Amaahasho midna		Mas'alooyinka iyo weedhxisaabeedyada ku saabsan Isugeynta iyo klagoynta laba Tiro oo min 2-God ah oo aan lahayn Hal-Qaadasho iyo Amaahasho midna (weedh-Xisaabeedyada waa in ay ku Jiraan Arimaha kala ah Ilaalinta Deggaanka, kaydsiga ama kaydka, cashuuraha IWM.	
▪ Isugeyn karaan laba Tiro oo min 2-God ah oo leh Hal-Qaadasho. ▪ Kalagoyn karaan laba Tiro oo mi 2-God ah oo leh Amaahasho.	**1.6.** Isugeynta iyo kalagoynta laba Tiro oo min 2-God ah oo leh Hal-Qaadasho iyo Amaahasho (15 Xiso)	▪ Ka caawi ardayda in ay isugeeyaan ama kalagooyaan laba Tiro oo min 2-God ah oo leh Hal-Qaadasho/Amaahasho. Sida $64 + 28 = ?$ iyo $53 – 14 = ?$ ▪ Ka gacansii ardayda in ay Hubiyaan Faraqa kalagoynta iyaga oo adeegsanaya Isugeyn sida $94 – 37 = 57$ sababta oo ah $57 + 37 = 94$ ama 9 74 18 ▪ Fursad u sii ardayda in ay xalliyaan isla markaana sameeyaan (dhisaan) Mas'alooyinka iyo weedh-xisaabeedyada Isugeynta iyo kalagoynta Tirooyinka 2-da God ah.	▪ Sii ardayda laylisyo kala duwan oo ah isugeynta iyo kalagoynta Tirooyin ka idil ee min 2-da God ah ee leh Hal-qaada shada & Amaahashada. ▪ Sii ardayda weedh-xisaabeedyyo Fudud oo ka Tarjumaya Nolol Maal meedkooda.

| Ujeeddooyinka gaarka ah ee casharka	Ciwaanada Cutubka qaybaha iyo Casharada	Wax-qabadyada Baris-barashada iyo Qalabyada loo baahan yahay	Tallaabooyinka Qiimeynta
▪ Xallin karaan isla markaana Tarjumi karaan mas'alooyinka iyo weedh-xisaabeedyada Isugeynta iyo Kalagoynta Tirooyin ka 2-da God ah ▪ Isugeyn karaan 3 Tiro oo min 2-God ah. ▪ Soo sooci karaan kalagoynta aan lahayn Faraq (Laga gooyuhu ka yar yahay la gooyaha)	**1.7**. Weedh-xisaabeedyada Isugeynta iyo kalagoynta ah ilaa 100.	▪ Fursad u sii ardayda in ay weedh-xisaabeedyada u Tarjumaan mas'alooyin, iyaga oo adeegsanaya Ereyo, calaamado/sumado iyo Hab-yaallo (paherns) isla markaana ay xalliyaan/ka shaqeeyaan sida "waxay ka Fekeray Tiro, waxa aan u geeyey 35. haddii jawaabtaydu tahay 72. waa maxay Tirada aan ka Fekeray? Faasna waa in ay marka hore u Tarjumaan □ + 35 = 72 ▪ U harseed Ardayda in ay Tirada ka maqan ku buuxiyaan meesha ka Bannaan hab-yaalkan (patterns) sida 54, 52, ____ 48, ____ , 44 ____ ▪ KU Dhiirigeli in ay ka shaqteeyaan weedh-xisaabeedyada ku saabsan Arimaha khuseeya sida caafimaadka, waxsoo saarka, kaydka, cashuuraha, Islaalinta Degganka, IWM. Sida 1. Bishii hore waxaa la diiwaangeliyey 35 Qof oo qaba Fayraska HIV. Bishan dadka Qaba ama u dhibaataysan cudurka HIV waxay noqdeen 47 Qof. Haddaba immisa Qof ayaa ku korortay	▪ Sii ardayda laylisyo kala duwan oo ay weedh-xisaabeedyada u Tarjumayaan Mas'alooyin, ama Mas'alooyinka ay u Tarjumayaan weedh-xisaabeedyo. ▪ Sii ardayda laylisyo kala duwan oo ay ku buuxinayaan Tirada maqan. ▪ Sii ardayda weedh-xisaabeedyo kala duwan kana hubi shaqadooda. ▪ Sii ardayda laylisyo kalagoyn una sheeg in ay ka soo socaan kuwa aan lakalgoyn kari iyo kuwa la kala goyn karo.

Ujeeddooyinka gaarka ah ee casharka	Ciwaanada Cutubka qaybaha iyo Casharada	Wax-qabadyada Baris-barashada iyo Qalabyada loo baahan yahay	Tallaabooyinka Qiimeynta
		Tiradii Bishii Hore?	
		2. Axmed wuxuu Todobaadkii hore sameeyey 42 Dheri oo kuwa Gacanto lagu sameeyo ah Todobaadkan wuu xanuunsaday wuxuuna sameeyey 28 Dheri. Haddaba immisa Dheri ayaa Todobaadkan ka Baaqday?	
		▪ Ka Gacan sii ardayda in ay Daaha-Ka qaadaan sida la isugu geeyo saddex Tiro oo min 2-God ah oo wadartoodu ka yar tahay 100 sida	
		23 + 16 + 37.	
		▪ Ka caawi ardayda in ay soo soocaan isla mar ahaantaana sababeeyaan Mas'alooyinka kalagoynta ah ee aan la kalagoyn Karin ama aan lahayn xalka. Tusaale ahaan 79 – 82 = ?	
		40 – 70 = ? IWM.	

CUTUBKA:2^{aad}: ISKUDHU FASHADA iyo ISUQAYBINTA ILAA 100 (40 Xisadood)

Ujeeddooyinka Guud ee Cutubkan:

Cutubkani marka uu dhammaado kadib, Ardaydu waxay Awood u yeelan doonaan (Awood u yeelan karaan)

- Isku dhufashada Tirooyinka idil ilaa 100 oo lagu dhufanayo 2 iyo 10 iyo Isuqaybinta Tirooyinka idil ilaa 100 oo loo qaybinayo 2 iyo 10 kuwa aan Haraaga lahayn.

- Isku dhufashada Tirooyinka idil oo lagu dhufanayo "0" iyo 1 iyo Isuqaybinta Tirooyinka idil ilaa 100 iyo 1

- Iskudhufashada Tirooyinka idil ilaa 100 iyo Tirooyinka min halka god ah ee Tarantoodu ka yar tahay 100.

- Isuqaybinta Tirooyinka idil ilaa 100 iyo Tirooyinka min halka god ah ee Haraa la'aan isuqaybsami kara.

- Xallinta weedh-xisaabeedyada ah iskudhufashada iyo Isuqaybinta oo lagu dhufanayo loo Qaybinayo Tirooyinka min halaka god ah iyo 10.

Ujeeddooyinka gaarka ah ee casharka	Ciwaanada Cutubka qaybaha iyo Casharada	Wax-qabadyada Baris-barashada iyo Qalabyada loo baahan yahay	Tallaabooyinka Qiimeynta
Qaybtani Marka ay dhanmaato ka dib Ardaydu waa in ay :- ▪ Isku dhufan karaan 2 ama 10 iyo Tiro kale oo Tarantoodu tahay ilaa 100. ▪ Adeegsan karaan calaamadda isku dhufashada oo ah "x" isla markaana kala sooci karaan macnaha xisaabeed ee "Isir", "Taman" ▪ Isu qaybin karaan Isuqaybinta Qaybshaheedu yihiin 2 iyo 10 ee aan Haraaga lahayn. ▪ Xallin karaan weedh-xisaabeedyada ah iskudhufa shada iyo isuqay binta Qaybshaheedu yahay 2 iyo 10	**2. ISKUDHUFAS HADA IYO ISUQAYBINTA ILAA 100.** **2.1.** Naqtiin Isku dhufashada 2ama 10 iyo Tiro kale iyo Isuqaybinta Qaybshaheedu yahay 2 iyo 10 (10 Xiso)	▪ Fursad u sii Ardayda in ay Naqtin ku sameeyaan Isku dhufashada Tirooyinka idil ilaa 100 iyo 2 iyo 10 oo Tarantoodu tahay ilaa 100, iyaga oo adeegsanaya Biirooyin soo noqnoqda iyo tirinta laba jibbaaraneyaasha yar-yar sida 3 2+2+2=6 + 3×2 = 6 3+3=6 3 2 × 3 = 6 2+2+2 ▪ Ku hoggaami ardayda in ay kala soocaan isla markaana adeegsadaan Ereyada "Isir" iyo "Taraan". Tusaale ahaan 2×3 = 6 "2" iyo "3" waa Isirro, 6-na waa Taran. ▪ Fursad u sii Ardayda in	▪ Sii Ardayda laylisyo shaqo Guri ah oo ku saabsan Isku dhufashada Tirooyinka ilaa 20. ▪ Sii Ardayda Laylisyo ku saabsan Isuqaybinta ilaa 20. sida 18 ÷ 2 = 9 ▪ Weydii Ardayda in ay Tibxaha isku dhufashada ah u Tibaaxaan wadar ahaan.

Ujeeddooyinka gaarka ah ee casharka	Ciwaanada Cutubka qaybaha iyo Casharada	Wax-qabadyada Baris-barashada iyo Qalabyada loo baahan yahay	Tallaabooyinka Qiimeynta
		ay Naqtiin ku sameeyaan Isuqaybinta Qaybshaheedu yahay 2 iyo 10 iyaga oo adeegsanaya kalagoynta soo Noqnoqota iyo xaddiyo ka kooban Tiro dhaban ah oo loo kala qaybiyey laba Qaybood oo isle'eg ▪ Ku Gacansii ardayda in ay Adeegsadaan xarriiqda Tirada, si ay uga caw iso Fahamka Isuqaybinta. Tusaale ahaan $6 \div 2 = 3$ 0 1 2 3 4 5 6 ▪ Fursad u sii Ardayda, iyaga oo koox koox ah in ay ka shaqeeyaan mas'alooyinka isku dhufashada 2, 10 iyo Tiro kale iyo Isuqaybinta Qaybshaheedu yahay 2 iyo 10.	
▪ Isku dhufan karaan Tirooyin ka Idil ilaa 100 oo dhufanayo "1" iyo "0". ▪ Isuqaybin karaan Isuqaybinta Qaybshaheedu yahay 1.	**2.2.** Isku dhufashada 0 iyo 1 iyo Tiro kale iyo Isuqaybinta Qaybshaheedu yahay 1. (8 Xiso)	▪ Ka caawi ardayda in ay Falanqeeyaan Isku dhufashada Tirooyinka idil ilaa 100 oo lagu dhufanayo 1 iyo "0". Isla markaana ay ku soo gunaanadaan in "Tiro kasta marka lagu dhufato "0" ay Tarantoodu tahay "0" iyo tiro kasta oo lagu dhufto 1 waa isla Tiradii. ▪ Ka caawi ardayda in ay	▪

Ujeeddooyinka gaarka ah ee casharka	Ciwaanada Cutubka qaybaha iyo Casharada	Wax-qabadyada Baris-barashada iyo Qalabyada loo baahan yahay	Tallaabooyinka Qiimeynta
		Falanqeeyaan isuqaybinta Qaybsha heedu yahay "1", isla markaana ay xaqiiqsadaan in Isuqaybinta Tiro iyo 1 aanay waxba ka bedelayn Tiradii.	
▪ Tirooyinka idil ilaa 100 u Tirin karaan saddexsaddex. Afar-Afir; shan-shan ilaa sagaal-sagaal. ▪ Tiro kasta oo 1-God ah ku dhufan kasaan Tiro kale 1-God ah.ku dhufan kasaan Tiro kale 1-God ah. ▪ Tixi karaan Dhufsaneyaasha 3, 4, 5, 6, 7, 8, iyo 9. ▪ Xallin karaan weedh-xisaabeedyada Fudud ee ah Tiro 1-God ah oo lagu dhuftay Tiro kale oo 1-God ah.	**2.3** Isku dhufashada 3, 4, 5, 6, 7, 8, 9, iyo Tiro kale. Iyo Isuqaybinta Qaybshaheedu yihiin 3 ilaa 9 (22 Xiso)	▪ Tus ardayda Isku dhufashada 3 iyo Tiro kale, Adiga oo adeegsanaya laydi loo Qaybiyey labajibaaraneyaal yar-yar Tusaale ahaan $3 \times 5 = 15$ 5 3×5=15 + 5×3=15 5 + 3 + 3 + 3 + 3 5 ▪ Fursad u sii Ardayda in ay kor ugu dhawaaqaan Akhriska, isla markaana ay Qoraan shaxda Isku dhufashadaTirooyinka idil iyo 3, 4, 5, 6, 7, 8 iyo 9 ee Tarantoodu ka yar tahay 100. ▪ Ka caawi Ardayda in ay dhammaystiraan Dhufsaneyaasha 3, 4, 5, 6, 7, 8, iyo 9 ee maqan. Tusaale ahaan Dhammaystir Dhufsaneyaasha 3 ee ka maqan kuwan 21, 24, …	▪ Weydii Ardayda in ay Tirooyinka idil ku dhuftaan Tirooyinka 3, 4, iyo 5 iyaga oo kaga Jawaabaya Tiraab ahaan (Afka) iyo Qoraal ahaanba. Adiga oo indha-in dhaynaya Jawaabahooda. ▪ Weydii Ardayda inay Tirooyinka idil ku dhuftaan 6, 7, iyo 9 (Tiraab ahaan iyo Qoraal ahaanba). ▪ Weydii Ardayda in ay Taxaan Dhufsaneyaasha 3, 4, 5, 6, 7, 8 iyo 9 ▪ Weydii Ardayda in ay Tirooyinka idil u qaybryaan 3, 4, 5, 6, 7, 8 iyo 9 (Tiraab ahaan iyo Qoraal ahaanba). ▪ Sii Ardayda Laylisyo ka kooban mas'alooyin Iskudhufasho iyo Isuqaybin ah oo shaqo Fasal iyo shaqo Guri ah. Ka dibna ka hubi shaqadooda.

Ujeeddooyinka gaarka ah ee casharka	Ciwaanada Cutubka qaybaha iyo Casharada	Wax-qabadyada Baris-barashada iyo Qalabyada loo baahan yahay	Tallaabooyinka Qiimeynta
		30, 33 iyo 18, 15 … 6.	
		▪ Ku Gacansii Ardayda in ay u Tiriyaan saddex-saddex, Afar-Afar, shan-shan, Lix-Lix, ilaa sagaal-sagaal ilaa 100 iyaga oo kor ugu dhawaaqaya.	
		▪ Fursad u sii Ardayda in ay ka shaqeeyaan weedh-xisaabeedyada Iskudhufashada ah, sida "Todobaadkii hore waxaa cusb itaalka laga Diiwaangel ujey 14 Qof oo Qaba Fayraska HIV/AIDS. Todobaadkan Tiradaasi waxay korodhay shan (J) Jeer (shan lab). Haddaba Todobaadkan waa Immisa Tirada dadka qaba HIV ee laga Diiwaangeliyey cusbitaalkaas?	
		▪ Ku hoggaami ardayda in ay si Isle'eg u qaybsadaan walxo kala duwan iyaga oo lammaane ah ama koox-koox ah sida 2 Arday si Isle'eg u qaybsadeen 4 Qalin.	
		▪ U horsed Ardayda in ay Isuqaybinta ku soo bandhigaan kalagoynta soo noqnoqota iyaga oo adeegsanaya Abaakas.	
		▪ Ka caawi ardayda in ay isuqayb iyaan Isuqaybinta Qaybshaheedu yahay 3,	

Ujeeddooyinka gaarka ah ee casharka	Ciwaanada Cutubka qaybaha iyo Casharada	Wax-qabadyada Baris-barashada iyo Qalabyada loo baahan yahay	Tallaabooyinka Qiimeynta
		4, 5, 6, 7, 8 iyo 9 ee aan haraaga lahayn.	
		▪ Fursad u sii Ardayda in ay si ficil ah ugu celceliyaan, iyaga oo lammaane ah iyo iyaga oo koox-koox ah in ay si isle'eg u qaybsadaan walxo kala duwan. Tusaale ahaan	
		- 12 Buug si isle'eg ha u qaybsadeen 2 Arday	
		- 12 Buug si Isle'eg ha u qaybsadeen 3 Arday	
		- 16 Qari si Isle'eg ah u qaybsadeen 4 Arday.	
		▪ Ku hag ardayda in ay ka shaqeeyaan mas'alooyinka ah Isuqaybinta Qaybshaheedu yahay 3, 4, 5, 6, 7, 8 ama 9.	
		▪ Ku Dhiirigeli Ardayda in ay ka shaqeeyaan mas'alooyinka Isuqaybinta ah iyaga oo Adeegsanaya xidhiidhka ka dhexeeya iskudhufashada iyo isuqaybinta sida Tusaale ahaan. Hibaaq Hooyadeed ayaa waxay kayd ahaan u dhigatay Rubuc ka mid ah mushahar-Bileedkeeda. Haddii lacagta ay kaydsatay ay tahay 9 Birr, waa immisa mushaharka ay Bishii qaadato Hibaaq Hooyadeed?	

CUTUBKA:3^{aad} : <u>CABBIRAADDA (10 XisO)</u>

Ujeeddooyinka Guud ee Cutubkan:

Cutubkani marka uu dhammaado kadib, Ardaydu waxay Awood u yeelan doonaan (Awood u yeelan karaan)

- Adeegsiga Dhererka oo lagu cabbirayo Sentimitir (sm) iyo mitir (m)

- Isugeynta iyo kalagoyn Halbeegyada dhererka ee isku midka ah.

- Adeegsiga halbeegga Litir oo lagu cabbirayo waxyaabaha Dareeraha ah (Liter in Capacity).

- Isugeynta iyo kalagoynta Halbeegga Litir ka (L)

- Adeegsiga Halbeegga Kiilogaraam (kg) oo lagu cabbirayo Culayska walxo kala duwan.

- Isugeynta iyo kalagoynta Halbeegga kiilogaramm (kg)

Ujeeddooyinka gaarka ah ee casharka	Ciwaanada Cutubka qaybaha iyo Casharada	Wax-qabadyada Baris-barashada iyo Qalabyada loo baahan yahay	Tallaabooyinka Qiimeynta
Casharkani marka uu dhammaado kadib Ardaydu waa in ay:- ▪ Cabbiri karaan Dhererka walxo kala duwan iyaga oo adeegsanaya Mastarad sentimir ah. ▪ Cabbiri karaan Dhererka walxaha iyaga oo adeegsanaya mitir. ▪ Soo sooci karaan sumaddaha "sm" iyo "m". ▪ Sharxi karaan isla markaana muujin karaan xidhiidhka ka dhexeeya "sm" iyo "m".	**3. CABBIRAADDA** Dhererka oo lagu cabbirayo "sm" iyo "m" (2 Xiso)	▪ Fursad u sii Ardayda in ay sharrax ka bixiyaan Baahida keentay in Dhererka lagu cabbiro Halbeeg caalami ah (standard unit). ▪ Ku hoggaami ardayda in ay cabbiraan dhererka walxo kala duwan sida Qalin-Qori, Qoryo yar-yar IWM. Iyaga oo adeegsanaya Mastarad ku cabbiran Halbeegga sentimitir (sm). ▪ Ka caawi ardayda in ay Falanqeeyaan Halbeegga lagu cabbiro walxaha Dhererkoodu dheer yahay. ▪ Ku Gacansii Ardayda in ay cabbiraan wal xaha leh dhererka dheer sida Gidaarada	▪ Weydii Ardayda in cabbiraan Dheskigooda iyaga oo adeegsanaya Mastaradda leh sm. ▪ Weydii ardayda iyaga oo koox-koox ah in ay cabbiraan Dhererka iyo Ballaca Fasalkooda, Garoonka ciyaanaha IWM. Iyaga oo adeegsanaya Mitir. ▪ Weydii ardayda xidhiidhka ka dhexeeya "m" iyo "sm".

Ujeeddooyinka gaarka ah ee casharka	Ciwaanada Cutubka qaybaha iyo Casharada	Wax-qabadyada Baris-barashada iyo Qalabyada loo baahan yahay	Tallaabooyinka Qiimeynta
		Fasalka, sabuuradda, Garoonka kubadda IWM, iyaga oo adeegsanaya Hableegga Mitir (m) ▪ Fursad u sii Ardayda in ay Daah-furaan xidhiidhka ka dhexeeya Mitir (m) iyo sentimitir (sm) iyaga oo adeegsanaya Mastaradda sentimitirka leh iyo xarigga mitir ka (meter Role) isla markaana ay adeegsadaan sumadda hooda.	
▪ Isugeyn karaan Halbeegyada dhererka ee isku midka ah. ▪ Kalagoyn karaan Halbeegyada dhererka ee isku mid ah.	Isugeynta iyo Kalagoynta "sm" ama "m" (2 Xiso)	▪ Fursad u sii Ardayda in ay isugeeyaan Halbeegyada dhererka ee isku midka ah sida 3m + 2m = ? 4 sm + 3sm = ? ▪ Ka caawi ardayda in ay kalagooyaan Halbeegyada dhererka ee isku midka ah sida 5m – 2m = ? ; 17sm – 6m =?	▪ Sii ardayda weedh-xisaabeedyo isugeyn iyo kalagoyn ah oo Halbeegyada dhererka ah (s mama m)
▪ Litirka ku cabbiri karaan Dareeraha. ▪ Isbarbardhigi karaan walxo ay ku jiraan waxyaabo Dareere ah oo ku cabbirana Litir.	Halbeegga Litirka (1 Xiso)	▪ Fursad u sii Ardayda in ay Fasalka keenaan walxaha ku cabbiran litir ee ay heli karaan sida Dhalooyinka. ▪ Ka Gacansii ardayda iyaga oo lammaane ah in ay cabbiraan cadad Biyo ah iyaga oo adeegsanaya caagado kala duwan, Isla	▪ Weydii Ardayda iyaga oo koox-koox ah in ay cabbiraan Qaadka (mugga) walxo kala duwan iyaga oo adeegsanaya Dhalooyin ku cabbiran Litir sida Garaafaha, Baaldiga, Digsiga caagadaha.

Ujeeddooyinka gaarka ah ee casharka	Ciwaanada Cutubka qaybaha iyo Casharada	Wax-qabadyada Baris-barashada iyo Qalabyada loo baahan yahay	Tallaabooyinka Qiimeynta
		markaana sameynaya Laylisyo kala duwan sida "immisa Litir ayuu qaadi karaa baaldigu?	
▪ Isugeyn karaan Hal beegga Litir ka ▪ Kalagoyn karaan Halbeegga Litirka	Isugeynta iyo Kalgoynta Litirka (l) (2 Xiso)	▪ U ogolow Ardayda in ay isugeeyaan Hlbeegyada Lirit ka sida 10L + 5l = 15l ▪ Ka caawi Ardayda in ay kalagooyaan Halbeegga litirka (l) sida 25l – 12l = 13l	▪ Weydii Ardayda in ay xalliyaan mas'alooyinka ah Isugeynta iyo kalagoynta Litirka (waxayaabaha Dareeraha ah).
▪ Cabbiri karaan culayska walxo kala duwan iyaga oo adeegsanaya kiilogaraam (kg) ▪ Isbarbardhigi karaan culayska waxaha oo ku cabbiran kulogaraam (kg)	Hableegga culays ka oo kiilogaraam (1 Xiso)	▪ Soo diygari oo keen Dugsiga walxo lagu dul-Qoray calayskooda oo kulogaraam (kg) ah sida Baakado cunto ah kadibna Tus ardayda. ▪ Ku hoggaami ardayda in ay cabbiraan culayska walxo isku nooc ah oo ku cabbiran kiilogaraam (kg) iyaga oo adeegsanaya Miisaanada Fudud. ▪ Ku Gacansii ardayda iyaga oo Lammaane ah in ay Qiyaasaan culayska walxaha sida Dhagaxyada waaweyn, isla markaana ay xaqiijiyaan culayskooda saxda ah, iyaga oo adeegsanaya misaan.	▪ Weydii ardayda in Arday kasta uu soo cabbiro culayska Arday kale inta kiilogaraam (kg) ee uu yahay isaga oo adeegsanaya Miisaan. ▪ Weydii Ardayda in ay Isbarbar dhigaan culayska walxaha sida Dhagxaanta. ▪ Sii Hawlgallo ay ku soo cabbirayaan culayska walxo kala duwan.
▪ Isugeyn karaan	Isugeynta iyo	▪ Ka caawi ardayda in	▪ Weydii ardayda in ay

Ujeeddooyinka gaarka ah ee casharka	Ciwaanada Cutubka qaybaha iyo Casharada	Wax-qabadyada Baris-barashada iyo Qalabyada loo baahan yahay	Tallaabooyinka Qiimeynta
culayska oo kiilogaraam ah ▪ Kalagoyn karaan culayska oo kiilogaraam ah	Kalagoynta Halbeegga kiilogaraam (kg) (2 Xiso)	ay cabbiraan culayska laba walxood iyaga oo adeegsanaa Miisaan ah kiilogaraam. Kadibna ay isugeeyaan culayska labada walxood. tusaale ahaan 2kg sonkor ah + 3kg (sonkor) = 5kg. ▪ Ka caawi ardayda in ay cabbiraan culayska laba walxood oo kiilogaraam ah iyaga oo adeegsanaya Miisaan Dabadeedna ay kalagooyaan culayska labada walxood sida 5kg – 2kg = 3kg ▪ Fursad u sii ardayda in ay ka shaqeeyaan Mas'alooyinka ah Isugeynta iyo Kalagoynta culayska oo ah kiilogaraam.	kashaqeeyaan mas'alooyinka ah Isuganta culayska oo kiilogaraam ah. ▪ Weydii ardayda inay ka shaqeeyaan Mas'alooyinka ah kagoynta culayska. ▪ Hawlgallo ku saabsan soo cabbiridda culayska walxo kala duwan kadibna ay isu geynayaan ama kalagoynayaan culayskooda.

CUTUBKA:4^{aad} : <u>BARASHADA JAJABXADA (6 Xisadood)</u>

Ujeeddooyinka Guud ee Cutubkan:

Cutubkani marka uu dhammaado kadib, Ardaydu waxay Awood u yeelan doonaan (Awood u yeelan karaan)

- Soo soocidda Badh (Nus) iyo Rubuc

- U Qaybinta walxaha saddex – Meelood (Qaybood)

- Muujinta Fahamka xidhiidhka ka dhexeeya walax idil, walaxda – Badhkeed, Rubuceed iyo Saddex – Daloolkeeda

- Qoridda Astirada Jajabyada badh (Nusaska) Rubucyada iyo saddex – Daloollada.

Ujeeddooyinka gaarka ah ee casharka	Ciwaanada Cutubka qaybaha iyo Casharada	Wax-qabadyada Baris-barashada iyo Qalabyada loo baahan yahay	Tallaabooyinka Qiimeynta
▪ Casharkani Markaa uu dhammaado kadib ardaydu waa in ay Awood u yeetan karaan:- ▪ Sawiridda iyo muujinta (Tilmaamidda) badhka (Nusaska) walxaha. ▪ Sawiridda iyo Tilmaamidda Rubucyada walxaha. ▪ Muujinta xidhiidhka ka dhexeeya Nusaska iyo Rubucyada iyaga oo adeegsanaya sawir. ▪ Isugeynta Nusaska iyo Rubucyada iyaga oo adeegsanaya sawir	4. BARASHADA JAJABYADA Naqtiin Nusaska iyo rubucyada (2 Xiso)	▪ Fursad u sii Ardayda in ay gooyaan Nusaska iyo Rubucyada iyaga oo adeegsana Liin ama walxo la mid ah. ▪ Ku hoggaami ardayda in ay sawiraan walxo muujinaya Nusaska, Rubucyada iyo saddex-Rubuc. ▪ Ka caawi ardayda, iyaga oo Lammaane ah in ay Falanqeeyaan isla markaana ka war-bixiyaan inta Rubuc ee ay ka kooban tahay ama ku Jirta hal walax (hal shay) iyo badhka (Nuska) walaxdaas. ▪ Ka Gacansii ardayda in ay isugeeyaan badhka (Nuska) iyo Rubuca walaxda iyaga oo adeegsanaya sawirid.	▪ Weydii Ardayda in ay sawiraan isla markaana xardhaan Rubuca Goobada, kadibna saddex-Rubuca Goobada. ▪ Weydii Ardayda immisa Rubuc ayaa ku Jirta badhka (Nuska) walaxda. ▪ Weydii Ardayda Immisa Rubuc ayaa ku Jirta saddex-Badh.
▪ Sawirdda iyo tilmaamidda	Saddex Dalool ka walxaha	▪ Fursad u sii Ardayda in ay hal xabbo oo liin ah	▪ Weydii ardayda in ay Goobada u qaybiyaan

Ujeeddooyinka gaarka ah ee casharka	Ciwaanada Cutubka qaybaha iyo Casharada	Wax-qabadyada Baris-barashada iyo Qalabyada loo baahan yahay	Tallaabooyinka Qiimeynta
saddex-Daloolka walxaha.	(2 Xiso)	ama wal xo la mid ah u kala Gooyaan saddex-Gabal oo isle'eg isla markaana ay Tilmaamaan "saddex-Dalool hal?; "Saddex-Dalool-Laba". ▪ Ku hoggaami ardayda in ay sawiraan, kadibna muujiyaan "saddex-Dalool-Hal" iyo "saddex-Dalool-Laba" ee wal xo kala duwan sida Gabal warqad ah.	saddex Gabal ama saddex Dalool. ▪ Weydii Ardayda in ay muujiyaan sadde-Dalool-Laha ka mid ah cabal warqad ah.
▪ Soo soocidda xidhiidhka ka dhexeeya walxda (shayga) iyo Jajabkeeda ah Nusaska, Rubucyada iyo Saddex-Daloollada. ▪ Qoridda Astirada badh (Nus), hal Rubuc, Saddex-Rubuc; saddex-Dalool-hal, saddex-Dalool-Laba.	walaxda iyo Jajabyada (Astirada Jajabyada walaxda) (2 Xiso)	▪ fursad u sii ardayda in ay Isticmaalaan sawiridda Nusaska walaxda isla markaana ay muujiyaan in walaxdaas ay ku jiraan ama ay ka kooban tahay laba-Nus (Laba-Badh). ▪ Ku dhiirigeli Ardayda in ay Afar-Rubuc u qaybiyaan Gabal warqad ah, isla markaana ay muujiyaan in warqaddaasi (walaxdaasi) ay ka kooban tahay 4-Rubuc. ▪ Ka caawi ardayda in ay Qoraan Astirooyink Badh (Nus) ; hal-Rubuc; saddex-Rubuc; saddex-Dalol-hal; iyo Saddex-Dalool-laba. ▪ U horsed ardayda in ay isla doontaan macnaha, Dhawaaqa iyo Astirada mid kasta:-	▪ Weydii Ardayda immisa Gabal ayaa loo qaybiyey walaxdan? Imisa Nus ayaa ku Jira? ▪ Weydii aradyada immisa Gabal ayaa loo Qaybiyey walaxdan? Immisa Rubc ayaa ku Jira? Side loo Qoraa hal-Rubuc iyo saddex-rubuc? ▪ Weydii ardayda immisa Gabal ayaa loo qaybiyey walaxdan? Immisa saddex-Dalool-laba saddex-Dalool-Laba ayaa ku Jirta. ▪ Qaar ka mid ah Ardayda Fasal ka weydii in ay sabuuradda ku Qoraan Asfirooyinka Nus; hal-Rubuc; saddex-Rubuc, saddex-Dalool-hal; iyo

Ujeeddooyinka gaarka ah ee casharka	Ciwaanada Cutubka qaybaha iyo Casharada	Wax-qabadyada Baris-barashada iyo Qalabyada loo baahan yahay	Tallaabooyinka Qiimeynta
		→ Badh (Nus) = $\frac{1}{2}$ → Hal –Rubuc = $\frac{1}{4}$ → Saddex-Rubuc = $\frac{3}{4}$ → Saddex-Dalool–hal = $\frac{1}{3}$ → Saddex-Dalool-Laba = $\frac{2}{3}$ ▪ Ka Taageer ardayda in ay Aqoon sadaan Astirooyinka $\frac{1}{2}$; $\frac{1}{4}$; $\frac{3}{4}$; $\frac{1}{3}$ iyo $\frac{2}{3}$	Saddex-Dalool-laba.

Cutubka 5^{aad}:- Tirooyinka Idil Ilaa 1000…………(12 xiisadood)

Ujeeddooyinka Guud ee Cutubkan:

Cutubkani marka uu dhammaado kadib, Ardaydu waxay awood u yeelan doonaan (Awood u yeelan karaan).

- Soo saaridda dhufsanayaasha 100 ee ka yar 1000

- Akhriska iyo Qoraalka Astirooyinka ee Tirooyinka Idil laga bilaabo 101 ilaa 1000.

- Sharxidda iyo Muujinta Qiima-Rugeedka tirooyinka Idil ilaa 1000

- Isbar-bardhigidda iyo Horsanaanta Tirooyinka Idil ilaa 1000 iyaga oo adeegsanaya calaamadaha kala ah "<" ">" iyo "=".

Xisaabta Fasalka 2^{aad}

Ujeeddooyinka gaarka ah ee casharka	Ciwaanada Cutubka qaybaha iyo Casharada	Wax-qabadyada Baris-barashada iyo Qalabyada loo baahan yahay	Tallaabooyinka Qiimeynta
Casharkani marka uu dhammaado ardeydu waa in ay awood u yeelan karaan; - Tixidda dhufsanayaasha 100 ilaa 1000. - U kala Jebinta (is qoridda) dhufsaneyaasha 100 Burooyin (Isugeyn ahaan). - Tirinta, Akhriska, iyo qoraalka dhufsanayaasha 100. - Isugeynta tiro hal-god ah iyo dhufsaneyaasha 100. - U kala Jebinta (u qoridda) tirooyinka saddexda god	5. Tirooyinka Idil ilaa 1000. 1 dhufsaneyaasha 100 (4 xiiso). Tirooyinka Idil 101 ilaa 1000 (4 xiiso)	- Ku hoggaami ardeyda in ay soo saaraan dhufsanayaasha 100 ilaa 1000, iyaga oo 100 ku dhufanaya tirooyinka idil ee 1 ilaa 10. - Fursad u sii ardayda in ay taxaan dhufsaneyaasha 1000, isla markaana ay ku muujiyaan xariiqda tirade. - Ka caawi ardeyda in ay dhufsaneyaasha 100 u kala jebiyaan ama u qoraan Burooyin ah isugeyn, iyaga oo adeegsanaya tusaaleyaal kala duwan sida 400 = 300 + 100. - Ku dhiirigeli ardayda in ay si ficil ah ugu cel-celiyaan tirinta iyo Akhriska dhufsaneyaasha 100, iyaga oo kor ugu	- Weydii ardayda in ay tiraab ahaan ku dhawaaqaan qaar ka mid ah dhufsaneyaasha 100, kadibna ay taxaan. - Weydii ardayda iyo qaar ka mid ah dhufsanayaasha 100 ay u kala jebiyaan burooyin. - Weydii ardayda Akhriska tirinta iyo qoraalka dhufsaneyaasha 100, ilaa 1000. - Weydii ardayda in ay dhufsaneyaasha 100 u geeyaan tirooyinka Idil ee min halka god ah. - Weydii ardayda in tirooyinka 3da god ah ay u kala jebiyaan dhufsaneyaasha 100 iyo tiro hal god ah. - Weydii ardayda tirinta, Akhriska iyo Qoraalka qaar ka mid ah

Ujeeddooyinka gaarka ah ee casharka	Ciwaanada Cutubka qaybaha iyo Casharada	Wax-qabadyada Baris-barashada iyo Qalabyada loo baahan yahay	Tallaabooyinka Qiimeynta
ah oo look ala Jebinayo dhufsaneyaasha 100 iyo tiro hal God ah. • Tirinta, akhriska iyo qoraalka tirooyinka idil ilaa 1000.		dhawaaqaya. • Ku dhiirigeli ardayda in ay si ficil ah ugu cel-celiyaan qoraalka astirooyinka dhufsanayaasha 100. • Ka gacan sii ardayda in ay si ficil ah ugu cel-celiyaan isugeynta tirooyinka min halka god ah (1 ilaa 9) iyo dhufsaneyaasha 100 oo kala duwan. • Ku hogaami ardayda in ay tirooyinka 3 god ah ay u kala Jebiyaan ama u qoraan Burooyinka kala ah dhufsanayaasha 100 iyo tiro hal god ah sida; $405 = 400 + 5.$ • Fursad u sii ardayda in ay si ficil ah ugu cel-celiyaan tirinta, Akhriska iyo qoraalka tirooyinka idil ilaa 1000.	tirooyinka idil ilaa 1000.
• Qoridda iyo Muujinta Qiima-Rugeedka tirooyinka IDil ilaa 1000.	Qiima-Rugeedka Tirooyinka Idil ilaa 1000 (2xiiso) Isbar-bardhigidda iyo	• Fursad u sii ardayda in ay falanqeeyaan macnaha qiima-rugeedka iyaga oo adeegsanaya tusaaleyaal kala duwan. • U ogolow ardayda in ay si ficil ah ugu cel-celiyaan qiima-rugeedka tirooyinka	• Weydii ardayda in ay sharax ka bixiyaan qiima-rugeedka tirooyinka 3da god ah. • Weydii ardayda in qaar ka mid ah tirooyinka idil ilaa 1000 ay ku muujiyaan shaxda qiima-rugeedka. • Weydii ardayda in qaar ka mid ah tirooyinka

Ujeeddooyinka gaarka ah ee casharka	Ciwaanada Cutubka qaybaha iyo Casharada	Wax-qabadyada Baris-barashada iyo Qalabyada loo baahan yahay	Tallaabooyinka Qiimeynta
• Ku muujinta xarriiqda tirada tirooyinka idil ilaa 1000. • Qoridda Horreeyaha iyo Dambeeyaha tiro kasta oo la siiyey ilaa 1000. • Sheegidda tirooyinka u dhexeeya laba tiro oo la siiyey. • Isbar-bardhigidda laba tiro oo kasta oo tirooyin idil ah ilaa 1000 iyaga oo adeegsanaya calaamadahan ">" "<" iyo "=".	Horsanaanta Tirooyinka Idil ilaa 1000 (2xiiso)	3^{da} god ah. • Ka gacansii ardayda in ay shaxda qiima-rugeedka ku muujiyaan tirooyinka idil ilaa 1000. • Ka gacansii ardayda in ay xariiqda tirada ku muujiyaan tirooyinka idil ilaa 1000. • Fursad u sii ardayda in ay qoraan horreeyaha (Tirada ka horraysa) iyo Dambeeyaha (Tirada ka dambaysa) tiro kasta oo tirooyinka idil ah. • Ka caawi ardayda in ay sheegaan ama qoraan tirooyinka idil ee u dhexeeya laba tiro oo loo cayimay ama la siiyey. • Ku dhiirigeli ardayda in ay isbar-bardhigaan laba tiro oo kasta oo ka mid ah tirooyinka idil ilaa 1000. Iyaga oo adeegsanaya calaamadahan kala ah ">", "<" iyo " =".	idil ilaa 1000 ay ku muujiyaan xariiqda tirada. • Weydii ardayda in ay sheegaan horreeyaha iyo Dambeeyaha tirooyinka idil qaar ka mid ah. • Weydii ardayda in ay qoraan tirooyinka idil ee u dhexeeya laba tiro oo aad siisay. • Sii ardayda laba-laba tiro oo aan ahayn tirooyin isku xiga, kadibna ha sheegaan tirooyinka u dhexeeya isla markaana ha isbar-bardhigaan iyaga oo adeegsanaya ">" "<" iyo "=".

CUTUBKA:6[aad] : BARAHA, XARRIIIQAHA iyo SHAXANNO KALE (14 Xisadood)

Ujeeddooyinka Guud ee Cutubkan:

Cutubkani marka uu dhammaado kadib, Ardaydu waxay Awood u yeelan doonaan (Awood u yeelan karaan)

- Sawiridda Xarriiqaha iyaga oo adeegsanaya Mastarad.

- Sawiridda Labjibbaaraneyaasha laydiyadan saddexagallada iyo Goobooyinka.

- Ka soo soocidda Deggaankooda (Agagaarkooda) Walxaha Qaabkoodu yahay Laydi, Saddexagal iyo Goobo.

Ujeeddooyinka gaarka ah ee casharka	Ciwaanada Cutubka qaybaha iyo Casharada	Wax-qabadyada Baris-barashada iyo Qalabyada loo baahan yahay	Tallaabooyinka Qiimeynta
Ardaydu waa in ay Awood u yeelan karaan:- ▪ Sawiridda xarriiqaha Dherekooda la suyey iyaga oo adeegsanaya mastarad. ▪ Magacaabiidda xarriiqaha. ▪ Sawiridda xarriiqo Isgoynaya, iyo Magacaa bidda Barta Isgoyska. ▪ Ku muujinta Baro ka korreeya, Baro ka hooseeya iyo Baro ku dul dhaca xarriiqo ka dusa Bar la siiyey iyaga oo adeegsanaya Mastarad.	**6.BARAYA, XARRIIQAHA iyo SHAXANNO KALE** **6.1**.Sawiridda Xarriiqaha (5 Xiso)	▪ Ku hoggaami ardayda in ay sawiraan xarriiqa Toosan ee dhererkooda la siiyey iyaga oo adeegsanay Mastarad ama walxo leh Gdhifyo Toosan. ▪ Fursad u sii Ardayda in ay Barah iyo Xarriiqaha ku Magacaabaan xarfo waa weyn. ▪ Ka caawii Ardayda in ay sawiraan xarriiqo Isgoynaya, iyaga oo adeegsanaya Mastarad, ka dibna ay magacaabaan Barta Isgoyska ee xarriiqahaasi ay iska gooyaan. ▪ U ogol low ardaya in ay Muujiyaan Baro ka sarreeya, Baro ka hooseeya iyo baro ku dul dhaca xarriiq Toosan oo la siiyey. ▪ Ku Dhiirigeli ardayda in ay sawiraan Xarriiqo ka	▪ Sii Ardayda Dhererka xarriiqo ka duwan, kadibna weydii in ay sawiraan Xarriiqahaas Dabadeedana Hubi shaqadooda. ▪ Weydii Ardayda in ay sawiraan xarriiqo Isgoynaya, kadibna ay Magacaabaan Barta Isgoyska.

Ujeeddooyinka gaarka ah ee casharka	Ciwaanada Cutubka qaybaha iyo Casharada	Wax-qabadyada Baris-barashada iyo Qalabyada loo baahan yahay	Tallaabooyinka Qiimeynta
		dusa hal Bar oo la cayimay ama la siiyey iyaga oo adeegsanaya Mastarad, Dabadeedna ay Magacaabaan.	
▪ Sawiridda iyo Magacaabidda Laydiga. ▪ Sawiridda iyo magacaabidda Laba Jibbaarane Dhererka Dhinacyadiisa la siiyey. ▪ Sawiridda iyo Magacaabidda saddexagal. ▪ Sawiridda Goobada.	6.2. Laydi, Labajibbaarane, Saddexagal iyo Goobo (7 Xiso)	▪ Ka caawiArdayda, iyaga oo lammaane ah in ay soo qaataan cinjirka lacagta, ama dun ama xarig labadiisa Af la iskuxidhay kadibna ay farahooda ku muujiyaan Laydi, Labajabbaarane iyo saddexagal. ▪ Ku hoggaami ardayda in ay sawiraan laydiga, labajibbaaranaha, iyo saddexagalka iyaga oo adeegsanaya mastarad. ▪ Fursad u sii Ardayda, iyaga oo lammaane ah in Qaababka walxaha laga helo Agagaarkooda ee Maalin kasta ay Arkaan ay ku Addiyaan Laydiga, labajibbaaranaha iyo Saddexagalka. ▪ Ka caawi ardayda in ay si ficil ah ugu celCeliyaan sawiridda Goobooyin kala duwan iyaga oo adeegsanaya shilin ama walxo kale oo Qaabka Goobada leh.	▪ Weydii Ardayda in ay sawiraan Laydi, Saddexagal Goobo IWM. ▪ Weydii Ardayda in arday kasta Ardayga dhinaciisa fadhiya uu u sharraxo sawiridda laydiga labajibbaaranaha iyo saddexagalka isaga oo sawir ku muujinaga.
▪ Aqoon siga walxaha Qaabkoodu yahay Laydi, Labajibbaarane, saddexagal iyo Goobo ee laga heli karo	6.3. Shaxannada Qaababkooda laga helo Deggaanka (2 Xiso)	▪ Fursad u sii Ardayda, iyaga oo koox-koox ah in ay Fasalkooda, Garoonka ciyaaraha, Guryahooda IWM. Ka Raadiyaan walxaha Qaabkoodu yahay Laydi, labajibbaarane,	▪ Weydii Ardayda in ay sheegaan walxaha laga helo Guryahooda eel eh Qaabka laydiga, ama labajibbaaranaha ama saddexagalka ama

Ujeeddooyinka gaarka ah ee casharka	Ciwaanada Cutubka qaybaha iyo Casharada	Wax-qabadyada Baris-barashada iyo Qalabyada loo baahan yahay	Tallaabooyinka Qiimeynta
Deggaankooda		saddexagal iyo Goobo. Ka dibna ay Tiriyaan isla markaana ay magacaabaan inta walxood eel eh Qaabka laydiga, Labajibbaaranaha, saddexagalka ama Goobada.	Goobada.

CUTUBKA:7^{aad} : <u>LACAGTA (4 Xisadood)</u>

Ujeeddooyinka Guud ee Cutubkan:

Cutubkani marka uu dhammaado kadib, Ardaydu waxay Awood u yeelan doonaan (Awood u yeelan karaan)

- Isugeynta iyo kalagoynta lacagta, iyaga oo Adeegsanaya lacagteena Itoobiya.

- Sameynta Jilidda Matalaadda Dukaanlaha iyo Macaamiishiisa oo wax ku kala iibsanaya Lacagteena Itoobiya.

Ujeeddooyinka gaarka ah ee casharka	Ciwaanada Cutubka qaybaha iyo Casharada	Wax-qabadyada Baris-barashada iyo Qalabyada loo baahan yahay	Tallaabooyinka Qiimeynta
Ardaydu waa in ay Awood u yeelan karaan:- ▪ Isugeynta Lacagteena Itoobiya. ▪ Kalagoynta Lacagteena Itoobiya.	**7. LACAGTA** **7.1.** Isugeynta iyo Kalageynta Lacagta (2 Xiso)	▪ Ku hoggaami Ardayda in ay isu geeyaan Lacagteena Itoobiya, iyaga oo adeegsanaya sawirada lacagta Qadaadiicda ah iyo tan Nootka ah. ▪ Ku hoggaami Ardayda in ay kalagooyaan Lacagteena Itoobiya, iyaga oo adeegsanaya Sawirada lacagta qadaadiicda ah iyo tan Noodka ah.	▪ Weydii ardayda in ay garanayaan sawirada Qaar ka mid aha Lacagteena Qadaadiicada ah iyo lacagteena Nooda ah.
▪ Adeegsiga Lacagteena Itoobiya ee matalaadda Dukaaln laha iyo Macaamishiisa (Shopping)	**7.2.** Dukaan laha iyo Macaamiishiisa (Shopping) (2 Xiso)	▪ Ku Gacansii Ardayda in ay Matalaad ku sameeyaan Dukaan laha iyo Macaamiishiisa oo wax ku kala iibsanaya Lacagteena iyaga oo adeegsanaya Moodheello Lacagteena Itoobiya ah.	▪ Weydii Ardayda in ay ku Tusaan Mata laadda Dukaan laha iyo Macaa miishiisa (Role play of Buyer andseller)

CUTUBKA:8[aad] : <u>WAQTIGA/AMMINTA (4 Xisadood)</u>

Ujeeddooyinka Guud ee Cutubkan:

Cutubkani marka uu dhammaado kadib, Ardaydu waxay Awood u yeelan doonaan (Awood u yeelan karaan)

- Ku sheegidda waqtiga saacada, Nus-Saac, iyo Rubuc-Saac iyaga oo adeegsanaya Saacadda kabaalada leh iyo Saacadda Dhijitaalka ah (Saacaddaha aan kabaalada lahayn).
- Sharraxidda Xidhiidhka ka dhexeeya saacadda iyo Daqiqaddaha.

Ujeeddooyinka gaarka ah ee casharka	Ciwaanada Cutubka qaybaha iyo Casharada	Wax-qabadyada Baris-barashada iyo Qalabyada loo baahan yahay	Tallaabooyinka Qiimeynta
Aradaydu waa in ay Awoodi karaan:- ▪ Akhrinta saacaddaha kabaalada leh iyo sheegidda waqtiga sida saacad, Nussaac, Rubuc-Saac. ▪ Akhrinta saacaddaha aan kabaalada lahayn (Digital clock) iyo sheegidda waqtiga sida saacad-buuxda, Nus-Saac , iyo Rubuc-Saac.	**8. WAQTIGA** **8.1**. Akhrinta Saacadda (2 Xiso)	▪ Ku dhiirigeli ardayda in ay sawiraan saacaddo kabaalo leh oo muujinaya Ammin (waqtiyo) kala duwan sida saacad-buuxda, Nus-Saac iyo Rubuc-Saac. Tusaale ahaan 2 saac, 3saac, 4 saac iyo badh, 5saan iyo Rubuc IWM. ▪ Fursad u sii Ardayda in ay Akhriyaan saacaddaha aan kabaalada lahay isla markaana sheegaan waqtiga ay Tilmaamayaan saacaddaha aan kabaalada lahayn (Digital Clocks) sida saacad-Buuxda, saacad iyo Rubuc. Tusaale ahaan 1saac; 4saac; 6saac iyo badh; 9 saac iyo Rubuc IWM.	▪ Weydii Ardayda in ay isku Addiyaan sawirradda saacaddaha (Tan kabaalada leh iyo tan aan lahayn) iyo Amminta ama waqtiga ay Tilmaameyso saacad kasta sida saacad buuxda, Nus-saac Rubuc-Saac.
▪ Sharraxidda xidhiidhka ka dhexeeya saacadda iyo Daqiiqaddaha	**8.2.** Xidhiidhka ka dhexeeya saacadda iyo Daqiiqaddaha (2 Xiso)	▪ Fursad u sii ardayda in ay Daahfuraan xidhiidhka ka dhexeeya saacadda iyo Daqiiqaddaha iyaga oo adeegsanaya saacadda kabaalada leh, Isla markaana u Firsanaya socodka kabaalka Daqiiqaddaha Tiriya iyo ka baalka saacadda Tiriya.	▪ Weydii Ardayda halkii Sac waa immisa Daqiiqadood?

CUTUBKA:9^{aad} : <u>XOG-URUR, INTA iyo HAB-YAALKA (6 Xisadood)</u>

Ujeeddooyinka Guud ee Cutubkan:

Cutubkani marka uu dhammaado kadib, Ardaydu waxay Awood u yeelan doonaan (Awood u yeelan karaan)

- Soo ururinta xogaha ama Macluumaadka Fudud.

- Shaxaynta (ku muujinta shaxda) xogaha ama Macluumaadka Fudud ee ay soo ururiyeen.

- Dhammaystirka iyo sameynta Hab-yaallada Fudud ee wal xaha iyo Tirooyinka.

Ujeeddooyinka gaarka ah ee casharka	Ciwaanada Cutubka qaybaha iyo Casharada	Wax-qabadyada Baris-barashada iyo Qalabyada loo baahan yahay	Tallaabooyinka Qiimeynta
Ardaydu waa in ay Awoodu karaan:- ▪ Soo ururinta xogaha Fudud	9.XOG-URURINTA iyo HAB-YAALKA 9.1. Soo ururinta xogaha Fudud (2 Xiso)	▪ Ku dhiirigeli ardayda, iyaga oo adeegsanaya su'aalo ku haboon, in ay xogaha ka soo ururiyaan Ardayda kale ee fasalkooda sida waxyaabaha ay ka helaan/Jecel Jacashahay in aad cabto? Ama cabbitaan ka kee ka heshaa?"	▪ Weydii Ardayda in xogo Fudud ka soo ururiyaan Fasalkooda ama/ iyo Gurigooda, kadibna Hubi xogaha ay soo ururiyeen.
▪ Shaxaynta xoga haas ay soo ururiyey (ku muujinta shaxda xogaha)	9.2. Shaxda xogaha Fudud (2 Xiso)	▪ Ka caawi Ardayda in ay sameeyaan "shax" muujinaysa xogaha Fudud ee ay soo ururiyeen isla markaana ay si fudud u fahmikaraan.	▪ Weydii Ardayda in ay sameeyaan shax muujinaysa xogaha ay ka soo ururiyeen Fasalkooda ama aurigooda.
▪ Dhammaystir ka Hab-yaallada wal xaha iyo Tirooyinka. ▪ Sameynta (Habaynta) Hab-yaallada walxaha iyo Tirooyinka	9.3. Hab-yaallada Fudud ee waa xaha iyo Tirooyinka (2 Xiso)	Δ Δ Δ Δ Δ ------ □OOΔ□OOΔ□OOΔ 1, 3, 5, ---------- ▪ Fursad u sii ardayda in ay Dhammaystiraan Hab-yaallada Fudud sida kuwan Hoose. ▪ Ku dhiirigeli Ardayda, iyaga oo Lammaane ah (Laba-Labo ah) in ay soo urur iyaan Dhawr in xood (ilaa 3 shay) walax kastana uu noqdo ugu yaraan 5 xabbo. Isla markaana ku Dhiirigeli in ay sameeyaan Hab-yaallo ka kooban walxaha ay soo ururiyeen. Kadibna Lammaane kasta Lammaanaha dhammaystiro Habyaalladaas iyaga oo is dhaafsanaya.	▪ Weydii Ardayda in ay Dhammaystiraan Hab-yaal-lada ama ku buuxiyaan walxaha iyo Tirooyinka ka dhiman meelaha ka bannaan Hab-yaalladaas walxaha iyo Tirooyinka. ▪ Weydii Ardayda in ay sameeyaan Hab-yaallo ay Maskaxdooda ka keeneen.